

# BUUG GACMEEDKA DARAWALKA MINNESOTA



Waaxda Badbaadada Dadweynaha ee Qaybta  
Adeegyada Darawalka iyo Baabuurta  
[drive.mn.gov](http://drive.mn.gov)

## **Macluumaad iyo Sharciyo cusub**

### **Khidmadaha Shattiga Darawalnimada iyo Kaarka Aqoonsiga oo Kordhay**

Laga bilaabo Luulyo 1, 2023, dhammaan khidmadaha aqoonsiga (ay ku jiraan shatiga darawalnimada, kaararka aqoonsiga, oggolaanshaha bartayaasha ganacsiga iyo koobiga) ayaa lagu kordhiyey \$6. Khidmad 75 sinti ah oo dheeri ah (oo markii hore loo yaqaanay khidmada REAL ID) ayaa lagu daray khidmadaha shattiga dhammaan darawalnimada, iyadoo la isu geyn ay korodhay \$6.75 khidmadaha shattiga darawalnimadu.

Laga bilaabo Oktoobar 1, 2023, khidmadaha xaraynta arjiyada cusub ee aqoonsiga ayaa kordhay oo noqotay \$16 iyo khidmadaha xaraynta arjiyada dib u cusboonaysiinta oo kordhay oo noqday \$11. Fadlan booqo websaydkeena si aad u aragto khidmadaha hadda jira.

### **Shatiga Darawalnimada ee Loogu Talagalay Dadka oo Dhan**

Laga bilaabo Oktoober 1, 2023, DVS waxay hirgelin doontaa shatiga darawalnimada ee loogu talagalay dadka oo dhan. Sharcigan cusub wuxuu u ogolaanayaa dhammaan reer Minnesota inay helaan kaarka aqoonsiga ee Minnesota, oggolaanshaha barista ama shattiga caadiga ah iyadoo aan loo eegin xaaladdooda socdaalka. Sharcigu wuxuu meesha ka saarayaa baahida loo qabo in la muujiyo caddaynta joogitaanka sharciga ah ee Maraykanka oo uu cusboonaysiinayaa dukumeentiyada shakhsiga bixin doono si uu u helo kaarka.

### **Isbeddellada Caddaynta Deganaanshaha ee REAL ID (AQOONSIGA DHABTA AH)**

Dukumeentiyada uu codsaduho bixin karo si loo caddeeyo deganaanshiyaha loogu talagalay bixinta REAL ID waa la cusboonaysiiyay laga bilaabo Agoosto. 1, 2023. Dukumeentiyada caddaynta ee cusub waxaa ka mid ah biilasha interneedka iyo biilasha telefishinka in loo isticmaalo in ay ka mid yihiin biilasha adeega guriga, iyo sidoo kale oggolaanshaha bayaanka guriga nolosha/xanaanada la kaalmeeyo. Ciwaanka ku yaalla dukumeentiga caddaynta deganaanshuhu waa inuu la mid yahay cinwaanka ku qoran arjiga. Fadlan booqo websaydkeena si aad u hesho liiska cusub ee dukumentiyada caddaynta.

## **Macluumaadka Daryeelaha ayaa ku Jiri Doona Shattiga Darawalnimada ama Diiwaanka Kaarka Aqoonsiga**

Dadka Minnesota hadda waxay ku dari karaan macluumaad diiwaankooda DVS taasoo ogeysiin doonta sharci fulinta inay u yihiin daryeela qof kale. Haddii uu shil dhacdo, saraakiisha fulinta sharcigu waxay ogaan doonaan inuu jiro qof gurigii jooga oo ku tiirsan daryeelaha. Tani waxay ka dhigan tahay in mas'uuliyiintu ay si degdeg ah uga jawaabi karaan si loo hubiyo in shakhsiga ku tiirsan aan laga tagin iyada oo aan la ilaalinaynin. Ma aha oo kaliya inay tani bixiso dammaanad in qofka dadkiisa la daryeeli doono haddii ay masiibo xun ay dhacdo, laakiin sidoo kale waxay yaraynaysaa welwelka iyo walbahaarka fikirka ah in qofku ka walbahaaro in uu ifka cidla kaga tagayo kuwa uu jecel yahay.

## **Khidmadaha iyo Cashuurta Ka Dhaafitaanka Howlgabka ciidamada leh Naafanimada la Xiriirta Adeega Ciidamada**

Sharcigan cusub waxa uu khidmadaha ka dhaafayaa howlgabka leh naafanimada 100% la xiriirta adeega ciidamada in ay bixiyaan khidmadaha diiwaangelinta iyo cashuuraha ee ilaa laba baabuur, khidmadaha lahaanshaha iyo khidmadaha la xiriirta shattiga darawalnimada iyo kaararka aqoonsiga, oo ay ku jiraan khidmadaha xaraynta.

## **Balaarinta u qalmitaanka Magacaabista Aqoonsashada Ciidamada Ciidamada-ka-fariistey Ilaalada Qaranka**

Sharcigan cusub waxa uu balaarinayaa noocyada howlgabka ciidamada ee awood u leh in ay helaan tilmaame howlgab, iyo sidoo kale dukumeentiyada caddaynta ee la ogolyahay in la aqbal. Sharcigu wuxuu ogolyahay tiro badan oo ka mid ah howlgabka ciidamada ee Minnesota in helaan astaanta in ay yihiin howlgabka ciidamada oo lagu muujiyo shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga. Codsadayaasha u qalma hadda waxaa ku jira xubnaha ka fariistay Ilaalada Qaranka ama qayb ka ah kaydka ciidamada qalabka sida ee Mareykanka. Dukumeentiyada caddaynta waxaa ka mid ah kaararka aqoonsiga hawlgabka milatariga, kaararka aqoonsiga hawlgabka iyo kaararka aqoonsiga caafimaadka ee hawlgabka, marka lagu daro DD-214 oo muujinaya shuruudo xaalad sharaf leh ama xaalad sharaf oo leh 181 maalmood oo adeeg xiriir ah.

## **Ka Reebitaanka Shuruudaha Imtixaanka Qoran Dadka Cusub ee Degan Minnesota**

Dadka codsanaya shatiga darawalnimada Minnesota ee jira 21 iyo ka weyn ee haysta shatiga aan dhicin ee gobol kale hadda kadib loogama baahna inay galaan imtixaanka qoran.

## ***Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota***

Sharcigan cusub waxa kale oo uu meesha ka saarayaa shuruudda imtixaanka qoran haddii codsaduhu uu gobol kale ka haysto ogolaanshaha wadista laba lugoodle (mooto) ansax ah.

### **Fursada In Aad Arjiga Ku Bixiso Xogta Qowmiyada Iyo**

#### **Jinsiyada**

Laga bilaabo Janaayo 1, 2024, codsiyada shatiga darawalnimada cusub iyo kuwa la cusboonaysiinayo iyo kaararka aqoonsiga waxay waydiisan doonaan codsadyaasha inay bixiyaan xogta qowmiyada iyo jinsiyadda.

Bixinta xogtani waa ikhtiyaari waxaana loo ilaalinayaa in ay tahay xog shakhsiyeed oo qarsoodi ah.

Xogta waxaa lala wadaagi doonaa Waaxda Badbaadada Dadweynaha ee Xafiiska Badbaadada Wadooyinka (OTS) ujeeddooyinka lagu daraasadaynayo ganaaxida/tigidhada waddooyinka, waxbarashada darawallada iyo wax intaas ka badan.

### **Balaarinta Shatiga Darawalnimada Sabab Caafimaad dartood**

Waxay fursad u abuuraysaa 15 jirku si uu u helo shattiga darawalnimada ee la xiriira baahiyahooda caafimaad, baahiyaha caafimaad ee qaraabada ama qaraabada naafada ah oo ay dhib ku tahay wadista baabuurta.

Codsaduhu waa inuu buuxiyo shuruudaha oo uu bixiyo dukumentiyada loo baahan yahay. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka dhaafitaanka shuruudda da'da ugu yar ayaa ku jira cutubka 1.

### **Ballaarinta Shatiga Kooban ee Shaqada Beeraha**

Waxay kordhisay u qalmitaanka shatiga beeraha ee kooban (darawalada aan weli qaangaarin) si loogu daro codsadyaasha ka shaqeeya beer, iyadoo aan loo eegin haddii waalidkood ama masuulkoodu uu leeyahay beerta.

Xayiraadaha kale ee shatiga beeruhu sidiisii ayuu ahaanayaa.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka dhaafitaanka shuruudda da'da ugu yar ayaa ku jira cutubka 1.

### **Fursada ku Codsiga Fogaanta ee Shakhsiyaadka xiran**

Waxay u ogolaanaysaa dib u cusboonaysiinta fogaanta shatiga darawalnimada iyo kaararka aqoonsiga codsadhaha ku jira xukun lix bilood ka badan oo ku jira xabsi ama goobta dhaqan celinta ee aan heshiis hore kula jirin DVS si ay u bixiso adeegan.

## Shattiga Dib u soo Dhexgalka

Sharcigan cusub waxa uu fursad u abuurayaa codsabayaasha u qalma in xabsiga laga sii daayo in ay helaan shattiga darawalnimo oo ansax ah iyada oo aan la bixin ganaaxyo lagu leeyahay ama khidmadaha dib u soo celinta. Codsabayaashu waa inay buuxiyaan shuruudaha u qalmitaanka. Kaarku waxa uu dhacayaa 15 bilood kadib marka la bixiyo waana la burinayaa haddii codsaduhu uu galo xad gudub kasta oo keeni kara in lagala noqdo mudnaanta darawalnimada.

## Buugga Darawalka iyo Qalabka Barashada

Sharcigan cusub ayaa faray DVS inay abuurto qalab waxbarasho oo loogu talagalay imtixaannada qoran iyo imtixaannada waddooyinka si ay uga caawiyaan shakhsiyaadka isu diyaarinta qaadashada imtixaannada darawalnimada ee looga baahanyahay. Qalabka waxa laga heli karaa websaydka DVS.

## Isbeddellada lagu sameeyey Diiwaangelinta Codbixiyaha ee Arjiga Shatiga Darawalnimada iyo Arjiga Kaarka Aqoonsiga

Halkii uu qofku "ka dooran lahaa" isu diiwaangelinta codaynta marka uu codsanayo ama cusboonaysiinayo shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga, xogta codsada bixiya dukumeenti muwaadinimo (Baasaboorka Mareykanka, Shahaadada Dhalashada Maraykanka, Shahaadada Muwaadinimada, iwm.) waxaa si toos ah loogu gudbin doonaa Xafiiska Xoghayaha Dawladda si loo diiwaan geliyo qofka si uu u codeeyo.

Haddii shakhsigu uu hore uga codsaday shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga gudaha Minnesota, DVS waxa laga yaabaa in ayna hadda haynin dukumentiyada ee ay u isticmaaleen si ay u cadeeyaan aqoonsiga. Qofka ayaa wuxuu bixin karaa dukumeenti muujinaya jinsiyadda si uu u bilaabo nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha ee nidaamka cusub. DVS uma diri doonto xogta Xafiiska Xoghayaha Dawladda haddii codsaduhu uu bixiyay dukumeentiyan kahor Oktoobar. 1, 2023.

Haddii shakhsigu uuna rabin in loo diiwaangaliyo si uu u codeeyo kadib marka uu siiyo DVS dukumentiyada muwaadinimada, waa in ay Xafiiska Xoghayaha Dawladda ogaysiiyaan is ayna doonaynin. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codaynta waxaa laga heli karaa:

[www.sos.mn.gov/elections-voting/register-to-vote](http://www.sos.mn.gov/elections-voting/register-to-vote)

## **Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota**

Waaxda Badbaadada Dadweynaha  
Waaxda Adeegyada Darawalka iyo Gaadiidka (DVS) waxaa ka go'an in ay abuuro **jawi badbaado u leh macaamiisheena iyo shaqaalaha.**

Waa dambi in la farageliyo shaqada shaqaalaha DVS. Minn. Stat. 609.50, Subd.5.

### **LOOMA DULQAADAN DOONO DHAQAMADA SOO SOCDA:**

1. Dhaqan qallafsan ama rabshadaha ah, oo ay ku jiraan aflagaadada shaqaalaha ama macaamiisha.
2. Afxumo ama aflagaado, dhaqdhaqaaqyo tilmaamo jirka ah ama ficillo.
3. Faragelinta adeegyada la bixinayo.
4. Ku guuldareysiga inaad raacdo tilmaamaha shaqaalaha.
5. Dhaqanka rabshadaha ah, oo ay ku jiraan akhlaaqda khatar gelinaya shaqaalaha ama macaamiisha, ama waxyeelaysa hantida dawladda.

## **Fal dambi ah in la hor istaago shaqada shaqaalaha DVS.**

Waa fal dambi ah in la hor istaago shaqada shaqaalaha DVS. Minn, Stat. 609.50, Subd. 5.

## **Buuxinta Codsiga Hore ayaa Boobsiinaysa Booqashooyinka Xafiiska**

Arjiga hordhaca ah adeegyada khadka interneedka ee DVS wuxuu kuu ogolaanayaa inaad qayb badan oo ka mid ah ku geliso arjigaaga khadka interneedka oo aad yarayso wakhtiga aad ku qaadanayso joogista xafiiska marka aad samaynayso wax kala buuxsashada.

Adeegyada khadka tooska ah ee DVS, oo sidoo kale laga heli karo aaladaha moobilka, waxaa kamid ah liiska dukumiintiyada lagaa rabo nooc kasta oo shatti ah si aad u diyaarsato dhammaan dukumiintiyada muhiimka ah marka aad tagayso xafiiska shattiga darawalnimada. Fadlan xaqiiji inaad keento bogaaga xaqiijinta iyo dukumiintiyada ku qoran waraaqda xaqiijinta.

Arjigaaga ku billow khadka interneedka adiga oo isticmaalaya qaabka arjiga hordhaca ah, wax aan ka badnayn 30 maalmood kahor intaadan booqan xafiiska shattiga darawalnimada, si aad meesha uga saarto baahida loo qabo buuxinta arjiga warqadda ah.

## Fariin ka timid Gudoomiyaha Komishaneerka

Dadka reer Minnesota ee Qaaliga ahoow,

Haddii aad tahay darawal khibrad leh oo tobaneeyo sano gaari wadayey ama aad tahay qof dhalinyaro ah oo hadda baranaya sharciyada waddada markii ugu horeysay, Waaxda Badbaadada Dadwaynaha ee Minnesota (DVS) waxaa ka go'an inay hubiso in qof kasta oo haysta shattiga darawalnimada wuu yaqaano sharciyada iyo dhaqamada u horhaadaya baabuur wadis badbaado leh.

Waxaa Minnesota ku jooga in ka badan 4.5 milyan darawallo shatti haysta ah, tiradaasina way sii kordhi doontaa oo keliya marka aan hirgelinno shatiga darawalnimada ee loogu dhammaan dadka ee sharciga uu ansixiyay Golaha Sharci dejinta Minnesota. Hadafkayagu waa dhammaan darawaladaas - iyo sidoo kale dadka lugaynaya iyo baaskiilleydu ay waddada wadaagaan - inay si badbaado leh ugu maraan waddooyinka gobolkeena oo ay nabad ugu tagaan guriga kuwa ay jecel yihiin.

Buug gacmeedkani waxa uu qeexayaa sida aan dhammaanteen uga qaybqaadan karno si aan u gaarno yoolkaas, iyo sidoo kale habka loo noqdo darawal shati leh gudaha Minnesota. DVS waxay samaysay horumar weyn si ay u hubiso in adeegyadayada muhiimka ah ay heli karaan dadka reer Minnesota ee asal kasta ka soo jeeda. Booqo [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov) si aad u hesho kaaliyaheena farsamada ah ee luqadaha badan ku hadla oo ah Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali iyo Hmong, iyo si aad u samaysato akoonkaaga MyDVS si aad ula socoto shattigaaga iyo macluumaadka diiwaangelinta khadka interneedka ah.

Xasuusnoow in gaari wadistu tahay faa'iido oo ay mas'uuliyad ay kaa saarantahay dadka kale ee waddada adeegsanaya. Fadlan suunka xiro, u hogaansan sharciyada xawaaraha oo waligaa ha gaari ha kaxaynin adigoo khamri cabsan. Qadarinta sharciyada wadooyinka iyo qadarinta darawallada kale ayaa ah waxa ilaaliya badqabka qof kasta oo waddada maraya.

Mahadsanid,



Bob Jacobson  
Dadwaynaha

## **Liiska Mawduucyada**

Liiska Hubinta Imtaxaanka Qoran iyo Imtaxaanka Waddada .....	I-II
Cutubka 1 Shattigaaga Darawalnimada .....	11
Cutubka 2 Gaarigaaga .....	31
Cutubka 3 Sharciyada Gaadiidka iyo Wadista Gaariga .....	37
Cutubka 4 Wadaagista Waddada.....	60
Cutubka 5 Calaamadaha, Tilmaamaha, iyo Calaamaha Laamiga .....	80
Cutubka 6 Shuruudaha Gaari Wadista .....	105
Cutubka 7 Faa'iidooyinkaaga Gaari Wadista .....	125
Cutubka 8 Darawalnimo kala dhiman.....	129
Cutubka 9 Kaydka Xogta iyo Diiwaanka.....	138

*Xog ku saabsan Buug Tusmeedkaan:*

*Buug tusmeedkaan wuxuu quseeyaa sharciyada iyo shuruudaha Minnesota. Si aad u hesho halbeegyo dhamaystiran, akhri sharciyada iyo xeerarka Minnesota. Dukumiintigani maaha awood sharci oo toos ah oo maxkamad loo adeegsan karo.*



*Waaxda Badqabka Dadwaynaha ee Gobalka Minnesota. Buuggan Darawalka Minnesota waxaa lagu daabacay ogolaanshaha Waaxda Badqabka Dadwaynaha ee Minnesota.*

*Macluumaadkan waxaa loo diyaarin karaa qaabab kale oo loogu talagalay shakhsiyadka naafada ah. Si lagu caawiyo, wac: 651 297-3298 ama (TTY) 651-282-6555*

*Jaantuska meertada waddada waxaa bixiyey Gudiga Cilmi Baarista Waddada ee Maxalliga ah  
Lambarka Foomka 30000-33 (11/2021)*



## Liiska Hubinta Imtaxaanka Qoran

**Ma haysataa dhammaan macluumaadka aad ugu baahan tahay imtaxaankaaga qoran? Halkaan ayaad ka helaysaa liiska hubinta oo kaa caawinaaya inaad u diyaar garoowdo booqashadaada:**

- Waxaan qabsaday ballanta imtaxaanka qoran ee Heerka D.
- Waxaan buuxshay codsiga hore ee oonleenka ah anoo ka buuxshay barta [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov), muddo aan ka badnayn 30 maalmood kahor balantayda
- Waxaan haystaa aqoonsiga la iiga baahan yahay (ka fiiri boggaga 4-6).
- Waan garanayaa Lambarkayga Sooshal Sakuuratiga (SSN) haddii aan u qalmo SSN.
- Waxaan wataa lacag aan ku bixiyo khidmadaha ku habboon.

**Haddii aad ka yar tahay 18 sano jir:**

- Waxaan jiraa ugu yaraan 15 sano.
- Waxaan haystaa shahaadada diiwaan gelinta (“Blue Card”) taasoo muujinaysa inaan dhameeyay casharka fasalka waxaan isu diiwaangeliyey casharka wadista gaariga: AMA waxaan haystaa shahaadadayda diiwaangelinta ee (“Pink Card”) taasoo muujinaysa inaan ka diiwaan gashanahay koorso isku dhafan oo barashada darawalnimada ah waxaan dhameeyay 15 saacadood ee manhajka lagu barto fasalka.
- Haddii aan dhameeyay, waxaan haystaa shahaadada dhamaystirka Manhajka Waalidnimada kaabaayo.
- Waalidkayga, mas’uulka ay maxkamaddu magacawday, waalidka korinta ku meelgaarka ah eee degmadu magacawday ama agaasimaha barnaamijka ku meelgaarka ah ee ku noolaanshaha ee aan deganahay ayaa saxeexi doona oo ansixin doona arjigayga. Haddii arjiga uu saxeexo qof aan ahayn waalidkay, waxaan haystaa dukumeentiga ku haboon.

## Liiska Hubinta Imtaxaanka Wadooyinka

**Ma haysataa dhammaan xogta aad ugu baahan tahay imtaxaankaaga wadooyinka?**

**Halkaan ayaad ka helaysaa liiska hubinta oo kaa caawinaaya inaad u diyaar garoowdo booqashadaada:**

- Waxaan qabsaday ballanta imtaxaanka Waddada.
- Waxaan buuxiyey arjiga hordhaca ah khadka internetka oo aan ka buuxiyey barta [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov), muddo aan ka badnayn 30 maalmood balantayda kahor.
- Waxaan haystaa ogolaanshayga barista oo ansax ah oo aan u dhiibayo imtaxaan qaadaha.
- Waxaan keensan doonaa gaari si fiican u shaqaynaya kaas oo aan ku galayo imtaxaanka.
  - Albaabada waa in laga furi karaa banaanka iyo gudaha.
  - Suumanka amaanka kursiga gaarigu waa inay si sax ah u shaqaynayaan.
  - Nalalka hore, kuwa danbe, nalalka bareega iyo nalalka tilmaamaha leexashadu waa inay si fiican u shaqaynayaan.

## ***Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota***

- Diiwaangelinta gaariga (taarikada iyo shaabadaha istiikarada ah) waa inay yihiin kuwo aan dhicin ama gaarigu way in ay ku dhegantahay ogolaanshaha 21 maalmood ah.

- Waxaan haystaa caddayn hadda ah ee caymiska gaariga aan ku galayo imtixaanka. Cadaynta caymiska ee la aqbali karo waxaa kamid ah: Kaarka rasmiga ah ee caymiska oo ka soo baxay shirkada; bogga shaacinta caymiska; caymiska khadka interneedka ku jira ee lagasoo daabacay websaydka shirkada ama lagu keenay asagoo ku jira aalad elektaroonig ah.
- Waxaan wataa lacag aan ku bixiyo khidmadaha ku habboon.

### **Haddii aad ka yar tahay 18 sano jir:**

- Waxaan jiraa ugu yaraan 16 sano.
- Waxaan haystaa shahaadadayda dhamaystirka koorsada (“White Card”) oo muujinaysa inaan dhameeyay waxbarashada darawalnimada.
- Waxaan haystay ogolaanshaha barista lixdii bilood ee ugu danbeeyay aniga oo aan la igu helin jabinta shaciga baabuur socda ama jabinta sharciga khamriga ama maandooriyaha.
- Haddii dhammaan ama qayb kamid ah khibradayda gaari wadista ee lixda bilood aan kusoo qaatay gobal aan ahayn Minnesota, waxaan haystaa diiwaanka darawalnimada oo la xaqiijiyey oo kasoo baxay gobalkaas si loo xaqiijiyo inaan u qalmo shatti ku meelgaar ah.
- Waxaan haystaa Diiwaankayga Gaari Wadista La korjoogteeyay oo uu buuxiyey uuna saxiixay waalid ama masuul.
- Haddii aan dhameeyay, waxaan haystaa shahaadada dhamaystirka Manhajka Waalidku kaabaya.
- Waalidkay, masuulka maxkamadu magacawday, waalidka i korsaday ee degmadu magacawday ama agaasimaha barnaamijka deganaanshaha ku meelgaarka ah ee aan daganahay ayaa saxiixi doona ansixinna doona arjigayga. Haddii arjiga uu saxiixi doono qof aan waalidkay ahayn, waxaan haystaa dukumeentiga ku habboon.

### **Haddii aad tahay 18 sano jir:**

- Waxaan haystay ogolaanshahayga barista gaari wadista ugu yaraan lix bilood.

### **Haddii aad jirto 19 sano ama ka weyn:**

- Waxaan haystay ogolaanshahayga barashada gaari wadista ugu yaraan saddex bilood.

*Cutubkaan wuxuu xog ka bixinayaa sida loo qaato shattiga Darawalnimada ee Minnesota.*

### Qaadashada Shattigaaga Darawalnimada

Qof kasta oo wada gaari matoor ku shaqeeya kuna wada wadooyinka ama jidadka waawayn ee dadwaynaha ee Minnesota waa inuu haystaa ruqsad darawalnimo shaqaynaysa oon dhicin.

Haddii waligaa gobol ama wadan aadan ka qaadan shatti darawalnimo, waa inaad ku gudubto imtixaanka qoran iyo imtixaanka aragga ah, oo aad codsataa ogolaanshaha barista, oo aad ku gudubto imtixaanka waddada.

Haddii shattigaaga Minnesota uu dhacay in ka badan hal sano, balse in ka yar shan sano, waa inaad ku gudubto imtixaan qoraal ah iyo imtixaanka aragga ah kahor intaadan codsan shatti cusub.

Haddii aad 21 jir tahay ama ka weyn tahay oo aad Minnesota uga soo guurtay gobol kale, qaar dhulalka Maraykankad ah ama Kanada, waxaad ku heli kartaa shatti marka aad ku gudubto imtixaan aragga/indhaha ah. Waxaad haysataa ilaa 60 maalmood kadib markaad noqoto qof dagan gobalka inaad qaadata shattiga ama ogolaanshaha caadiga ah ee Minnesota; shattiga gawaarida waaweyna waxaad haystaa ilaa 30 maalmood. Waxaa sidoo kale qasab ah inaad keento shattiga darawalnimada ansax ah, ama mid dhacsanayd wax ka yar hal sano, oo ka soo baxday gobalkii aad horay u daganayd. Haddii shattiga gobolkii aad horay u daganayd ay dhacsan tahay wax ka badan hal sano waa inaad ku guulaysato imtixaanka waddada. Haddii shattigaaga gobolka kale ay ku taallo inaad mootana wadi karto, waxaad ku heli kartaa ogolaanshaha wadista mootada ee Minnesota adiga oo bixinaya khidmada ku habboon. Haddii shattigaagu dhacay oo aad rabto inaad hesho ogolaanshaha wadista mootada waxaa laga yaabaa in laga rabo inaad ku gudubto imtixaan qoraal ah, imtixaan waddada ah oo aad bixisid khidmadaha ku habboon.

Haddii aad usoo guurayso Minnesota aadna kasoo guurayso wadan ka baxsan Maraykanka ama Kanada, waa qasab inaad ku baasto imtixaanka qoraalka ah, baaritaanka aragga, iyo imtixaanka waddada xataa haddii aad haysato shatti ansax ah oo aad ka haysatay wadankaagii hore.

Uma qalmi doontid inaad hesho shattiga darawalnimada ee Minnesota ilaa aad keento dhammaan shattiyada kale ee darawalnimada iyo kaararka aqoonsiyada ee aad haysato aadna u keento Waaxda Badbaadada Dadwaynaha.

### Qofkee ayaan U baahnayn Shattiga Minnesota?

Waad ku wadi kartaa gaari wadooyinka dadwaynaha ee Minnesota adoon haysan shattiga ma ogolaanshaha darawalnimada Minnesota, haddii aad buuxiso mid kamid ah shardi dhaafiyada soo socda:

## ***Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota***

- Haddii aad tahay qof aan gobalka daganayn kaasoo jira ugu yaraan 15 sano aadna wadato ruqsad sharci ah oo kasoo baxday gobalkaaga ama wadankaaga hooyo.
- Haddii aad noqotay qof dagan Minnesota aadna haysato shatti darawalnimo oo kasoo baxday gobol kale, gobol kamid ah Kanada ama maamulka milatariga Maraykanka. Waxaad haysataa ilaa 60 maalmood kadib markaad noqoto qof dagan gobalka inaad qaadato shattigaaga saxda ah ee Minnesota.
- Aad haysato shattiga darawalnimada gawaarida waaweyn oo kasoo baxday gobal kale. Markay sidani dhacdo, waxaad haysataa ilaa 30 maalmood kadib markaad noqoto qof dagan Minnesota inaad qaadato shattigaaga ganacsiga ee Minnesota.
- Waxaad ka shaqeysaa, ama u adeegaysaa dawladda Maraykanka oo waxaad waddaa ama ku shaqaynaaya (ujeedooyin milatari), baabuur ganacsi oo ay leedahay dawladda Maraykanku.
- Haddii aadan ahayn qof dagan Minnesota, aad jirto ugu yaraan 18 sano, oo uusan wadankaaga hooyo qasab ka dhigayn in darwalladu shatti qaataan. gaariga aad wadana uu ka diiwaan gashan yahay sanadkaan wadankaagii hooyo. Waxaad si sharci ah gaarigan ugu wadi kartaa gudaha Minnesota muddo aan ka badnayn 90 maalmood xili kamid ah sanadka adiga oo aan qaadan shatti ama ogolaansho ansax ah.
- Aad si ku meelgaar ah u wado cagaf-cagaf beeraha ama agabka kale ee beereed oo aad ku waddo jidadka dadwaynaha.
- Aad wado gaadiidka barafka lagu dul kaxeeyo. Si aad wax uga ogaato sharciyada khuseeya wadista gaadiidka lagu dul wato barafka, booqo Websaydka Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah [www.dnr.state.mn.us](http://www.dnr.state.mn.us).
- Haddii aad tahay qof ku shaqeeya jidka tareenka oo wada gaadiidka jidka tareenka ama tareen, ama qalabka ku dul socda jidka tareenka. Tan waxaa ku jira wadista marka aad goynayso jid ama wado wayn, haddii ay tahay mid dadwayne ama mid gaar ahba.

## **Qofkee ayaan Heli Karin Shattiga darawalnimada?**

Shattigaaga darawalka ama ogolaanshaha barista ee Minnesota laguma siin doono haddii:

- Aad ku guuldaraysato inaad keento aqoonsi sax ah.
- Aad ku fashilanto inaad dhamayso ama ku baasto qayb kamid ah imtaxaanaadka lagaa rabo ee shattiga darawalka.
- Aadan awoodin inaad akhrido aadna fahanto calaamadaha guud ee jidadka ama aadan fahmayn sharciyada jidadka ee gobalka.
- Aad ka yar tahay 15 sano jir.
- Aad ka yar tahay 18 sano jir, oo aadan haysan shatti ansax ah oo ka soo baxay gobal kale, oo aadan keeni karin shahaado caddaynaysa inaad dhamaysay koorsada barashada darawalnimada oo la aqoonsan yahay.
- Haddii aad jirto 18 sano ama kayar tahay aadna haysato ogolaanshaha barista muddo ka yar lix bilood.

- Aad jirto 19 sano ama ka weyn tahay aadna haysato ogolaanshaha barista wadista oo soo baxay wax kayar sadex bilood
- Haddii shattigaaga la hakiyay aadana buuxin shuruudaha soo celinta ruqsada.
- Haddii shattigaaga lagaala laabtay aadana buuxin shuruudaha soo celinta ruqsada.
- Haddii shattigaaga la baabi'iyay.
- Ay maxkamad xukuntay inaad maskaxiyay fayooobayn, Waaxda Badqabka Dadwaynuhuna ay go'aamisay inaad awoodin inaad si badqab leh u waddo gaari matoor ku shaqeeya.
- Gudoomiyaha Badqabka Dadwaynuhu uu go'aanshay inaad awoodin inaad gaari si badqab leh u waddo sabab la xariirta naafo jireed ama mid maskaxeed.
- Gudoomiyaha Badqabka Dadwaynuhu uu helo sabab macquul ah oo uu ku aamin in haddii lagu ogolaado inaad ku shaqayso gaari ay sababayso dhibaato ku timaada badqabka dadwaynaha.

### **Keen Aqoonsiga**

Waa qasab inaad keento aqoonsi sax ah oo cadaynaya magacaaga koobaad, dhexe, iyo sadexaad, iyo taariikhdaada dhalashada si aad u gasho imtaxaanka qoran iyo waddada. Haddii magaca ku qoran dukumiintiyadaada aqoonsiga uusan iswafaqsanayn, sidoo kale waa qasab inaad keento cadaynta isbadalka lagu sameeyay magacaaga sharciga ah. Caddaynta la aqbali karo waxay ka kooban tahay shahaado guur oo xaqiijisan, go'aanka furiinka ama amarro kale oo maxkamadeed oo xaqiijisan. Amarada furiinka ama amarada kale ee maxkamadu waa inay sheegaan isbadalka magaca. Waa inaad sidoo kale keentaa aqoonsiga saxda ah marka aad codsanayso ogolaanshaha barista, shattiga darawalka, ama kaarka aqoonsiga gobalka.

Dukumiintiyada aan ku qornayn Ingiriisiga waa inuu la socdaa turjumaada ingiriiska oo xirfadaysan (ka fiiri bogga 4). Dukumiintiyada waxaa la marsiinayaa xaqiijin waana inaan la aqbalin haddii bac lagu galeeyay ama si kale loo badalay. Nuqullada koobiyada laga baxsho dukumiintiyada aqoonsiga lama aqbali karo. Dukumiintiyada khiyaannada ah waa lagaala wareegi karaa.

### **Waxa aad u baahan tahay inaad keento marka aad codsanayso ruqsad ama aqoonsi:**

#### ***Shattigaaga ama aqoonsiga caadiga ah ee darawalnimada***

- Si aad u codsato shattiga caadiga ah ee darawalnimada, kaarka aqoonsiga, ama ogolaanshaha, waxaad keeni kartaa shattiga darawalnimada ee Minnesota, kaarka aqoonsiga, ama ogolaanshaha oo shaqaynaaya ama dhacay shan sano ama ka yar haddii uu leeyahay sawir, ama hal sano ama kayar haddii uusan lahayn sawir.
- Haddii aadan haysan mid kamid ah waxyaabaha ku qoran kor, waa qasab inaad keento labo dukumiinti, uuna ku jiro hal dukumiinti oo uu

## ***Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota***

ku qoran yahay magacaaga buuxa iyo bisha, maalinta iyo sanadka aad dhalatay. DVS waxay u taqaanaa dukumeentiyadan in ay yihiin dukumeentiyada aasaasiga ah iyo kuwa labaad. Dukumiintiyadaan waxaa ku jiri kara shahaadada dhalashada, baasaboorka ama kaarka Amniga Bulshada (Social Security Number).

- Haddii magaca ku qoran shattigaaga darawalnimada, kaarka aqoonsiga ama ogolaanshaha uu isbadalay ama magacyada ku qoran dukumiintiga kale uusan iswaafaqsanayn, sidoo kale waa qasab inaad keento cadaynta isbadalka lagu sameeyay magacaaga sharciga ah.

### [Liis buuxa oo ah shuruudaha dukumeentiga ee shattiga caadiga ah ama aqoonsiga darawalnimada](#)

#### ***Aqoonsiga dhabta ah (REAL ID)***

Codsashada Kaarka waafaqsan REAL ID ayaa u baahan dukumiintiyo dheeraad ah marka loo eego shuruudaha shattiga caadiga ah ee darawalnimada ee Minnesota. Waa qasab inaad u keento waxyaabaha soo socda si toos ah markaad codsiga dirayso:

- Hal dukumiinti oo cadaynta aqoonsiga, taariikhda dhalashada iyo joogistaada sharciga ah ee Maraykanka.
  - o Haddii magaca dukumiintigaaga aqoonsiga ku qoran uusan lamid ahayn magacaaga hadda, dukumiintiga cadaynta isbeddelka magacaaga waa in aad keento.
- Hal dukumiinti oo cadaynta lambarada Social Security Number.
- Labo dukumiinti oo cadaynta sharciyada aad hadda ku degan tahay Minnesota.

### [Liiska buuxa ee dukumiintiyada lagu codsan karo REAL ID](#)

#### ***Enhanced driver's license ama ID***

Enhanced driver's license ama ID Codsashada EDL ama EID waxay u baahan tahay shuruudo dheeraad ah iyo dukumiintiyo marka loo eego shattiga caadiga ah ee Minnesota.

- Keliya codsade keeni kara cadaynta aqoonsiga, magaca buuxa ee sharciga ah, lambarada amniga bulshada, aqoonsi sawir leh, daganaanshaha Minnesota iyo muwaadinimada Maraykanka ayaa u qalma EDL ama EID.
- Labo nooc oo dukumiinti ah waa in la keenaa si loo cadeeyo deganaanshaha Minnesota. Tusaale, biilka korontada ama taleefanka iyo canshuur celinta.
- EDL/EID waa inuu ku qoran yahay ciwaanka guriga aad ka dagan tahay Minnesota.
- Waa qasab inaad buuxiso Foomka Su'aalaha Waraysiga markaad codsiga dirayso.
- Qarash dhan \$15 ayaa loo baahan yahay kaasoo dheeraad ku ah qarashka shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga.

[Liiska buuxa ee shuruudaha dukumiintiyada EDL ama EID](#)

## Caddaynta Isbadalka Magaca

Haddii aad sifo sharci ah magacaaga ugu badashay guur, furiin, ama amar maxkamadeed, waa qasab inaad keento caddaynta isbadalka. Waa qasab inaad keento shahaadada aqoonsiga leh ee guurka, amarka maxkamada aqoonsiga leh oo sheegaaya isbadalka magaca, ama amarka furiinka sharciga ah ama shahaadada baabi'in guurka oo sheegaaya isbadalka magaca. Haddii aad marar kaladuwan badashay magacaaga, waa qasab inaad keento cadaynta dhammaan isbadalladaas.

## Turjumaada Dukumiintiyada

Dhammaan dukumiintiyada la keeno ee ku qoran luuqad aan ahayn Ingiriisiga waa in la soo raacshaa turjumaada Ingiriisiga. Foomka Shahaadada Turjumaada ayaa laga heli karaa halkan, xarumaha imtixaanada darawalnimada iyo xafiisyada shattiga darawalnimada. Turjumaanku waa inuu xaqiijiyo dhammaan waxyaabaha soo socda:

- Dukumeentiga waxa la socda tarjumaad Ingiriisi ah oo dhammaystiran.
- Turjumaada dukumeentigu waa run oo sax ah. (Sax ah macnaheedu waa in dhammaan erayada ku qoran dukumeentiga lala yimid loo turjumay si sax ah.)
- Turjubaanka waxba isuma aha dhalasho ama guurka ahaan qofka uu ku saabsanyahay dukumeentigu.
- Turjubaanku waxa uu aqoon u leeyahay in uu ka soo turjumo (magaca luqadda dukumeenti ee kor ku qoran) oo uu u turjumo Ingiriisi.
- Waxaan fahamsanahay in haddii qayb ka mid ah turjumaada ay si ula kac ah u been abuurto u tahay, in aan ku mutaysan doono ciqaab.

## Lambarka sooshal sakuuritiga (social security)

Dadka codsnaaya kaararka Adeegyada Darawalka iyo Gaariga ee Minnesota waxaa laga doonayaa inay ku sheegaan Social Security Number (SSN) foomka codsiga. Codsadayaasha aan la siinin Lambarka Sooshal Sakuuratiga (SSN) waa in ay doortaan in aysan ku bixinin macluumaadkaas foomka. Lambarkaaga Sooshal Sakuuratigu waa xog gaar ah oo si amaan ah loo gelin doono nidaamka xogta shattiga darawalka ayna keliya arki karaan dadka sharciyada buuxa u haysta inay arkaan. Lambarada Social Security laguma qoraayo, ama lagu daabacaayo, shattiyada darawalka ama kaararka aqoonsiga. Sida uu qabo xeerka 42 USC § 405(c)(2)(C)(i), gobolka waxa si cad loogu fasaxay in uu u baahdo siidaynta lambarada sooshal sakuuritiga marka ay maamulayaan

## ***Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota***

barnaamijyada shattiga darawalnimada. Haddii aadan bixin Sooshal Sakuuratiga (SSN) marka aad u qalanto, Minnesota ma awoodo inay fuliso arjigaaga shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga.

### **Imtixaanka Qoran**

Waxaad geli kartaa imtixaanka qoran xarumaha imtixaanka darawalka oo ku yaala dhammaan gobalka. Ballan ayaa loo baahanyahay inaad u qabsataa imtixaanka qoran ee Heerka D. Si aad ballan u qabsato booqo [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov). Imtixaanka qoran wuxuu ka kooban yahay kala doorashooyin iyo su'aalo run ama been ah oo qiimaynaya fahamkaaga qoraalka iyo fahamkaaga sharciyada waddooyinka ee Minnesota iyo calaamadaha waddooyinka. Imtixaanka qoran ayaa lagu geli karaa waraaq ama kumbuyuutarka. Dhammaan xarumaha imtixaanka ee lagu imtixaanka lagu bixiyo kumbuyuutarka, waxaad imtixaanka ku qaadan kartaa af Ingiriis, mid kamid ah dhowr luuqadood oo kale, ama American Sign Language (ASL) Sameecadaha dhagaha ayaa la heli karaa si laguugu sahllo inaad maqasho su'aalaha intaad akhrinaysa. Fadlan waydii shaqaalaha xarumaha imtixaanka haddii aad u baahan tahay kaalmo gaar ah. Waxaad qaadan kartaa hal mar imtixaanka qoran maallintii. Waa inaad heshaa dhibco 80 boqolkiiba ah si aad ugu gudubto.

Waa inaad keentaa aqoonsi sax ah kahor intaan laguugu ogolaan inaad imtixaanka gasho. Haddii aad ka yar tahay 18 sano jir, waa inaad sidoo kale keentaa cadaynta diiwaan gelinta (“Blue Card” ama “Pink Card”) oo kasoo baxay koorsada la aqoonsan yahay ee barashada darawalnimada oo muujinaysa inaad dhamaysay cadadka saxda ah ee casharka fasalka aadna iska diiwaan gelisay tababarka gaari kaxaynta. Casharka fasalku qasab maaha haddii aad jirto 18 sano ama kasii wayn tahay. Macluumaadka ku saabsan xeerarka iyo qaanunada waxbarashada guriga lagu bixiyo ayaa laga heli karaa halkan.

Haddii aad ku dhacdo laba imtixaan oo qoran oo isku xigta, waxaa laguugu soo dalacayaa lacag dhan \$10 si aad u gasho imtixaan saddexaad iyo imtixaan kasta oo qoraal ah oo ku xiga.

### **Baaritaanka Aragga**

Indhahaaga ayaa baaritaan lagu samayn doonaa marka aad codsatid, ama dib u cusboonaysiinaysa, shattigaaga ama ogolaanshaha barista. Kani maaha baaritaan caafimaad. Waa baaritaan lagu go'aaminaayo in aragaagu buuxinaayo heerarka ugu hooseeya. Aragaaga caadiga ah ama la saxay waa inuu yahay ugu yaraan 20/40, aragaaga dadban waa inuu yahay 105 digrii.

Haddii aragaaga dadban uu ka yar yahay 105 digrii ama aad ku dhacdo baaritaanka aragga, waxaa lagaa codsan doonaa inaad u tagto dhakhtarka indhaha aadna u keento warbixinta dhakhtarka Waaxda Qiimaynta Darawalka ee Adeegyada Darawalka iyo Gaariga. baaritaanka aragga, waxaa lagaa codsan doonaa inaad u tagto dhakhtarka indhaha aadna u keento warbixinta dhakhtarka Waaxda Qiimaynta Darawalka ee Adeegyada Darawalka iyo Gaariga. Ujeedada warbixintu waa in la go'aansho inaad si



fiican wax u arkayso ilaa heer aad gaari si badqab leh u kaxayn karto ama haddii sixitaanka aragga ah ama xanibaado kale loo baahan yahay.

## Imtaxaanka Waddada

Imtaxaanka waddadu wuxuu ka koobanyahay muujinta adeegsiga qalabka badbaadada ee gaariga-

Imtaxaan qaadaha ayaa qiimayn doona wacyigaaga khataraha iyo falcelinta aad ka bixiso. Waxaa lagugu tijaabin doonaa shuruudca waddada iyo awoodaada inaad si badbaado leh ugu wado gaariga xaaladaha taraafikada ee caadiga ah. Imtaxaan qaaduhu waxa uu qiimaynayaa u feejignaantaada khataraha iyo sida aad khataraha uga falceliso Waxaa lagugu qiimayn doonaa awoodaada adeegsiga indha indhaynta wanaagsan markaad marayso meelaha isgoysyada ah, marka aad badelanayso haadka aad ku socoto, iyo xaaladaha kale. Laguma waydiin doono in aad samayso wax sharci darro ah inta aad ku jirto imtaxaanka.

Markaad yeelato xirfadaha muhiimka ah ee darawalmada aadna buuxiso dhammaan shuruudaha, waxaad diyaar u tahay gelista imtaxaanka waddada. Ballan ayaa loo baahan yahay waxaana lagu qabsan karaa ballanta khadka internetka ee [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov) ama (aagga toddobada-degmo ee magalada weyn) adiga oo wacaya 651-284-1234. Si aad u qaadatid imtaxaanka waddada, waa inaad keento kaarka ogolaanshaha barista oo ansax ah

iyo caddaynta caymiska oo aan dhicin oo ah qaabka kaarka aqoonsiga ama xeerka asalka ah ee caymiska. Haddii aad ka yar tahay 18 sano jir, waa qasab inaad keento diiwaanka darawalmada la kormeeraayay iyo shahaadada dhamaystirka koorsada (“White Card”) taasoo cadaynaysa inaad dhamaysay koorsada barashada gaari wadista oo la aqoonsan yahay iyo casharka gaari kaxaynta. Waa qasab inaad gaari aad adigu la timaado si aad ugu gasho imtaxaanka. Gaariyaasha xaafada ee korontada ku shaqeeya (NEV) looma adeegsan karo imtaxaankaan. Haddii aad doonayso inaad u isticmaasho gaari kiro ah imtaxaanka waddada, qofka imtaxaanka galaaya waa inuu darawal ahaan ugu qoran yahay heshiiska kirada gaariga. Albaabada gaariga waa in laga furi karaa gudaha iyo banaanka labadaba. Suumanka amaanka kursiga gaarigu waa inay si sax ah u shaqaynaayan. Nalalka hore, kuwa danbe, fareejooyinka leexashada, iyo nalalka bareegga waa inay si fiican u shaqaynaayan. Qalab kasta oo loogu baahan yahay xanibaadaha saaran shattigaaga ama ogolaanshaha barista waa inuu si sax ah u shaqaynayaa, ilaa inaad iskudayayso maahee inaad meesha ka saarto xanibaadaha. Gaadiidka ay ku xiran yihiin kaamirooyinka gadaale ayaa loo ogol yahay imtaxaanka laakiin waa inaysan noqon halka qaab ee aad adeegsanayso markaad gadaal u baxayso.

Sigaar lama ogola inta imtaxaanka lagu jiro, gaariguna waa inuusan lahayn wax sigaar ah kahor intaan imtaxaan qaaduhu soo gelin gaariga. Lama ogola aaladaha elektarooniga ah ama taleefanka gacanta in la isticmaalo inta imtaxaanku socdo. Lama ogola dad rakaab ah, oon ahayn imtaxaan qaadaha, oo raaci kara gaariga intaad qaadanayso imtaxaanka. Rakaabkaan waxaa ku jira xayawaannada rabaayada ah, carruurta, iyo

turjumaannada. Alaabaha ruxmaaya ee jabi kara ama keeni kara dhaawaca waa in laga saaraa gaariga kahor intaan la bilaabin imtixaanka waddada. Gaariyaasha leh qalabka ka caawiya baakinka laymanka siman lama adeegsan karo marka qofka lagu imtixaanaayo baakinka laynka siman.

Haddii aad ku guul dareysato laba imtixaan oo isku xigta oo waddada ah, waxaa lagugu soo dalacayaa khidmad dhan \$20 si aad u gasho imtixaan saddexaad iyo imtixaan kasta oo ku xiga oo waddada ah.

## **Muujinta Badqabka Qalabka Gaariga**

Waxaa lagaa codsan karaa inaad samayso hubinta badqabka qalabka gaarigaaga kahor intaadan bilaabin imtixaanka waddada. Waa inuu gaarigu si badbaado leh u shaqaynaayo uuna leeyahay dhammaan qalabka muhiimka ah. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad muujiso aqoonta aad u leedahay:

- Hagaajinta kursiga.
- Suumanka amaanka kursiga.
- Bareegga xaaladaha degdega ah (baakinka).
- Ka shaqaysiinta nalalka hore (iftiinnada sareeya iyo kuwa hooseeya). Gaariyaasha leh nalalka hore ee ootomaatiga ah ee buuxa ayaa ka doonaa in darawalku uu si caadi ah uga shaqaysiiyo nalalka hore ee heerarka hooseeya iyo kuwa sarreeya.
- Ka shaqaysiinta nalalka digniinta khatarta (falaash bixiyaasha afarta jiho).
- Hoonka.
- Gacmaha tirtira murayada hore iyo tan danbe.
- Ceeryaamo ka bi'inta muraayada iyo marwaxada.
- Muraayadaha.
- Cabirka shidaalka.

*Liiskan kuma jiraan dhammaan qalabka iyo agabka sharcigu qasab ka dhigayo.*

Haddii aadan awoodin inaad ku baasto muujinta qalabka badqabka, laguuma ogolaan doono inaad dhamayso imtixaanka waddada maalintaas.

## **Xirfadaha Maamulka Gaariga iyo Shaqada Gaari Wadista**

Inta lagu jiro imtixaanka waddada, waxaa lagugu imtixaani doonaa laguguna qiimayn doonaa:

- Maamulkaaga gaariga.
- Awooda aad u leedahay baakinka siman.
- Awooda aad u leedahay dhigista gaariga meel taag ah.
- Jawaabta aad ka bixiso taraafiga iyo xaaladaha waddada, calaamadaha wadooyinka, iyo digniinaha.

- Awooda fareejo la baxa iyo samaynta leexashada dhanka midig iyo bidixda si sax ah.
- Awooda adeegsiga laymanka calaamadaysan iyo kuwa aan calaamadaysnayn labadaba ee wadooyinka.
- Milicsiga iyo tixgelinta dadka waddada maraaya iyo darawallada kale.
- Awooda aad u leedahay inaad dib u bax samayso 90 digrii ah. Tani waxay tusaalaynaysaa sidii aad gadaal (dib) ugu bixi lahayd jid toban fiid balaar ahaan ah ama aag baakin.

Ficiladaan ayaa keenaaya inaad ku dhacdo imtaxaanka waddada isla markaaba:

- Khilaafida sharciga waddada.
- Gaari wadista khatarta ah, taxadar la'aanta ah, ama nacasnimada ah, ayna ku jirto ficil kasta oo keeni kara shil baabuur.
- Inaad awoodi waydo xakamaynta gaariga ama aad si buuxda u leexiso adiga oo aan caawimo ka helin imtaxaan qaadaha.
- Inaad gaarigaaga geliso shil aad iska ilaalin kartay, xataa haddii aadan sharci ahaan adigu khaladka lahayn.
- Inaad diido inaad la shaqayso imtaxaan qaadaha ama aad diido samaynta wax imtaxaan qaaduhu kugu amray.

Haddii aad ku dhacdo imtaxaanka waddada, dib ayaad u qaadan kartaa kadib markii aad qaadatay wakhti aad dib ugu soo muraajacaysay.

Waxaa lagu siin doonaa waqti muraajaco oo ay qasab tahay inaad dhamayso kahor intaadan samayn imtaxaankaaga labaad ee waddada. Haddii aad ku dhacdo imtaxaanka waddada laba jeer, lacag dib u imtixaanid oo dheeraad ah oo ah \$20 ayaa lagu dari doonaa imtixaan kasta oo lagaa qaado markaas wixii ka dambeeya. Haddii aad ku dhacdo imtaxaanka waddada afar jeer, waa qasab inaad gashaa casharka ugu yaraan lixda saac ah ee barashada gaariga oo uu ku barayso macalin ruqsad leh kahor intaadan samayn imtaxaanka waddada markale.

Markaad ku baasto imtaxaankaaga waddada, waxaad codsan kartaashattiga darawalka ee Minnesota. Haddii aad jirto 18 sano, waalidkaa, masuul sharci ah, waalidka ilmaha korsanaaya oo degmadu magacawday ama agaasimaha barnaamij si ku meel gaar ah loo dago kaasoo aad dagan tahay waa qasab inuu saxiixo ama uu ansixiyo codsigaaga. Diiwaanka sharciga ah ee buundada aad ka keento imtaxaankaaga waddada iyo risiidka arjigaaga ayaa noqonaaya shattigaaga ku meel gaarka ah ee darawalnimada ilaa aad ka helayso shattigaaga rasmiga ah ee darawalnimada oo laguugu soo dirayo boostada.

## Xaaladaha Caafimaadka

Arjiga ogolaanshaha barista ama shatiga darawalnimada waxaa ku jira su'aalo ku saabsan xaaladaha caafimaadka. Ku bixinta xog been ah codsiga ayaa keenaysa inaad lumiso aqoonsigaaga darawalnimada. Haddii aad leedahay xaalad caafimaad, waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo inaad keento qoraal dhakhtar oo muujinaya in xaaladdu ay faragelinayso

## **Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota**

awooddaada inaad si badbaado leh u waddid baabuur iyo in kale. Haddii aad haysato ogolaansho ama ruqsad, lagaana helo xanuunka qalalka ama xaalad caafimaad oo keeni karta inaad miyir daboolanto, waa qasab inaad keento cadaynta dhakhtarta 30 maalmood gudahood marka xanuunka lagaa helo kadib. Cadayntu waa inay muujisaa in xanuunku uu carqalad ku yahay iyo in kale awoodaada gaari u wadista si badqab leh. Cadaynta caafimaadka waa in loo diraa Driver and Vehicle Services, Driver Evaluation Unit, 44517055101170 Minnesota Street, Suite 55101, St. Paul, Minnesota -5170. Paul, Minnesota 55101-5170. Wixii xog dheeraad ah, kala xariir Waaxda Qiimaynta Darawalka 651-296-2025.

Shattigaaga Darawalnimada

### **Ogolaanshaha Waalidka ee Carruurta kayar 18 sano**

Haddii aad ka yartahay 18 sano, mid kamid ah waalidkaa, masuul maxkamad magacawday, waalidka ilmaha korsanaaya oo degmadu magacawday ama agaasimaha barnaamij si ku meel gaar ah loo dago kaasoo aad dagan tahay ayaa qasab ah inuu ansixiyo codsigaaga shattiga ama ogolaanshaha barista ee darawalnimada. Haddii waalidiintaadu kala tageen, waalidka masuulka kaa ah ama waalidka xaaskiisa ee ay isqabaan waalidka masuulka kaa ah ayaa ansixin kara arjigaaga. Haddii aysan kuu joogin waalidiin ama dad masuul kaa ah oo nool, ama haddii aad xaas leedahay ama sharci ahaan aad adigu mas'uul iska tahay, xubin kamid ah ehelkaaga, qofka aad u shaqayso, ama xaaska kaas oo jira ugu yaraan 18 sano ayaa saxiixi kara arjigaaga.

Ansixinta waxaa ka laaban kara qofka saxiixaaya foomka. Foomamka waxaa laga heli karaa xafiisyada cusboonaysiinta iyo xarumaha imtaxaanka, iyo [Webhaadka Adeegyada Darawalka iyo Gaadiidka](#).

Haddii aad tahay arday ku yimid arday isdhaafsiga wadan kale, dadka wadanka kugu casuumay awood uma leh inay kuu saxiixaan codsigaaga, haddi aan sidoo kale la siin in ay masuul kaa yihiin adiga oo ah qof aan qaan-gaar ahayn (caddayn waa in la keeno). Waxaad u baahan doontaa labo foomamka arjiga ah in loo dirayo waalidiintaada si ay u saaraan saxiix nootaayaysan. Midkood waxaa loogu talagalay ogolaanshaha casharka, kan kalena waxaad ku codsanaysaa ruqsad ku meel gaar ah.

### **Nidaamka GDL**

Minnesota waxay leedahay nidaamka shattiga darawalka qalinjabiyay (GDL), taasoo loo sameeyay inay u fududayso darawallada cusub gaari wadidda. Sida uu qabo nidaamka GDL, qof kasta oo jira 18 ama ka yar waa inuu haystaa ogolaanshaha barista ugu yaraan lix bilood kahor intaadan samayn imtaxaanka waddada. Markaad ku baasto imtaxaanka waddada, waxaad codsan kartaa shattigaaga.

## Ogolaanshahaaga barista waditaanka

Talaabada koobaad ee qaadashada shattiga darawalku waa inaad qaadato ogolaanshaha barista. Ogolaanshuhu wuxuu shaqaynayaa labo sano oo darawalnimada baranayso ayadoo uu darawal ruqsad leh oo ku korjoogtaynaayo uu fariisanaayo kursiga hore ee rakaabka. Waa sharci daro inaad gaari wado adoon wadan ogolaanshaha casharka oo sax ah. Markaad gaari wado, waa inaad haysataa ogolaanshahaaga barista oo meel kuu dhow kuu saaran.

### Si aad ugu qalanto aadna u hesho ogolaanshaha casharka waa inaad:

- In aad jirto ugu yaraan 15 sano.
- In aad dhamaysato 30 saacadood oo casharka fasalka ah si lagaaga diiwaangeliyo casharka gaari wadista ah; AMA iska diiwaangelisay koorsada barashada darawalka oo wada socda aadna dhamaysay 15 saacadood ee ugu horeeya ee manhajka. Haddii aad jirto 18 sano ama ka wayn tahay, fasalka iyo barista gaari wadista lagaama rabo.
- Ku dhaqan shuruudaha aqoonsiga.
- In aad ku gudubto baaritaanka aragga iyo imtixaanka qoran.
- Waa inaad buuxiso arjiga shattiga aadna dhiibto khidmada lagaa rabo ee ogolaanshaha barista.

### Ka yar 18

Haddii aad ka yar tahay 18 sano jir, darawalka ku korjoogtaynaaya waa inuu jiraa 21 sano ama ka wayn yahay, qof kasta oo gaariga saaran waa inuu xirtaa suunka amaanka ama uu adeegsadaa nidaamka amaan sugida rakaabka ilmaha ah, mana adeegsan kartid, ama kuma hadli kartid, taleefanka gacanta intaad gaariga wado, haddii aad haysato qalabka taleefanka ee aan gacmaha u baahnayn iyo haddii aadan haysanba.

### 18 jir iyo ka wayn

Haddii aad jirto 18 sano ama ka wayn tahay, darawalka ku korjoogtaynaaya waa inuu jiraa ugu yaraan 18 sano dhammaan dadka rakaabka ahna waa inay xidhaan suunka amaanka ama adeegsadaan nidaamka amaanka ilmaha gaariga saaran.

Kadib markaad dhamayso mudada gaari barashada loo baahan yahay ee lixda bilood ah (sadx bilood, haddii aad jirto 19 sano ama ka wayn tahay), waxaad geli kartaa imtixaanka waddada. Si aad u hesho xogta mudaynta imtixaanka waddada, arag Cutubka 9 ee buuggaan tusmada. Kahor intaan lagu ogolaan inaad gasho imtixaanka waddada, waa inaad u dhiibtaa imtixaan qaadaha darawalka ogolaanshahaaga saxda ah ee casharka iyo cadaynta caymiska shaqaynaaya ee gaariga. Haddii ogolaanshahaaga casharka uu lumo ama uu dhaco, waxaad codsan kartaa ogolaansho cusub. Ogolaanshaha cusub ayaa shaqayn doona labo sano laga bilaabo taariikhda codsiga.

## Shattiga Ku meel Gaarka ah

Shattigaaga ku meel gaarka ah waa wajiga labaad ee nidaamka GDL. Shattigani wuxuu shaqaynayaa labo sano laga bilaabo taariikhda codsiga waxayna leedahay xanibaado aysan lahayn shattiga buuxda ee darawalka. Qof kasta oo gaariga saaran waa inuu xidhaa suunka amaanka ama adeegsadaa nidaamka amaan sugida ilmaha gaariga saaran mana adeegsan kartid, ama kuma hadli kartid, taleefanka gacanta intaad gaariga wado. Tan waxaa ku jira adeegsiga aalada taleefanka gacanta ee codka laga hago. Si aad ugu qalanto shattigaaga Ku meel Gaarka ah waxaa qasab ah:

- Inaad jirta ugu yaraan 16 sano.
- In aad dhamayso casharka fasalka iyo gaari kaxaynta ee wajiyada gaari wadista.
- Waa inaad haysatay ogolaanshaha barista lix bilood oo aadan gelin wax danbiyo ah oo la xariira gaadiid ama jabinta xeerarka khamriga/maandooriyaha.
- Waa inaad soo gudbisaa Diiwaanka La kormeeraayo ee Darawalnimada. Waalidiinta/masuuliyiintu waxay haystaan labo dookh oo la xariirta diiwaanka darawalnimada la kor joogtaynayo:
  - Inay dhameeyaan casharka kaabista ah ee waalidka oo uu bixiyo barnaamijka barashada darawalnimada oo laga aqoonsan yahay Minnesota, kadibna ay qofbiyaan diiwaanka darawalnimada la kormeerayo oo muujinaya qofka dhallinyarta ahi inuu dhameeyay ugu yaraan 40 saacadood oo gaari wadista la kormeeraayay ah, kuwaasoo 15 kamid ah uu ku bartay saacadaha habeenkii; AMA
  - Haddii waalidka/Masuulku doorto inuusan dhamaystirin casharka waalidka ee kabista ah, diiwaanka gaari wadistu waa inuu muujiyaa in dhallinyartu uu dhameeyay ugu yaraan 50 saacadood oo gaari wadis la kormeerayay ah, kuwaasoo 15 saacadood oo kamid ah uu gaariga waday saacadaha habeenkii.
- In aad ku gudubtay imtixaanka waddada.

Waalid, mas'uul ay maxkamad magacawday, waalid korinta degmadu magacawday ama agaasimaha barnaamijka ku meel gaarka ah ee xarumaha ku noolaanshaha aad ku nooshahay waa inuu saxeexaa oo ansixiyaa arjigaaga shattiga. Markaad buuxiso shuruudahaan, waad codsan kartaa shattigaaga ku meel gaarka ah kadibna waxaad dhiibi kartaa qarashka lagaa rabo .

Darawallada ku meel gaarka ah ayaa la gelin doonaa xadidaadaha xiliga habaynkii iyo cadadka rakaabka. Inta lagu jiro lixda bilood ee ugu horeeya shattiga, gaari wadista ayaa mamnuuc ah laga bilaabo saqdhexe ilaa 5 a.m. aan ka ahayn haddii darawalka shattiga ku meel gaarka ah haysta uu:

- La socdo darawal ruqsad leh oo jira ugu yaraan 25 sano.
- Uu gaari u wato inta u dhaxaysa guriga iyo shaqada.
- Uu gaariga u wadato inta u dhaxaysa guriga ilaa munaasabad iskuulku leeyahay taas oo uuna iskuulku bixin gaadiid dadka soo qaada.

- Uu gaariga u wado sababo shaqo awgood.

Waxaa intaas dheer, lixda bilood ee ugu horaysa shattiga, keliya hal rakaab ah oo kayar 20 ayaa la ogol yahay, aan ka ahayn haddii uu kula socdo waalid ama masuul.

Inta lagu jiro lixda bilood ee labaad ee shattiga, wax aan ka badnayn sadex rakaab ah oo kayar 20 ayaa la ogol yahay, ilaa in uu kula socdo maahee waalid ama masuul.

Fiiro gaar ah: Rakaabka kayar 20 sano ee ah ehelada dhaw ee darawalka shattiga ku meel gaarka ah ayaa loo ogol yahay labada xiliba.

## Sharciga Vanessa

Qof dhallinyaro darawal ah oo aan shatti haysan oo galay khalad gaari oo shil keenay ama xadgudub la xariira maandooriyeyaal (jabinta mid ama wax ka badan oo sharciyada ah, uuna ku jiro DWI, Ogolaanshaha Afka ah, Dhalo Furan (Open Bottle), ama Sharciga Khamri Cabida iyo Gaari Wadista/Sharciga Lama Ogola Hal Dhibic dhaceeysa (Not a Drop Law) ee Carruurta aan qaangaarin) lama siin karo shatti, ogolaanshaha barista ama shatti ku meel gaar ah ilaa uu ka gaaro 18 sano. Markuu gaaro 18, darawalku waa inuu:

- In aad ku baasto imtaxaanka qoran ee Heerka D.
- Waa in uu buuxiyo shuruudaha dib ugu celinta shattiga, oo ay ku jirto bixinta khidmadaha kuwaas oo noqon kara \$680, ayadoo ku xiran xaaladaha jira.
- Inuu qaato ogolaanshaha casharka uuna haysto ugu yaraan lix bilood.
- Inuu ku baaso imtaxaanka waddada uuna codsado ruqsad cusub.

Darawal kuray ah oo ruqsad leh haystana ruqsad ku meel gaar ah kaasoo sharaftiisa gaari wadista lagala laabtay sabab la xariirta xadgudubka gaari socda oo shil galay, ama uu jabiyay xeerka khamriga/maandooriyaasha dib looma siin karo shattiga ilaa uu ka gaaro 18 sano. Waqtigaas, qofku waa inuu buuxshaa talaabooyin soo socda si uu u helo shattiga buuxda ee darawalka.

- Uu buuxshaa shuruudaha dib ugu celinta shattiga, ayna ku jiraan bixinta qarashka kaasoo noqon kara \$680, ayadoo ku xiran xaaladaha jira
- Waa inuu dhameeyaa qaybta fasalka ee koorsada rasmiga ah ee barashada darawalnimada.
- Waa inuu ku baasto imtaxaanka qoran ee Heerka D haddii shattigaagu dhacsanaa wax ka badan hal sano.
- Inuu qaato ogolaanshaha barista uuna haysto muddo sadex bilood ah.
- Waa inaad dhamaysaa qaybta gaari kaxaynta ee koorsada barashada darawalnimada aadna codsataa ruqsad cusub.

Qaadashada Shattigaaga Darawalnimada ee Heerka D ee Dadka ka yar 21 jirka

## **Si aad ugu qalanto shattigaaga darawalnimada Heerka D ee dadka ka yar 21**

Jirka, waa qasab inaad jirto ugu yaraan 18 sano, ama aad haysatay shatti ku meel gaar ah ugu yaraan 12 bilood oo xariir ah adiga oo aan lagugu xukumin jabinta sharciyada khamriga, isticmaalka maandooriyaha, ama jabinta sharciyada gaari wadista ee shil la xariira, oo aadan gelin wax aan ka badnayn hal xukun oo la xariira jabinta xeerka wadista gaariga oon keenin shil.

Haddii aad ka yar tahay 18 jir, waa inaad caddaysaa inaad baabuur waday wax aan ka yarayn toban saacadood iyadoo uu kormeeraayay darawal shati leh oo da'diisu tahay ugu yaraan 21 sano.

Waa qasab inaad buuxiso arjiga shattiga darawalnimada aadna dhiibto qarashka shattiga. Haddii aad cusboonaysiinayso ruqsad hore oo rasmi ah ama aadan gelin wax xad gudubyo ah, waxaad helaysaa \$3.50 qarash dhaaf ah oo laga jaraayo lacagta khidmada.

Haddii aad ka yar tahay 21 sano, waxaad heli doontaa shatiga ku calaamadsan "Ka yar 21". Shatigani waxa uu dhacayaa dhalashadaada 21aad. Wixii markaas ka dambeeya, wuxuu dhacayaa afartii sanaba mar maalinta dhalashadaada.

## **Waxyaabaha laga Dhaafay Shuruudaha Da'da Ugu Yar**

Ilmo 15 sano jir ah ayaa u qalmi kara shattiga xaddidan ee darawalnimada shaqada beerta, shattiga darawalnimada caafimaadka gaarka ah, ama ogolaanshaha baaskiil matoor ku shaqeeya (moped) kadib markuu dhameeyo koorsada barashada darawalka uuna ku baaso imtaxaanka waddada.

Shattiga darawalnimada shaqada beerta ee xaddidan wuxuu u oggolaanayaa shakhsiyaadka ka shaqeeya beer, iyadoon loo eegin haddii waalidkood ama masuulkoodu uu leeyahay beerta, inay ka caawiyaan beeralayda, waalidka, ama masuulka shaqada beerta. Qofka shattiga haystaa waxa uu keligii baabuurka kaxayn karaa si uu u qabto shaqada beerta inta lagu jiro saacadaha maalintii, meel 40 mayl u jirta guriga beerta. Si loo helo shattiga darawalnimada shaqada beerta ee waalidka ama mas'uulka beerta, waalidka codsadhaha ama masuulka sharciga ahi waa in ay buuxiyaan foom. Foomka la buuxiyay waa in loo dhiibo imtaxaan qaadaha darawalka wakhtiga imtaxaanka waddada la qaadayo, oo ay la socoto bayaan cashuureedka hantida oo ku qeexaya hantida in ay tahay mid beeralay ah. Haddii waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah uu kiraysto dhulka beerta, heshiiska kiraynta iyo caddaynta cashuurta guryaha ayaa loo baahan yahay. Si uu u helo shattiga darawalnimada shaqada beerta marka ilmo aan qaangaarin uu u shaqeeyo beeralay aan ahayn waalidka/masuulka, beeralayda, milkiilaha beertu waa inuu sidoo kale buuxiyo foom caddaynta in codsadu u baahan yahay shattiga ujeedooyinka shaqada beerta ah, iyo in uu yahay mulkiilaha beerta, waana in uu bixiyo caddaynta canshuurta hantida oo muujinaysa in hantidu ay tahay beer.



Codsadayaashu uma baahna inay sugaan lix bilood kahor intayna qaadani imtixaanka waddada ee shatigan, laakiin waa inay codsadaan ogolaanshaha barista. Marka ay u diyaar garoobaan imtixaankooda waddada, codsaduho waa inuu keeno shahaadada dhamaystirka koorsada waxbarashada gaari wadista ah ee la ansixiyay iyo diiwaanka wadista la kormeerayo. Xayiraadda shaqada beerta waa laga saari karaa ka dib marka darawalku haysto shattiga lix bilood oo uu gaaro da'da 16 sano. Xayiraadda shaqada beertu waxay ahaanaysaa mid shaqaynaysa ilaa darawalku ka codsado in laga saaro.

Shatiga darawalnimada caafimaadka gaarka ah ayaa la siin karaa 15 jir marka guriga uuna joogin darawal shatti haysta, codsadhuna waa inuu u wadayo baabuurka baahidiisa caafimaad ee gaarka ah ama kuwa qaraabada, ama qaraabada naafada ah ee leh naafonimo oo aan haysan shati naafanimada darteed.

Codsaduho waa inuu buuxiyo shuruudaha oo uu bixiyaa shattiga loo baahan yahay ee foomka Ka dhaafitaanka Sababta Caafimaad oo la soo gudbiyo ogolaanshaha kahor inta aan laga qaadid imtixaanka waddada.

Guddoomiyaha Badbaadada Dadweynaha ayaa dejin kara shuruudo iyo xaddidaado si loo sugo badbaadada dadweynaha. Codsadayaashu uma baahna inay sugaan lix bilood kahor aysan qaadani imtixaanka waddada ee shattigan, laakiin waa inay codsadaan ogolaanshaha barista. Marka ay u diyaar garoobaan imtixaankooda waddada, codsaduho waa inuu keeno shahaadada dhamaystirka koorsada waxbarashada gaari wadista ah ee la ansixiyay iyo diiwaanka wadista la kormeerayo. Xayiraaduhu waxay ugu muuqaan doontaa shattiga iyaga oo ah MEDLIM.

Qofka 15 jirka ah waxa uu heli karaa ogolaanshaha baaskiilka matoorka leh kadib marka uu dhammeeyo koorsada badbaadada baaskiilka matoorka leh iyo uu ku gudbo imtixaan qoran, tijaabada aragga, iyo imtixaanka waddada.

## Qaybaha Shattiga Darawalnimada

Shattigaaga darawalnimada ayaa kuu ogolaanaya inaad baabuur ku dhex waddo waddooyinka dadweynaha iyo waddooyinka waaweyn. Waa inaad aad wadato shattigaaga mar walba marka aad baabuur wadato. Waa inaad haysataa nooca ku habboon ee shatiga iyo ogolaanshaha nooca gaadhiga aad wadayso.

Macluumaadka ku saabsan heerka shattigaaga iyo ogolaanshaha ama xadidaada ayaa ku qornaan doonta dhabarka danbe ee shattigaaga darawalnimada.

Waxaa jira afar nooc oo shattiga darawalka ah iyo ogolaanshaha kala duwan oo ay heli karaan darawallada Minnesota. Hoos waxaad ka helaya sharaxaada kooban ee noocyada kala duwan ee shattiyada iyo ogolaanshaha.

## **Shatiga Heerka D**

Kani waa nooca shatiga ugu badan ee darawalada Minnesota. Haddii aad haysato shatiga darawalnimada heerka D, waxa aad wadi kartaa:

- Dhammaan gaariyaasha halka unug ah (gaariyaasha, xaajiyadaha, iyo taraagyada yaryar) marka laga reebo kuwa miisaankooda guud dhan yahay 26,001 rodol ama ka badan, gaariyaasha loo sameeyay inay qaadaan wax ka badan 15 rakaab ah (uuna ku jiro darawalka), iyo gaariyaasha qaada alaabaha khatarta ah.
- Baabuur taraag kasta oo beerta oo qaada wax soo saarka beeraha, mishiinada beeraha, ama alaabta beeraha (ay ku jiraan walxaha halista ah), oo ah mudaha 150 mayl wixii u jira beerta. Taraaga beerta waa in uu wado qofta beeralayda ah, ehelkiisa ama ehelkeeda soke ama shaqaalaha qofka beeralayda ah.
- Gaariyaasha xaalada degdega ah ee la aqoonsan yahay, miisaanka guud ha ka badnaado 26,000 rodol ama yuusan ka badnaan e.
- Gaariyaasha madadaalada (guryaha gaariga ah iyo tareelayaasha kaamka), oo aad u adeegsato danahaaga shaqsiga ah.
- Baaskiilada Matoorka ku shaqeeya
- Mootooyinka, dee leh ogolaanshaha shattiga saxda ah.
- Gaariyaasha korontada ku shaqeeya ee xaafada (NEVs).
- Baaskiilada ootomaatiga ah.

Waxaad sidoo kale kaxayn kartaa tareele ama gaari kale haddii:

- Haddii uu leeyahay miisanka guud ee gaariga oo dhan 10,000 oo rodol ama ka yar, ama
- Haddii uu leeyahay miisaanka guud ee gaariga oo ka badan 10,000 oo rodol, laakiin isku darka miisaanka guud ee gaariga iyo tareeluhu ay yihiin 26,000 oo rodol ama kayar.

## Ogolaanshaha Dheeraadka ah ee Shattiga

Waa inaad haysataa ogolaansho ku qoran shattigaaga si aad u wado mootooyinka, basaska, basaska iskuulka, tareelayaasha labada rimoor leh iyo kuwa sadexda rimoor leh, gaariyaasha booyadaha, iyo haddii aad waddo waxyaabaha halista ah qaada. Dhammaan ogolaanshahan ayaa u baahan imtaxaanaad dheeraad ah oo qoraal ah. Ogolaanshaha baska, baska iskuulka, iyo mootooyinka ayaa u baahan imtaxaanaadka waddada oo gaar u ah.

## Shattiga Darawalnimada Ganacsiga

Shattiyada A, B iyo C waxa loo yaqaan shattiga darawalnimada ganacsiga (CDL). CDL wuxuu kuu ogolaanayaa inaad waddo dhammaan baabuurta heerka D, marka lagu daro noocyada baabuurta qaarkood ee ku jira heer kasta ee shattiga darawalnimada ah.

## Shattiga Heerka C

Markuu haysto shattiga ogolaanshaha waxyaabaha khatarta ah, qofka haysta shattiga heerka C ayaa wadi kara gaariga loogu talagalay in lagu wado shattiga heerka D ee ay saaranyihiin agabka khatarta ah. Marka aad haysato shattiga wadista booyadaha, waxaad qaadi kartaa dareeraha hawada khatarta ah ee ku jira haanta si rasmi ah gaariga loogu rakibay ama mid laga dajin karo gaariga.

## Shattiga Heerka B

Shattiga Heerka B, ee leh ogolaanshaha looga baahanyahay, ayaa u ogolaanaya qofka haysta inuu wado dhammaan Gaariyaasha Heerka C iyo D iyo dhammaan gaariyaasha kale ee halka unug ah. Qofka haysta shattiga Heerka B wuxuu jiidii karaa kaliya baabuurta leh miisaanka guud ee 10,000 rodol ama ka yar marka uu ku shaqaynayo qaybta B ee tamarta.

## Shattiga Heerka A

Markuu haysto shatti leh ogolaanshaha ku habboon, shattiga Heerka A ayaa ku shaqaynaysa gaari kasta ama isku darka gaariga iyo tareelaha.

## Macluumaadka CDL

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CDL iyo shuruudaha CDL, ka eeg Buugga Darawalka Ganacsiga ee Minnesota, oo uu ku jiro Buug gacmeedka Darawalka Baska Iskuulka ee Minnesota. Kuwaas waxaa laga heli karaa Websaydka Adeegyada Darawalka iyo Gaadiidka ee [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov).

Fiiro gaar ah: Haddii aad waddo nooc kasta oo baabuur ah shaqo bixiye ahaan ama shaqaale ahaan, waxaa laga yaabaa in lagu xiro shuruudaha ganacsi u qaadayaasha. Shuruudahan ayaa laga yaabaa inay khuseeyaan

## **Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota**

baabuurta hal unug ah iyo baabuurta isku dhafka ah ee ka badan 10,000 rodol miisaanka guud ee baabuurta (sida baabuurta dhismaha), baabuurta loo isticmaalo in lagu keeno alaabada baakadaha ah iyo alaabta kale, iyo baabuurta loo qaabeeyey ama loo isticmaalo in lagu qaado in ka badan siddeed rakaab ah, oo uu ku jiro darawalka. Si aad si sharci ah u waddid baabuurtan, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad haysato Shahaadada baaraha caafimaadka ee Waaxda Gaadiidka Maraykanka oo ansax ah. Waxa kale oo laga yaabaa in lagu soo xaddidaado tirada saacadaha aad wadayso iyo dayactirka iyo shuruudaha hubinta baabuurka.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xariir Waaxda Gobalka Minnesota oo aad ka wacayso 651-405-6196 ama Xafiiska Gaadiidka iyo Howlaha Gaadiidka Ganacsiga ee Waaxda Gaadiidka oo ah 651-215-6330.

### **CDL Shaqsiyaadka Ka yar 21 sano Jir**

Dadka degan Minnesota ee da'doodu ka yar tahay 21 sano waxay heli karaan CDL. Shatiga waxa uu lahaan doonaa xaddidaad gaar ah.

### **Cusboonaysiinta iyo Badalida Shattiga**

Shattiga darawalnimada ee uu bixiyo gobolka Minnesota waxa uu dhacayaa maalinta dhalashadaada waana in la cusboonaysiiyaa afartii sanaba mar marka aad gaadho 21 sano jir. Haddii shattigaaga hadda uu kaa lumo, dhaawacmo, ama la burburiyo, waa inaad codsataa shatti beddelaad ah Haddii uu kaa lumay shatigu, waa in aad keentaa aqoonsi ansax ah marka la gaaro wakhtiga cusboonaysiinta. Dadka codsanaya cusboonaysiinta shatigu waa in ay ku gudbaan imtixaanka aragga/indhaha ah.

### **Badalida Magaca ama Cinwaanka**

Haddii aad beddesho magacaaga ama cinwaankaaga kahor intaan shatigaadu dhicin, waa inaad ku codsataa shatti kale (beddelaad ah) 30 maalmood gudahood. Haddii aad u baahan tahay in aad beddesho ogolaanshaha barista, waa inaad cusboonaysiiso oggolaanshahaaga barista.

### **Shaqada Socota ee Ciidanka**

Haddii aad ku jirto adeega ciidamada qalabkasida oo firfircoon oo aad haysato shattiga darawalnimada ee Minnesota oo aan dhicin marka aad gelayso shaqada ciidamada, lagaagama baahna inaad cusboonaysiiso shattigaaga ilaa aad ka tagto ama lagaa saaro ciimada, iyadoo aan loo eegayn mudada aad ku jirto ciimada. Si aad u hubiso in diiwaanka darawalnimadaada la sii hayo, waxaad u baahan doontaa inaad DVS u soo gudbiso dukumeentiyada milatariga kuwaas oo muujinaya taariikhda aad gashay milatariga. Dukumeentiyada waxaa lagu soo gudbin karaa khadka interneedka ama boostada ayaa loogu soo diri karaa Driver and Vehicle

Services, 445 Minnesota Street, Suite 180, St. Paul, Minnesota 55101. Haddii aad qabtid su'aalo, ka wac DVS at (651) 297-3298.

Waa inaad ku cusboonaysiiso shattigaaga hal sano gudaheed laga bilaabo marka aad ka baxday adeegga milatariga ee firfircoon adiga oo keenaya shattigaada darawalnimada ee Minnesota iyo warqadahaaga ka siideynta milatari ee DD214. Haddii aad Minnesota ula soo guurto shatti ka baxsan gobolka oo aad weli ku jirto militariga, waxaad u baahan tahay inaad keento warqad sheegaysa in aad Ciidamada ku Jirto oo ka socota taliyahaaga si aad lagaaga dhaafto imtixaanka waddada.

Shardi dhaafkaan ayaa sidoo kale khuseeya lamaanayaasha, saaxiibada jacaylka ama qofka ka yar 26 sano ee uu masuulka ka yahay qof ciidamada ku jira, haddii aysan deganayn gudaha Minnesota markuu uu si firfircoon ciidamada ugu jiro.

## Peace Corps iyo Shaqaalaha Adeega Arimaha Dibada ee Federaalka

Haddii aad ka shaqayso banaanka Minnesota adiga oo si mutadawacnimo ah uga shaqeeya Peace Corps, ama shaqaale ka ah waax federaalka ah ama wakaalad laguuna xilsaaray adeeg arimaha dibada ah meel ka baxsan Maraykanka aadna haysatay shattiga darawalnimada ee Minnesota oo aan dhicin markii aad biloowday adeegga ama shaqada, lagaama doonaayo inaad cusboonaysiiso shattigaaga ilaa adeegu ka dhamaado, iyada oo aan loo eegayn mudada uu adeegu soconayo. Si aad u hubiso in diiwanaaga wadista la hayo, waxaad u baahan doontaa inaad DVS u soo gudbiso dukumeentiyada muujinaya taariikhda bilawga adeegaaga ama shaqadaada. Dukumeentiyada waxaa lagu soo gudbin karaa khadka interneedka ama boostada ayaa loogu soo diri karaa Driver and Vehicle Services, 445 Minnesota St., Suite 180, St. Paul, Minnesota 55101.

Waa qasab inaad ku cusboonaysiiso shattigaaga sanad gudihii marka adeegaaga ama shaqadu dhamaato adiga oo keenaya shattigaaga darawalnimada Minnesota iyo dukumiintiga shaqadaada.

Shardi dhaafkan ayaa sidoo kale qabanaya lamaanayaasha, saaxiibada jacaylka ama qofka ka yar 26 sano ee masuulka laga yahay, haddii aysan deganayn gudaha Minnesota intii uu qofku ku jiray adeega ama shaqada mutadawacnimada ah.

## Adeegga Xulashada

Haddii aad u dhexeyso da'da 18 iyo 26, oo aad tahay muwaadin Maraykan ah ama degane, waxa lagaa diwaangelin doona Adeeg Xulasho Maraykanka marka aad codsato kaarka Adeegga Darawalka iyo Gaadiidka ee Minnesota. Haddii aad ka yar tahay 18 jir, DVS waxay kaa reebi doontaa diiwaangelinta Adeegga Xulashada ilaa aad ka gaarayso dhalashada 18. "Ogolaanshaha Diiwangelinta" wakhtiga codsiga ayaa waafaqsan Xeerka Adeega Xulashada Milatariga Maraykanka Qodobka 50aad ee lifaaqa, qaybta 453.

## **Kaararka Aqoonsiga Gobalka**

Waxaad ka dalban kartaa kaarka aqoonsiga Minnesota xafiiska aqbala codsiyada shattiga darawalnimada. Waa inaad keentaa dukumeenti ansax ah oo ku saabsan kaarka aad codsanayso (Ka Caadiga ah, REAL ID, ama ka La Xoojiyay). Waxa lagu ogol yahay inaad haysato hal nooc oo kaar ah. DVS ma siin doonto kaarka aqoonsiga qofka hore u haystay shattiga wadista ama ogolaanshaha barista iyada oo aan la keenin qoraal sheegaya in qofku ka tanaasulayo mudnaanta darawalnimada.

## **Khidmadaha Adeegyada Darawalnimada**

Si aad u hesho liis dhamaystiran oo ah shatiga darawalnimada, kaarka aqoonsiga, iyo khidmadaha kale ee adeegyada darawalnimada had iyo jeer ka tixraac bogga khidmadaha shatiga darawalnimada ee ku yaalla bogga DVS. Khidmadaha waxaa go'aamiya sharciga waana la bedeli karaa.

## **Adeegyada deg-degga ah (fast track)**


Waxaad ku dadajisan kartaa shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga adiga oo bixinaya lacag dheeraad ah oo dhan \$20.00. Arjiyada qaarkood uma qalmaan adeegyada dedejinta dheeraadka ah, kuwaas waxaa ka mid ah laakiin kuma koobna oo keliya shattiga darawalnimada iyo kaararka aqoonsiga, mar kasta oo codsiga ugu horreeya ah, iyo marka shatiga nooc ka sii darajo sarreeya loo beddelayo.

Shattiga darawalnimada ama kaararka aqoonsiga waxa lagu samayn doonaa saddex (3) maalmood oo shaqo gudahood. Macmiilku waa inuu kaarka ku helaa UPS (United Parcel Service) 10 maalmood oo shaqo gudahood.

# Cutubka 2 Gaarigaaga

## Gaarigaaga

### Gaarigaaga waa inuu haystaa qalabkan



Kahor intaadan gaari matoor ku shaqeeya ku wadin wadooyinka dadwaynaha, xaqiiji inuu leeyahay qalab dhamaystiran matoorkiisuna si fiican u shaqaynaayo.

Kala baro gaarigaaga. Akhri buug-gacmeedka darawalka oo baro sida loo isticmaalo dhammaan qalabka. Si joogto ah u hubi nalalka, qalabka masaxa muraayadaha hore, hoonka, iyo taayirada si aad u hubiso inay si habsami leh u shaqaynayaan. Hubi inaad fahantay shaqooyinka cabbiraadaha iyo tilmaamayaasha digniinta.

Marka aad soo gasho baabuurka, hubi kursigaaga iyo muraayadaha si aad u aragto inay u baahan yihiin hagaajin. Hubi in rakaabku ay ku fadhiyaan meelo aan kaa horjoogsanaynin aragtidaada ama kaa celinaynin inaad si caadi ah u waddid baabuurka. Hagaajin oo xiro suunkaaga oo hubi in dhammaan rakaabkaagu ay sidaas sameeyaan.

## Shuruudaha Gaariga

### Bareegyada

Dhammaan gaariyaasha iyo taraagyadu waa inay leeyihiin ugu yaraan labo nidaamyada bareega ah oo kala duwan, sida bareega cagta iyo bareega baakinka/xaalada degdega ah.

### Turusyada gaariga

Dhammaan baabuurta rakaabka ee gaarka loo leeyahay waa inay lahaadaan turusyada (baambaradda) hore iyo kuwa dambe. Baabuurta xaajiyadaha ah iyo kuwa van-ka waa inay lahaadaan turusyo hore iyo kuwa gadaal ah ama qalab iftiimiya.

## Hoonka

Baabuurkaagu waa inuu lahaadaa hoon shaqaynaysa. Ganbaleelada, seeriga iyo firinbiyadu maaha hoon waxaana keliya adeegsan kara gaariyaasha gurmada degdega ah. Isticmaal hoonkaaga marka ay lagama maarmaan noqoto si aad isaga ilaaliso shil. Ha garaacin hoonka si aan loo baahnayn. Iska ilaali inaad hoonka u yeeriso ujeedooyinka sida sheegista in aad timid.

## Nalalka hore iyo kuwa Danbe

Dhammaan gaariyaasha, marka laga reebo mootooyinka, waa inay lahaadaan nalalka hore oo cadcad kuwaas oo ku shaqeeya iftiin dheer iyo mid gaaban, iyo nalalka cascas oo shidmaya marka bareega la qabto.

Marka iftiin dheer la daaro, nalalka hore waa inay muujiyaan alaabaha yaala waddada kaa horaysa adiga oo u jira illaa 350 fiid.

Beddel nalalka hore ee burburay. Muraayada dilaacsan waxay u keenayaan qoyaanka iyo boodhka inay ku ururaan gudaha nalka, taas oo keenta yluminta iftiinka iyo in uu kor u kaco iftiinka cawaraya darawalada kale.

Nadiifi nalalkaaga hore sida hadba aad u nadiifiso muraayadaha gaarigaaga. Nalalka hore ee wasakhda ah ayaa yareeya iftiinka nalka ilaa xad badan oo dhan 75 boqolkiiba ah.

Nalkaaga hore ha la eego ugu yaraan hal mar sannadkii si loo hubiyo in ay si habboon ugu jeedaan dhanka loogu talagalay. Nalalka hore qaarkood ayaa u baahan qalab meelayn ah ama rakibid khaas ah. Ka fiiri buugaaga tasmada darawalka wixii xog dheeraad ah.

Gaariyaasha qaarkood ayaa leh nalal aan dab badan qaadan ee hore, oo loogu yeero nalalka maalintii shidan, kuwaas oo iskood u shidmaya marka aad gaariga wado maalintii. Nalalkani waxay u fududeeyaan dadka kale in ay arkaan gaarigaaga. Nalalka danbe iyo nalalka baakinku iskood uma shidmaan.

Nalalkaaga hore waa in la shidaa marka qoraxdu dhacdo lana isticmaalaa ilaa qoraxdu soo baxdo Waa in sidoo kale la isticmaalaa inta lagu jiro cimilooyinka ay ku jiraan roobka, barafka, cimilado mugdi ah, cir cadaaga, ama caadka iyo xili kasta oo aadan si faseex ah u arkay waddada kaa horaysa ugu yaraan 500 oo fiid.

## Nalka Taargada Gaariga

Nalalka cadcad waa inay shidaan taarikada danbe ee gaariga si loo arko habeenkii.

## Tilmaamaha Leexashada

Dhammaan nalalka calaamada leexashadu waa inay ahaadaan kuwo shaqaynaya. Waa in aad isticmaashid calaamadaha leexashada haddii ballarka gaariga, ama ballaca rarka aad sido uu ka celinayo darawalada kaa dambeeya in ay arkaan calaamadaha gacanta iyo cududda ah.



## **Nalalka Mamnuuca ah**

Nalalka buluuga ah, nalalka bigbigleeya, iyo nalalka bikaaca biliglaha ah ayaa loo sameeyay ujeedooyin gaar ah. Looguma talagelin in ay isticmaalaan baabuurta aan loo fasaxin. Keliya baabuurta barafka xaaqda, qalabka kale ee dayactirka waddooyinka, iyo kuwa loo ogolyahay ee baabuurta gurmadka degdega ah ayaa lagu rakibi karaa nalal buluug ah. Baabuurka xaaladaha degdega ah ee la ogolyahay oo keliya, basaska iskuulka, qalabka dayactirka waddooyinka, baabuurta jiidista, baabuurta adeega, iyo qalabka beeraha ayaa lagu qalabayn karaa nalal biligleynaya. Keliya basaska iskuulka, qalabka barafka xaaqa, iyo baabuurta boostada ee miyiga ayaa lagu rakibi karaa nalalka biliglaha ah.

## **Qalabka yareeya guuxa gaariga**

Dhammaan baabuurta waa in lagu rakibaa maflar/qalabka guuxa yareeya oo ka ilaalinaya baabuurku inuu sameeyo dhawaaq dheer ama degdeg ah, gaar ahaan dhawaaq qaylo ah ama guux weyn. Si joogto ah uga hubi maflarku si uu u siideynayo kaarboon monoksaydh.

## **Muraayadaha gadaal lagu eego**

Dhammaan gaariyaasha rakaabka qaada waa inay ku xiran yihiin muraayadaha gadaal lagu eego. Gaariyaasha sida taraagyada kirada ah ee lagu guuro, kuwaas oo aan loogu talagalin in gadaashooda laga arko daaqada dambe, waa in lagu rakibo muraayad haadyo dheeraad ah oo geeska lagu dhajijo.

Xaajiyadaha, kuwaas oo badanaa loo adeegsado shaqooyinka xamuulka, waa in lagu xiro muraayad haad dheeraad ah. Muraayad haadku waxay siinaysaa darawalka inuu si fiican u arko marka alaabta uu ku rarani ay xirto aragga muraayad haadka gadaal lagu eego.

## **Suunka Amaanka kusiga gaariga iyo Buufinta difaaca**

Xaqiiji in suumanka amaanku ay nadiif yihiin ayna si fiican u shaqaynayaan, si ay u xirtaan dhammaan dadka gaariga saaran. Minnesota dhexdeeda, baabuurta waa in lagu xirtaa suunka amaanka baabuurka, isticmaalka suumanka baabuurkuna waa qasab.

Buufinta amaanka ayaa loo sameeyay inay la shaqayso suumanka amaanka si looga hortago dhaawac yimaada. Looma samayn inay qofka ka ilaaliyaan inuu gariga ka duulo.

Ka ilaali rakada shirka hore ee gaariga qashinka iyo alaabada. Marka buufintu si degdeg ah hawo u gasho, agabka saaran rakada hore ee shirka ayaa noqon kara walxo khatar ah oo soo duula.

Akhri buugaaga tasmada darawalka kahor intaadan wadin gaari ay ku xiran yihiin buufinta difaaca shilka.

## Taayirada

Taayiradu waa inay awoodaan inay qaadaan culeyska gaarigaaga oo ay u qabsadaan dusha sare ee waddada si sax ah. Si joogto ah uga baar taayirada go'itaanka, dildilaac, duugoow aan sinnayn, meelo murxay, barar, iyo dalool. Wado taayir dheeraad ah oo wanaagsan oo hubi cadaadiskiisa naqaska marar badan. Taayiradu uma qabsadaan wadooyinka jayga iyo carrada ah si lamid ah sida ay u qabsadaan waddada shubka ah ama laamiga ah. Taayiradu waxay caan ku yihiin inay lumiyaan 1 psi (rodol halkii injiba oo afarjibaan) bishiiba. U eeg aariyada taayiradaada si joogto ah oo marna ha kaxayn gaariga oo taayirkiisu uu naqasku ka baxay.

- Aariyada naqaska lagu talinaayo in gaariga taayirkiisa ay ku jirto ayaa ku qoran sharootada ku dhegan gudaha albaabka darawalka ee gaarigaaga ama buuga tasmada mulkiilaha.
- Hubi taayiradaada kahor intaadan gaariga ka xayn ama ugu yaraan sadex saacadood kadib marka aad gaariga waday.
- Ku xir qalabka lagu cabiro aariyada tuubada aariyada ee taayirkaaga. Cabirku wuxuu muujin doonaa heerka cadaadis naqaska (psi).
- Isu fiiri psi ga aad cabiray iyo cabirka ku qoran sharootada gudaha albaabka darawalka ku dhegan ama ku qoran buuga tasmada mulkiilaha. HA u barbar dhigin psi ga dhinaca kaga qoran taayirkaaga.
- Haddii psi ga aad cabirtay uu ka sarreeyo tirsiga, ka bixi aariyada ilaa ay is le'ekaadaan. Haddii ay ka hoosayso, ku dar hawo ilaa ay ka gaarayso lambarka saxda ah.
- Marar badan ka hubi taayiradaada cilladaha duugowga iyo dhaawaca. Taayirku wuxuu noqonayaa sharci daro haddii xajmigiisu ka hooseeyo lix iyo toban meelood meel halkii inji qoto ahaan. Qaab fudud oo aad ku hubin karto duugowga ayaa ah inaad adeegsato cabirka shilinka.
- Qaado shilin kadib ku qabo jirka Abraham Lincoln (sawirka shilinka ku qoran) inta u dhexaysa suulkaaga iyo far murugsatadaada (farta suulka ku xigta).
- Dooro meel ka midka ah taayirkaaga ee cuftu u muuqato in uu ugu hooseeyo kadibna saar madaxa Lincoln mid kamid ah sadarka godan ee taayirka.
- Haddii qayb kamid ah madaxa Lincoln uu daboolo taayirku, waxaad ku socotaa heerka taayir sharci ah oo amaan ah. Haddii tiyaatarku ka hoos maro taas, awooda gaarigaaga ee in uu qabsado waddada marka cimiladu xumaato ayaa aad u hoosaysa.

## **Muraayada hore iyo Daaqadaha**

Aragaaga aad wax ka aragto muraayadaha hore ee kahortaga dabaysha iyo daaqadaha waa in aysan xirin dil-dilaacyo, midab doorson, caad, uumi, ama baraf marka aad gaariga wado. Walxo lagama soo laalaadin karo inta u dhaxaysa darawalka iyo muraayadda hore. Calaamadaha iyo istiikarada ama aaladaha kale ee uu ogolyahay sharciga gobolku ayaa lagu dhejin karaa muraayadaada hore. Kuwaas waxaa ka mid ah istiikarada jardiinooyinka gobolka iyo qaranka, istiikarada hubinta badbaadada ee rasmiga ah, iyo EZpass aaladaha aruurinta lacagaha elektirooniga ah ee waddada khidmada lagu maro.

Nidaamka goobta sheega ee caalamiga ah iyo jiheeyayaasha kale ee socdaalka ayaa lagu dhajin karaa ama lagu xiri karaa meesha ugu hoosaysa muraayada hore ee gaariga.

Qalabka falcelinta darawalka iyo la socoshada ammaanka ayaa lagu rakibi karaa meel wax yar ka danbaysa, waxyar ka koraysa ama wax yar ka hoosaysa muraayada xaga dambe lagu eego.

Muraayadaha hore lagama samayn karo, lagumana dabooli karo, ama looma adeegsan karo sida qalab ka dhigaaya muraayada mid aad u wirqaysa ama yaraynaaya nalka kasoo dusi kara.

Walax kasta oo madoobayn ah oo lagu daboolo daaqadaha dhinaca ama kuwa dambe wixii ka dambeeya Agoosto 1, 1985, waa in la calaamadeeyaa si ay u muujiso boqolkiiba heerka iftiinka ka soo gudbi kara iyo boqolkiiba heerka heerka dib u soo celinta iftiinka ee ay abuurto. Haddii ay gudbiso wax ka yar 50 boqolkiiba, ama ay dib u soo celiso wax ka badan 20 boqolkiiba aftiinka jira, waxa lkeli ah oo loo isticmaali karaa daaqada dambe ee gaariga qabaalka ah, ama daaqadaha danbe iyo dhinaca ee baabuurka (gadaasha kursiga darawalka), limoosiinka, ama baabuur uu isticmaalo xabaasha.

## **Sifeeyaasha Muraayadaha hore iyo Qalabka**

### **Ceeryaamada ka bi'iyaa Daaqada**

Gaariga matoor ku shaqeeya ee leh muraayado dhalo ah waa inuu lahaado qalabka tirtira muraayadaha oo si fiican u shaqaynaya. Qalabka ceeryaamada ka masaxa gaariga ayaa muhiim u ah daaqadaha iyo muraayada hore si ay uga bi'iyaa caadka iyo barafka.

## **Ilaaliyaasha Taayirka ama Saqafka taayirka korkiisa ah**

Gaariyaasha rakaabku waa inay ku qalabaysan yihiin saqafyada taayirada ama difaacyada kale ee taayirada si ay uga difaacan biyaha, wasakhda, iyo agabka kale inay soo qaadaan ayna hawada u tuuraan taayiradu.

## **Farsamooyinka tashiilka shidaalka**

**Gaarigaaga ka dhig mid si wanaagsan u shaqaynaya**

- Si fiican uga shaqee matoorkaaga.
- Aariyo fiican ku shub taayiradaada.
- Adeegso nooca lagu talinayo ee saliida matoorka.

### **Si Hufnaan leh u wad gaariga**

- Qorshee oo ka dhigo hawlahaaga hal safar
- Si taxadar leh gaariga u wad; iska ilaali xawaaraynta xad dhaafka ah sida inaad aad u sheelarayso gaariga, jiiiraynta iyo bareeg qabashada boobsiiska ah.
- Isha ku hay xadigga xawaaraha
- Baabuurka ka deji miisaanka dheeraadka ah; iska ilaali alaabaha culus ee aan loo baahnayn in ay saarnaadaan gaarigaaga
- Adeegso cruise control marka aad marayso waddada wayn
- Adeegso geerka shanaad ee xawaaraha.
- Raac gaadiidka dadwaynaha, adeegso gaariyaasha wadaaga ah, baaskiil ama lugee marka ay suurtagaltahay.

*Sharciyada taraafiga ee Minnesota ayaa qabanaya qof kasta oo wada gaari ku socda waddada dadwaynaha ee gobalkan. Sharciyada soo socdaa waxay ka hadlayaan maamulida iyo howlgalinta gaarigaaga.*

Dhammaan wadooyinka balaaran, gaariga waa in lagu wadaa dhanka midig ee waddada wayn marka laga reebo:

- Marka aad dhaafayso ama baasayso gaari kale oo ku socda isla jihada aad ku socoto adiga oo raacaaya xeerarka dhaafida.
- Marka qaybta midig ee waddada laga xiro gaadiidka inta lagu wado dayactir ama dhisme.
- Marka waddada loo qaybiyey sadex haad oo calaamadaysan.
- Marka waddada lagu asteeyey calaamado muujinaya inay tahay wado hal jiho u socota.
- Marka ay muhiim tahay inaad ka leexato markaad ku soo socoto gaari sifo sharci ah ku yaalla ama lagu joojiyay waddada (sharciga ka leexashada).

## Xaddidaada Xawaaraha

Hadba mark xawaarahaagu sii bato, waxaa yaraanaya wakhtiga aad haysato si aad uga falceliso dhacdooyinka ka jira waddada iyo aagaagaarkaaga. Ku socoshada xawaaraha dheereeya ayaa waxay kordhisaa suurtagalnimada shilalka. Oo marka shilalku ay ku dhacaan xawaare aad u sarreeya, dhaawacyada dhibbanayaashu waxay u noqdaan kuwo aad u daran waxay u badan tahay inay dhimasho ka dhalato.

Sharciga xawaaraha aasaasiga ah ee Minnesota wuxuu kaa rabaa inaad ku waddo xawaare aan ka dheerayn inta macquulka ah ee xaaladaha jira. Kuwaas waxaa ka mid ah cimilada, gawaarida, iyo xaaladaha waddooyinka.

Ku wadista xawaare ka dheereeya xadka waddada lagu dhajiyay waa sharci darro. Xawaaraha waddada la dhajiyay waa xawaaraha ugu badan ee loo ogolyahay waddadaas gaarka ah. Si kastaba ha ahaatee, xadka xawaaraha ee wadooyinka labada haad ee leh xawaare ku dhejisan oo ah 55 mph ama ka sareeya ayaa lagu kordhiyaa 10 mph marka darawalku si sharci ah u dhaafayo baabuur kale oo isla jihada u socda.

Xadigga ugu yar ee xawaaraha lagu socon karo ayaa lagusoo qori karaa wadooyinka qaarkood. Waa sharci darro inaad ku socoto xawaare ka hooseeya xawaaraha ugu yar ee la dhajiyay marka ay jirto cimilada, taraafiga, iyo xaaladaha waddada oo caadi ah.

**Fiiro gaar ah:** Haddii aad timaado isgoys adiga oo ku socda xawaare sharci darro ah, waxaad luminaysaa mudnaanta jidka (hormarista) ee la xiriirta ku waddida xawaaraha sharciga ah.

Xaddidaadaha soo socda ee xawaaraha Minnesota ayaa dhaqan galaya marka lagu jiro xaaladaha gaari wadista ee caadiga ah, aan ka ahayn marka calaamadaha waddadu ay si kale sheegaan:

**10 mph - luuqyada guryaha dabadooda mara**

**30 mph - waddooyinka caasimada ama magaalada**

**55 mph - dhammaan meelaha kale ee aan lagu cayimin liiskan**

Aagagga iskuullada, yaree xawaaraha marka carruurto joogaan. Shaqada ama aagagga dhismaha, yaree xawaaraha oo u wad si taxadar leh. Had iyo jeer u hoggaansan xadka xawaaraha waddada la dhajiyay.

## **Xadka Xawaaraha iyo Ganaaxyada**

Waxaa lagugu ganaaxi karaa inaad baabuur kaxayso xawaare ka badan xadka la dhajiyay. Ganaaxyo dheeri ah ayaa lagugu soo dalacayaa haddii lagugu qabto in aad ku wadday baabuur 20 mph ama ka badan wax dhaafsan xadka la dhajiyay. Haddii lagugu qabto in aad baabuur ku wadday wax ka badan 100 mph, mudnaantaada wadista baabuurta waa lagala noqonayaa ugu yaraan lix bilood.

## **Xawaaraha la Yareeyay**

Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo inaad xawaarahaaga hoos u dhigto marka ay jiraan xaalado badan oo baabuur wadista. Waxaa muhiim ah in la xasuusto in kordhinta xawaaruhu ay hoos u dhigto inta aad wax ka arkayso oo ay ku gelinayso khatar weyn oo aad ku gasho shil.

Waa in aad aayar u socoto marka aad u dhawaato ama aad dhaafayso baabuurta xaalad degdeg ah oo joogsatay oo ay u daaranyihiin nalalka xaaladaha degdega ah oo biligleynaya. Khidmad dheeri ah oo aan ka yarayn \$25 ayaa lagu darayaa ganaaxa xawaaraynta haddii aad sharcigan jabiso. Aayar u soco qofka calanka haya, lugeynaya, xayndaabyada, iyo oolka ama muraayadaha iftiinada indhaha qabanaya ee waddada. Cimilada xun iyo wadooyinka oo xumaada ayaa ah xaalado kale oo darawalada looga baahan yahay inay aayar socdaan.


Xawaarayaasha hooseeya ayaa muhiim ah marka aad ku socoto wado dhuuban ama dabayl ka jirto ama aad kusoo aado qalloocasho waddo, taag, ama meelaha laga goynayso jidka tareenka. Marka aad ku wadid jidka jayga ama carrada ah, waxaad u baahan tahay inaad aayar socoto. Waxay kugu qaadan doontaa wakhti dheer inaad ku istaagto waddada jayga ama carrada ah oo aad bay u fududahay in uu kula boodo marka aad leexanayso.

## **Yaraynta Xawaaraha markaad marayso Buundooyinka**

Isha ku hay oo ku dhaqan xadidaada xawaaraha iyo calaamadaha "No Passing" ("Lama baasi karo") ee ku dhagan buundooyinka.

## **Tilmaamidda/Fareejaynta**


Marka aad doonayso inaad haadka badelato ama aad leexato, ku fareejee aalada fareejo bixinta saxda ah si aad ugu sheegto gaadiidleyda kale waxa aad doonayso. Fareejooyinka waa in in la soo shidaa marka aad 100 fiid u jirto meeshii aad ka leexaynaysay. Sii wad inaad fareejada shido ilaa aad ka dh amayso leexashada ama badalida laynka.



U leexashada dhanka Bidix



U Leexashada dhanka Midig



Joogsi

## **Tilmaanta Gacanta iyo Dhudhunka**

Inta lagu jiro saacadaha maallintii ah, tilmaamaha gacanta iyo dhudhunka ayaa la adeegsan karaa oo ah talaabo dheeraad ah, ama fareejada badalkeed ah. Ma adeegsan kartid tilmaamaha gacanta ah xiliga habeenkii ama inta aad waddo gaari lagu dhisay ama lagu raray alaab qarinqaysa gacan haatinta aad u samayso darawallada kale.

## **Laymanka Waddada**

Haadka baabuurta waa qayb ka ah wado ama jid wayne ballaar ahaan ku filan in loo fasaxo adeegsiga amaanka ah ee gaari ama saf gaariyaal ah. Waxaad ku jirtaa haadka gaadiidka mar kasta oo aad ku gaari waddo waddada ama waddo weyn. Inta haadadka waddada lama calaamadaynin, laakiin way jiraan haadadku haddii la calaamadeeyay iyo haddii kale. Waa inaad ku dhex wadaa hal haad oo baabuurta loogu talagalay, adiga oo aan kolba haad ka baxaynin una gudbaynin haad kale ama aan lugaha la lagalaynin haadka kale.

## **Beddelashada Haadadka**

Badanaa waa lagama maarmaan in la beddesho haadka si loo leexdo, si loogu darmo haadka baabuurta kale, ama si loo qabto hawlaha kale ee baabuur wadista. Beddelashada haadka ayaa waxay noqon kartaa khatar waana in si taxadar leh loo sameeyaa. Hubi inaad haysatid firaaqo ammaan ah oo dhinaca ah, gadaasha ah, iyo xagga ka horaysa gaadhigaaga, ka hor intaadan u beddelan haad kale. Madaxa u leexi jihada haadka aad u socoto oo ka hubi baabuur in ay

ku jirto. Haddii aad ku tiirsan tahay oo kaliya muraayadaha, waxaa laga yaabaa inaad arkin baabuurta meelo gaar ah kaagaga beegan, halkaas oo loo yaqaano ("blind spots.") ("aagga qarsoon.")

## Aaga Qarsoon

Baraha aan kuu muuqan (blind spots) waa aagaga gaarigaaga oo aadan arki karin. Ma arki kartid dadka lugeynaya ama kama arki kartid baabuurta kale muraayadaada lagu eeego xaga dambe ama muraayadaha dhinaca marka ay joogaan meelahan aadan ka arki karin. Naqshada gaarigaaga, iyo halka ay ku yaallaan "tiirarka" taageera saqafka, ayaa go'aaminaya meesha ay yihiin halka aadan ka arki karin gaariga ku soo jira. Waxyaabaha ay ka midka yihiin muraayadaha hore ee wasakhaysan iyo nalalka ifaya ayaa waxay sidoo kale abuuri karaan indho madoobayn muddo kooban ah. Waa muhiim in la ogaado meesha ay ku yaalaan meesha ay tahay halka aadan ka arki karin waxyaabaha ku soo jira Kahor intaadan bedelanin haadka, si degdeg ah madaxaaga u leexi si aad u raadiso dadka lugaynaya ama baabuur qarsoon. Iska ilaali inaad ku dhex wado meelaha dhinacooda ah ee ka qarsoon darawalada kale. Si gaar ah uga digtoonow meelaha meelaha dhinaca gaariga kale ah ee ka qarsoon darawalka kale marka aad ku waddid agagaarka baabuurta ganacsiga.




## Leexashooyinka

Leexashada khaldan ayaa waxay sababtaa shilalka gaadiid badan. Si badbaado leh u gal haadka saxda ah kahor intaadan gaarand meesha aad ka leexan doonto.


- Hoos u dhig xawaarahaaga kahor intaadan leexanin. Fareejada u daaro waxa aad damacsantahay in aad samayso, ugu yaraan 100 fiid/tallaabo leexashada kahor. Fareejaynta ayaa u ogolaanaysa dadka lugeynaya iyo darawallada inay ogaadaan waxaad qorsheyneyso in aad samayso.

### U leexashada dhanka Bidix




*Bidix u leexashada: Kadib markaad hubiso gaadiidka kaa dambeeya ee aad muujiso ujeedadaada, u gudub haadka ugu dhow laynka dhexe. Haddii aysan jirin layman calaamadeynaya haadka, u dhaqaaji gaarigaaga dhanka midig ee bartamaha waddada. Midig iyo bidix fiiri kahor inta aanad bilaabin leexashada. Sii xaqa jidka, haddii loo baahdo. Leexi steerinka adiga oo gacanta soo dul keenaya gacanta, oo dhammaystir u leexashada haadka hore ee dhanka midig ee laynka dhexda.*

### U Leexashada dhanka Midig




*Midig u leexashada: Kadib markaad hubiso jidka kaa danbeeya aadna fareejo ku muujiso damacaaga, aad dhanka geeska midig ee waddada. Midig iyo bidix fiiri kahor inta aanad bilaabin leexashada. Sii xaqa jidka, haddii loo baahdo. Leexi steerinka adiga oo gacanta soo dul keenaya gacanta, oo dhammaystir u leexashada haadka ku xiga geesta waddada.*


**Laba bidix u leexasho oo soo socda**




**Ka imaanshaha waddo hal jiho u socota oo loo gudbo waddo kale oo hal jiho u socota**




**Ka imaanshaha waddo laba jiho u socota oo loo gudbo waddo kale oo hal jiho u socota**



**Ka imaanshaha waddo hal jiho u socota oo loo gudbo waddo kale oo hal jiho u socota**



**Haadadka badan oo leexasho ah**



*Laymanka leexashada ee badan: Haddii ay jiraan calaamado ama astaamaha laynaka oo oo ogolaanaaya laymanka leexashada oo labo ah ama ka badan, ku ekoow laynkaaga inta aad leexnayso.*

- Inta aad sugayso markaaga, taayirkaagu ha toosnaado, cagtaadana ku hay bareega. Haddii gaarigaaga gadaal laga dhaco, waxaa yaraanaysa suurtagalnimada in lagugu riixo baabuurta xaga hortaada ah ka soo socota.
- Sii wad inaad fareejayso ilaa aad ka biloowdo leexashada.
- Ha samayn leexasho degdeg ah adoo ku socda haadka khaldan ee waddada.
- Iska fiiri baabuurta ama caqabado yaallaa waddada aad doonayso inaad gasho.
- Markasta ku dhamee leexashadaada adiga oo ku socda haadka saxda ah. (Fiiri jaantusyada bogagga 24 iyo 25.)
- Haddii gaariga kaa horeeyaa uu bixinayo fareejada si uu bidix ugu leexdo, tartiib u soco una diyaar garoow inaad istaagto.
- Markaad sugayso inaad dhanka bidix u leexato adiga oo taagan nalka cagaarka ah oo ay gaadiid dhanka kaa soo horjeeda ka soo socdaan, ku beeg gaariga isgoyska halkaas oo gaarigaagu uu la simanyahay calaamada dhinaca waddada. Fursada kaliya ee loogu leexan karo bidix ayaa laga yaabaa in ay tahay marka nalka cagaaran uu isu beddelo jaalle.

## **Leexashada Marka Nal Cas Shidan yahay**

### **U Leexashada dhanka Midig**

Isgoysyo badan, waxaad u leexan kartaa midig inta nalka taraafigu yahay casaan. Xaqiiji inaad ku socoto laynka saxda ah aadna si buuxda u istaagto. Calaamadaha "No Turn On Red" ("Nalku marka uu Guduudyahay lama Leexan karo") ayaa ku dhajisan halka leexashadan aan la ogolayn. Ka hubi dadka lugeynaya iyo gaadiidka dhammaan jihooyinka si aad u hubiso in jidkaagu yahay mid nadiif ah. Iska fiiri baabuurta soo socota ee hotaada bixid uga leexanaysa. Mararka qaarkood gaadiidka soo socda waxay haystaan fallaarta cagaaran ka hor inta aanu nalkaagu cagaar noqon.

### **U leexashada dhanka Bidix**

Haddii shuruudaha qaarkood la buuxiyey, waxaad ka leexan kartaa waddo hal-jiho ah una leexan kartaa waddo kale oo hal jiho iyada oo nalka taraafigu uu casaan yahay. Kahor intaadan leexan, waa inaad marka hore si buuxda u istaagto, aad hubiso in isgoysku bannaan yahay, aadna jidka siiso wixii dad ama gaariyaal maraya meesha. Gaadiidka waa in loo oggolyahay inuu ku socdaan jihada aad u leexanayso. Leexashada Marka Nalka Cas Shidan yahay

- Mudnaanta waddada sii gaadiidka iyo dadka lugaynaya.
- Marka calaamadda "No Turn On Red" ("Lama leexan karo Ayadoo Nalka Cas shidan yahay") lagu dhejiyo isgoyska, waa inaad sugtaa ilaa nalku cagaar noqdo si aad u leexiso.


## Meertada (Roundabouts)


Meertada waxaa loo sameeyay inay kordhiyaan qulqulka gaariyaasha ayna abuuraan isgoys ka badqab badan joogsiga caadiga ah ee afarta jiho leh.

Markaad u dhowdahay agagaarka meertada/waddada wareeggata leh:

- Tartiib u soco markaad kusii dhowdahay meertada.
- Markaad marayso meerta haadadka badan leh, si lamid ah isgoys kasta, raac haadka saxda ah marka aad ku soo dhowdahay meertada.
- Jidka sii dadka lugaynaya iyo baaskeiileeyda jidka goynaysa.
- Isha ku hay calaamadaha ama calaamadaha laamiga ee faraya ama mamnuucaya dhaqdhaqaaqyada qaarkood.
- Markaad galayso meertada, mudnaanta sii gaawaarida kaaga soo horeeyay meertada. Ha goyn meertada ilaa dhammaan gaariyaasha ka imanaya dhanka bidix ay gudbaan.
- Kadib marka aad gasho meertada, ku soco jihada dhanka saacadu u wareegto ka soo horjeeda ilaa aad ka gaarto meesha aad ka baxayso.
- Ha joogsan, ha ku dhaafin ama ha ku badalin haadadka adiga oo wali ku dhex jira meertada.
- Haddii gaari xaaladaha degdeg ah uu kugu soo socdo, degdeg uga bax meertada kadibna gees ka istaag waddada.
- Baabuurka dhererkiisu ka badan yahay 40 fiid, oo leh balac dhan 10 fiid, ama baabuur kasta oo ah kuwo la isku daray, waxa uu haadka ka baxsanaan karaa ilaa inta lagama maarmaanka u ah in uu ku soo galo oo uu ku dhex maro waddada meertada leh isaga oo isticmaalaya tixgelinta saxda ah ee uu siinayo dhammaan gaadiidka kale.
- Waddooyin meertada ah ee leh haadad badan, haddii laba baabuur oo dhererkoodu ka badan yahay 40 fiid, balac ahaana dhan 10 fiid, ama gaadiid kasta oo ah kuwo la isku daray, uu soo galo oo uu dhex marayo waddada meertada leh si qiyaas ahaan u dhow isla marka uu gaari kale isna soo galay ama mar u dhow oo ay suurtagaltahay in ay isku dhacaan, darawalka wada baabuurka dhanka midig waa in uu siiyo xaqa waddada baabuurka ama baabuurka isku darka ah ee dhanka bidixda, hadii loo baahdana waa in uu yareeyaa xawaaraha ama joogsado.

**Meertada  
Halka haad  
ah**






### Leexashada J

Leexashada J (J-turn) waxa loo isticmaalaa in lagu yareeyo dhimashada iyo dhaawaca ay sababaan shilalka dhinaca la isku dhufto ee ka dhaca waddooyinka waaweyn ee afarta haad loo qaybiyey.



Ka gudubka waddo weyn oo kala qaybsan iyadoo la isticmaalayo leexashada J-turn



### Dhanka gacanta bidix ugu leexo jid weynaha kala qaybsan adiga oo isticmaalaya leexashada J-turn

Marka aad joogto leexashada J-turn (oo sidoo kale loo yaqaano isgoysyada shalalkooda la yareeyey), darawalada waddada yar ka imanaya ee u soo socda waddada weyn ee kala qaybsan ayaa had iyo jeer u leexda dhanka midig.

Si aad uga gudubto waddada weyn ama aad bidix uga leexato waddada yar, si buuxda u joogso, ka dibna midig ugu leexo waddada weyn. Ka gal haadka bidix-u leexashada loo qoondeeyay ee u jeeda in dhiska waddada kala qaybiyaa uu joogsaday oo dhamaystir dib u kala jiiraynta.


Marka aad samaynayso leexasho dhanka midigta ah, waxaa lagu ogolyahay inaad ka gudubto labada haadba oo aad u gudubto haadka bidix u leexashada hal dhaqdhaqaaq in aad ku gasho - marka ay nabdoon tahay in sidaas la sameeyo - si loo yareeyo qaddarka wakhtiga lagu dhex marayo haadadka jidka weyn ee la kala qaybiyey.

Marka aad dhammayso dib u jiiraynta, waa inaad u hoggaansanto gaadiidka soo socda - oo aad joojsato haddii loo baahdo - ka hor intaadan gelin jidka weyn ee la kala qaybiyay.

### Waddada Wayn ee Kala qaybsan

Goynta wado baadiye ah oo labo haad oo qaybsan leh ayaa noqon karta talaabo khatar ah. Haddii ay jirto meel banaan oo u dhexaysa labo wado oo kala go'an, waa la aqbali karaa inaad goysa waddada ilaa bartamaha kadibna aad ku sugto bartamaha ilaa aad hubto in ay badbaado tahay inaad ka gudubto waddada labaad. Haddii aysan jirin gaadiid ka imanaya labada dhan midna, darawalka ayaa goyn kara labada waddoba haddii ay ammaan tahay. Markaad ku safrayso dhexda wadooyin kala qaybsan dhanka midig kaga soco bartamaha.

Isla qaabka ayaa la adeegsan karaa markaad waddada toos dhexda uga goynaysid laakiin xaqiiji in bad dheer uu ka sokeeyo gaariga soo socda si uusan kaaga dabo imaan intaad kordhinayso xawaaraha markaad dhamayso leexashada kadib.



## Dib u jiiraynta (U-turn)

Dib u jiirayntu waa leexashada 180 digrii ah, taasoo lagu cabiro xarafka U, kaasoo kugu celinaaya isla jihadii aad ka timid. Ma samayn kartid dib u jiiraynta aan ka ahayn haddii aad sidaas samayn karto adiga oo aan carqalad ku abuurin gaadiidka jidka maraya. Calaamadaha “No U-Turn” (“Lama samayn karo dib u jiiraynta” ayaa lagu dhajiyaa meelaha dib u jiiraynta aan la ogolayn. Dib u jiiraynta lama ogola wadooyinka waawayn ee goballada iskaga kala goosha. Dib u jiiraynta ayaa mamnuuc ka ah markasta meelaha u dhow taagaga iyo leexoshoooyinka ayna darawallada kale kaa arki karin meel kuu jirta 1,000 fid.

Marka ay lagama maarmaan noqoto in loo ogolaado in gaari qaabgaar ah leh oo ku socda waddo laba ama in ka badan oo haad ah oo isku jiho u socda ah, darawalku waxa uu baabuurka u gudbin karaa haadka ugu fog oo uu si ku meel gaar ah u isticmaalo garabka waddada si uu u sameeyo dib u jiirayn.

## Ku socdaalida Laynka Dhanka Midig

Markaad gaari matoor ku shaqeeya ku wado jid leh hal layn oo u socda jihada safarka, darawal wada gaari leh xawaare hooseeya ilaa uu ka aburo carqalad jideed waa inuu ku socdaa sida ugu dhow ee macquulka ah rakada dhanka midig ama cirifka waddada.

Markaad gaari ku wado waddo wayne leh haadad dhawr loo qaybiyay oo u socda isku jiho, waa inaad ku waddo gaariga haadka midig marka ay suuragaltahay. Haddii uu ku socdo haadka ugu bidixeeya, darawalku waa inuu ka bedesho haadka si uu u ogolaado baabuur kale inay ku baasaan, marka ay xaaladaha jiraa saamaxayaan. Tani ma khusayso marka:

- Marka aad ka hormarayso ama baasayso gaari kale oo u socda isla jihada aad u socoto.
- Marka aad u diyaar garoobayso inaad u leexato dhanka bidix adiga oo jooga isgoys ama wado gaar loo leeyahay ama wado xaafadeed.
- Marka aad u diyaar garoobayso inaad ka baxdo waddada degdega ah, wado wayn oo hal jiho ah ama wado isku xirta goballada oo aad u baxayso dhanka bidix ee waddada.
- Marka gaarigu yahay gaari gurmada degdeg ah oo aqoonsi leh.
- Marka ay sidaas kugu amarto aalada rasmiga ah ee hagitaanka taraafiga, sarkaalka nabad galyada, ama aad ku jirto aaga waddada ee shaqadu ka socoto.

## Dhaafitaanka gaariyada kale

Dhaafitaanka baabuurta kale ee khaldan ayaa waxay sababtaa shilal badan. Taxaddar isticmaal marka aad habeenkii gaari kale dhaafayso, marka muuqaalka arragu xun yahay, iyo marka waddadu simbiririxo tahay.



Goobaha loo ogolyahay in gaari kale la baaso waddooyinka laba haad ah ee ay gaadiidku labada jiho u socdaan, waxaad ku baasi kartaa dhinaca bidix ee baabuurta.

idinka. Waa inaad dhaafin xadka xawaaraha si aad u dhammaystirto baasid. Si kastaba ha ahaatee, xadka xawaaraha ee wadooyinka labada haad ee leh xawaare ku dhejisan oo ah 55 mph ama ka sareeya ayaa lagu kordhiyaa 10 mph marka darawalku si sharci ah u dhaafayo baabuur kale oo isla jihada u socda. Markaad isu diyaarinayso inaad dhaafto baabuur, waa inaad hubisaa inay masaafo badbaado leh u dhexayso gaarigaaga iyo gaadiidka soo socda. Waa inaad sidoo kale eegtaa gadaashaada si aad u ogaato in darawallada kale ay u diyaar garoobaaya inay adiga ku baasaan. Marka darawal kale uu iskudayaayo inuu ku dhaafu, ku sugnoow laynkaaga hana kordhin xawaaraha.

Adeegso fareejada leexashada ee dhanka bidix kahor intaadan gelin laynka bidix si aad u baasto. Isticmaal calaamadaha leexashadaada midig kadib marka aad dhaafto iyo kahor inta aadan ku noqon haadka saxda ah. Ku soo noqo haadka saxda ah marka aad arki karto dhammaan baabuurka aad hadda dhaaftay oo ka muuqda muraayadaada dambe. Markaad dhaafayso baabuur kale, waa inaad ku soo noqoto dhanka midig ee waddada kahor intaadan 100 fiid u jirsanin a gaari soo socda.

Ha isku dayin inaad baasto gaari kale marka aad joogtaan meel ay ku taalo calaamada “No Passing Zone” (“Aaga Lama Ogola Baasid”) ama meel uu ku yaalo laynka jaallaha adag oo ku qoran geeskaaga laynka bartamaha. Xariijimaha jaallaha ah oo laba isula socda ayaa ka dhigan in aan baasida loo ogolayn baabuurta u socota labada dhinacba. Ha ku dhaafin:

- Marka aad marayso jiiro ama taag oo aadan si cad u arkayn waddada kaa horaysa ugu yaraan 700 oo fiid.
- Marka aad 100 fiid u jirto isgoyska, jidka laga hoos duso, waddada dhulka hoostiisa, ama aad goynayso jidka tareenka.
- Markaad usii dhowdahay gaari ka imanaya hortaada oo kugu soo socda.

## Ka dhaafitaanka Gaariga dhanka Midig

Darawalka gaari ayaa dhanka midig ka baasi kara gaari kale keliya mark uu raaco shuruudaha soo socda:

- Marka darawalka gaari uu ka baasi karo uuna dhaafi karo gaari kale dhanka midig ayna jiraan xaalado u sahlaya inuu talaabadaas si badqab leh u sameeyo. Waa inuusan talaabo noocaas ah qaadin asagoo gaariga ku kaxaynaya haadka baaskiilka ama garabka waddada kale, ha ahaato laami ama yaysa ahaane, ama waa uusan ku wadin meel ka baxsan laamiga ama meel aan ahayn qaybta waddista ee waddada.
- Marka gaariga la dhaafayo uu samaynayo, ama uu qorshaynayo, inuu bidix u leexdo.
- Markay tahay waddo yar ama waddo weyn oo leh laami aan go'nayn/xannibnayn oo aanay joogin baabuurta la dhigto oo u diida laba haad ama ka badan oo baabuurta socotaa inay u safraan jiho kasta.

- Marka aad ku socoto wado hal jiho ah, ama aad ku socoto wado kasta oo gaariyaasha la ogol yahay inay hal jiho u socdaan, uuna jiro balac ku filan in labo haad ama ka badan oo gaariyaal socanaya ah ay maraan.

## **Dib u Bixid**

Dib u bixid/reefis lagama ogola wadooyinka waawayn ama jidadka degdega ah, marka laga reebo darawallada gaariyaasha gaadiidka gurmada degdega ah ee ku jira shaqada. Dib ugu bixida wadooyinka dadwaynaha ayaa keeni karta danbiga gaari wadista nacasnimada ama taxadar xumada leh.

Haddii ay qasab tahay inaad waddada dib ugu baxdo si aad u gasho wado dadwayne, dib ugu bax haadka kuugu dhow kadibna u soco jidka kaa horeeya. Marna dib ha ugu bixin ama ha goyn laymanka gaariyaashu ku socdaan ilaa inaad hubto maahee in arintaasi badqab leedahay.

Kahor intaadan dib u bixin, waxaa haboon inaad ku soo wareegto aaga gaariga si aad u hubiso inaan waxba ka danbayn. Kahor intaadan dib u bixin, fiiri dhanka hore, dhinacyada, iyo gadaal. Sii wad inaad fiiriso daaqada danbe ee gaarigaaga intaad dib u baxayso. Ha isku hallayn tiirsanayn muraayadahaaga. Si tartiib ah ugu bax haadka waddada ee kuugu dhow.

## **Baakinka**

Marka gaari si siman oo sax ah loogu baakimo baakinada waddada geeskeeda lagu safto, taayirada xiga dhanka geeska waddada waa in ay taaganyihiin wax aan ka badnayn 12 inji meel u jirta geeska waddada.

Waxaa lagu talinayaa in taayirrada hore loo leexiyo dhanka geesta waddada ama garabka, dhig baabuurka geerka baakimidda iyo/ama bareegga baarkinka geli. Marka gaarigu kasoo dhaqaaqo baakinka ama bareega baakinku shaqayn waayo, meesha taayirka loo jeediyey ayaa u sahlaya gaariga inuu u dhaqaaqo dhanka geeska waddada ama in uu ka baxo waddada, halkii uu ku socon lahaa haadka waddada.

### **Lama ogola in la dhigto baabuurta meelaha soo socda:**

- Gudaha isgoysyada.
- Meelaha dadku jidka ka gooyaan ama laynka dadku ku socdaan
- Meel u jirta 20 fiid meesha dadku ka gooyaan isgoyska.
- 30 talaabo meel uga dhow nal kasta oo ifaaya, calaamada joogsiga, ama calaamadaha xakamaynta gaadiidka oo ku taala geeska waddada dadwaynaha.
- 50 fiid meel uga dhow jidka tareenka ee kuugu dhow ee isgoyska waddada tareenka.
- Meel 10 fiid uga dhow qalabka dabka ka hortaga.
- Geeska ama darafka waddada oo ka imaanaysa meel wax laga qodayo ama buur ah haddii baakinku uu xiraayo jidka gaariyaasha.
- Dhammaadka jidka laga galo xaafad.
- Dusha buundada.
- Gudaha wado wayn oo kasta oo dhulka hoostiisa marta.

- Dhanka waddada ee gaari kasta oo ku baakiman cirifka waddada ama darafka geeska waddada wayn (oo loo yaqaano “double parking” (“laba baakimid”)).
- Dhinaca darafka waddada oo lagu calaamadiyey jaalle, ama meel ay ku dhagan yihiin calaamadaha rasmiga ah ee “No Parking” (“Baakin Lama Ogola”).
- Sanduuqyada boostada hortooda (ka fiiri xeerarka maxaliga ah ee magaalada).

## **Ka bixida Gaari baakin Ku jira**

Markaad istaagto ama baakin ku gasho geeska waddada, waa inaad furin albaabada gaariga ah ilaa aad hubiso si aad u xaqiijiso inay ammaan tahay in aad furto iyo inaysan dhib u keenayn isku socodka gaariyaasha kale. Iska fiiri gaariyaasha kale, mootooyinka, baaskiilada iyo dadka jidka lugaynaya ee laga yaabo inay kusoo socdaan jihada gaarigaaga. Waa inaad ogolaan albaab kasta oo ku yaala dhina gaariga ee xigta gaariyaasha socda inuu sii furnaado muddo ka badan inta ay ku fuuli karaan ama ka dagan karaan rakaabku.

**Gaaribaakimida meel Taag ah**




Marka afka hore ee baabuurka baarkinka la dhigay ay ku sii jeedo meel daadeg ah, oo uu jirto waddada geeskeeda kor u yara dhisan, taayirrada waa in lagu sii jeediyo dhanka geesta waddada.

Marka afka hore ee baabuurka baarkinka la dhigay ay ku sii jeedo meel taag ah, oo uu jirto waddada geeskeeda kor u yara dhisan, taayirrada waa in laga jeediyo dhanka geesta.


Marka afka hore ee gaariga baarkinka ku jira uu kor u jeedo, oo uuna jirin cirif gees ku yaala, taayirrada waa in loo jeedshaa garabka waddada.

**Baakinada Isla Siman**

Sharciyada Gaadiidka iyo Wadista Baabuurta



1 Joogso adiga oo la siman baabuurka kaa horeeya adiga oo u jira jira hal fiit iyo bar.



2 Taayirka u leexi midig si xoog ah, si tartiib ah dib ugu soo soco.



3 Marka aad dhaafto baabuurka, si xoog ah bidix ugu leexi taayirka oo si tartiib ah dib ugu soo soco.



4 Si xoog ah ugu leexi taayirka midigta oo u dhaqaaq dhinaca geeska waddada meel bannaan.

## **Gaari Dhigashada Waddada Weyn**

Gaariyaasha looga tagay jidadka waawayn ee gobalka sabab kastaba ha keentee waa in laga kaxeeyo jid waynaha, qaybta gaariyaashu aya marayaan. Haddii aan gaariga la kaxayn karin, u adeegso calaamadaha si muuqdo loo arki karo ama astaamo si aad uga hortagto waxyeelo ku dhacda gaariyaaga ama darawallada kale.

Gaariyaasha ku baakiman geeska waddada wayn habeenkii, ama xili kasta oo loo baahan yahay nalal, waa inay lahaadaan ugu yaraan hal nal oo cad ama cadaan casaan ah oo horay uga xiran gaariga iyo mid cas oo gadaasha gaariga ka ifaaya. Labada nalba waa in laga arki karo fogaan dhan ugu yaraan 500 oo fiid. Waa in ay u adeegsadaan nalalka baakinka ama nalalka digniinta khatarta si ay ugu digto darawallada. Nalalka hore ee baabuurta baakiman waa in laga iftiin hooseeya.

## **Badbaadada Rakaabka**

Waa mas'uuliyadda darawalka inuu hubiyo in rakaabka kale ay badbaado qabaan. In uu ku adkayso in dhammaan rakaabku xirtaan suunka. In uu hubiyo in carruurta lagu xiro kursiga xakamaynta rakaabka ee da'da ku habboon.

## **Sharciyada Suunka Amaanka**

Dhammaan qalabka amaanka ee ku xiran gaariyaaga, suunka amaanka ayay ugu badan tahay inay ku badbaado nololshada. Gudaha Minnesota, gaariyaasha matoorka ku shaqeeya waa inay lahaadaan suumanka amaanka; adeegsiga suunka amaanku waa waajib. Suunka amaanka oo si sax ah loo rakibay loona adkeeyay waa in ay xidhaan dhammaan darawallada iyo rakaabka fadhiga dhammaan kuraasta gaariga, ayna ku jiraan kuraasta danbe. Laamaha sharciga ayaa darawallada u joojin kara sabab la xariirta jabinta amarka xirashada suunka amaanka keliya. Haddii aadan xidhan suunka amaanka, xasusnoow waxyaabaha soo socda:

- Suuragalnimada ah inaad ku dhimato ama ku dhaawacanto burburka gaariga ayaa afar jeer ka badan markaad xidhato suunka.
- Waa suuragal inaad ku dhimato shil gaari marka aad ku socoto xawaare hooseeya oo xitaa dhan 12 mph.
- Suumanka badbaadada ee gaarigu waxay dadka rakaabka ah ka ilaaliyaan inay ka duulaan gaariga, marka gaarigu shil galo. Dadka ka soo duula gaariga ayay u badan tahay inay dhintaan ama uu gaaro dhaawac aad u xun.

Lagaama doonaayo sharciyan inaad xidhato suunka amaanka haddii aad:

- Haddii aad gaariga rakaabka gadaal-gadaal u wado.
- Haddii aad fadhido kursi caadi ah oo ku yaala gaari dhammaan suumanka amaanka ee gaariga ay isticmaalayaan rakaabka kale.

- Aad haysato shahaado qoran oo kasoo baxday dhakhtar sheegaysana sababo caafimaad oo kuu diidaya adeegsiga suunka badbaadada.
- Marka aad wado gaari adiga oo ka shaqaynaaya shaqo u baahan inaad marar badan ka degato soona gasho gaariga. Arintan ayaa keliya khusaysa haddii aadan ku wadin gaariga xawaare ka badan 25 mayl saacadiiba.
- Gaariga boostada geeya baadiyaha oo u shaqeeya Adeegga Boostada ee Maraykanka (U.S. Postal Service).
- Wadista ama ka xaynta gaari alaabaha qaada adoo u shaqaynaaya beer.
- Markaad wado gaari la sameeyay kahor Janaayo 1, 1965.

### U adeegso Suumanka Amaanka Si sax ah

Waxay u badan tahay inaad ka badbaado burburka gaariga haddii aad adeegsato suunka dhabta iyo kan garabka si wada jir ah. Suunka dhabta waa in wax laga badalaa si ay qaab siman ugu qabtaan sinahaaga ama qaybta kore ee cajirada. Waa inaad marna suunka saarin calooshaada ama qaybta jilicsan ee calooshaada.

Suunka garabka waa inuu si sax ah u qabsadaan xabadka ama bartamaha garabka. Haddii suunka amaanka meel sax ah lagu xiro, waa ay yar tahay inuu kordhiyo dhaawacyada haddii gaarigu shil galo.

### Sharciyada Suunka Badbqabka Saqiirka iyo Carruurta

Kursiga danbe waa meesha ugu amaanka badan ee baabuurta badankeeda waana meesha lagu taliyay in ilmo kasta oo ka yar 13 jir uu fuulo. Dhammaan nidaamyada xakameynta badbaadada carruurta waa in ay yihiin kuwo ay dawladda federaalku ay ogolaatay oo loo rakibaa si waafaqsan tilmaamaha soo saaraha. Si kastaba ha ahaatee:

- Dhallaanka waa in ay saaranyihiin nidaamka kursiga xakamaynta badbaadada carruurta oo u jeedda gadaal, ilaa la gaaro, sida laga soo xigtay Akademiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta, carruurta waa in ay raacaan kursiga badbaadada carruurta ee xagga dambe u jeeda ilaa ay ka gaarayaan ugu yaraan 2 sano jir.

- Carruurta da'doodu ka weyn tahay 1 sano oo miisaankoodu yahay ugu yaraan 20 rodol waxa laga yaabaa inay fuulaan kursiga xaga hore u jeeda ee dhabarka dheer leh iyada oo suumanka la simanyahay ama ka sarreeyo heerka garabka. Carruurtu waa inay isticmaalaan kursi suunka leh ee hore u jeeda ilaa oo ay dhaafaan xadka miisaanka (sida caadiga ah 40-60 rodol, iyadoo ku xiran kursiga).
- Carruurta kayar 8 sano jir ama 4 fiid iyo 9 inji dheerarkoodu yahay, ee ka weynaaday suunka kursiga horay u jeeda, waa inay ku fadhiistaan suunka meelaynta, kursiga taareeda ah ee hore u jeeda, oo loo isticmaalo suunka dhabta iyo garabka ee dadka waaweyn. Suunka garabku waa inuu si sax ah u qabsadaa xabadka iyo garabka.
- Ilmuhu ma adeegsan karo suunka badbaadada oo keliya ilaa inuu jiro 8 sano ama uu dheerarkiisu yahay 4 fiid iyo 9 inji mooyaane.

## **Tilmaamaha Kale ee Badqabka Ilmaha Rakaabka ah**

- Si aad u ilaaliso badqabka ilmahaaga, marna ha adeegsan kursiga badqabka oo horay shil u galay.
- Nidaamka xakamaynta ilmaha ayaa caadiyan loo arkaa mid dhacay markuu joogo lix sano maalintii ay warshadu soo saartay. Qaar kamid ah warshadaha sameeya ayaa hadda ku dhajiya
- goorta ay kusiga taariikhdiisu dhacayso. Haddii ayna taariikh ku gornayn, raac talada lixda sano ah.
- Kuraasta gadaal u jeeda ee ilmaha dhallaanka ah waa inaan marna la dhigin horta buufinta badbaadada oo shaqaynaysa.
- Carruurta waa inaan lagu qaban dhabta qof rakaabka kamid ah inta gaarigu socdo.
- Carruurtu waa inaysan raacin gaariga xamuulka oo maraaya aaga kaargooyada ama astaanka laga raro.

## **Marna Ilmo Aan Lala Joogin ha uga Tagin Gaariga.**

Marna ilmaha ama dadka waawayn ee nugul keligood ha uga tagin gaari. Xaaladaha qaar oo dhici kara waxaa kamid ah:

- Dadka rakaabka ah ee lagaga tegey ayaa geer gelin kara gaariga kadibna dhalin kara shil.
- Heerkullada ayaa gaari kara heerar khatar ah oo daran gudaha gaariga. Dadka rakaabka ah ayaa u dhiman kara ama dhaawacyo xun kasoo gaari karaan kulaylka ama qaboowga.
- Gaariga ayaa la xadi karaa ama uu gaari ku dhufan karaa qof aan ogayn in ay dad saaranyihiin.
- Qof ayaa gaariga jabsan kara oo afduubi kara ama dhibaato u gaysan kara dadka gaariga saarnaa.

## **Ka Tagidda Gaarigaaga oo aan Cidi ilaalinayn**

Ha dhiiri gelin tuugnimo. Quful albaabadaada oo qaado furaha. Haka tagin gaariga oo shidan. Furayaasha ha kaga tagin injiinka ama meel kale oo

baabuurka gudihiiisa ah. Ha kaga tagin alaab qaali ah, ama wax kasta oo u muuqan kara inay qiimo leeyihiin, gudaha gaariga.

## **Badqabka Xoolaha**

Darawallada ayaa masuul ka ah badqabka xayawaannada ku safraaya gaadiidka waana inay ka warqabaan khataraha ay leeyihiin ku dhaafida xayawaannada gaariyaal aan lala joogin inta lagu jiro xiliga kulaylaha. Xayawaannada rabaayada ah waa inaan looga dhex tagin gaariga, gaar ahaana maalmaha cimiladu aadka u kulushahay ama u qaboowdahay. Heerarka daran ee heerkulka ayaa khatar ku noqon kara xayawaannada.

## **Buufinta amaanka**

Buufinta amaanka waa nidaam kaabid ah oo qofka xakamaynaya Buufinta amaanka ayaa loo sameeyay inay la shaqayso suumanka amaanka si looga hortago dhaawac yimaada. Looma samayn inay qofka ka ilaaliyaan inuu gariga ka duulo. Sababo amaan awgood, carruurta ka yar da'da 13 waa inay markasta fuulaan kursiga danbe.

## **Soojeedinnada Badqabka ee Buufinta Amaanka**

Iskuday inay u dhexayso ugu yaraan 10 inji adigga iyo isteerinka. Gacantaada ku joogtee cabirka saacada ee ku aadan 8 iy 4 ama 9 iyo 3 markaad hayso isteerinka gaariga. Iska ilaali barta qabashadha iseerinka eeku aadan saacada 10 iyo 2 oo go'an. Kusoo laab suulasha gacantaada isteerinka gaariga.

Kursiga rakabka ee shirka waa in dib loo durjiyaa ilaa inta suuragalka ah. Akhri buugaaga tasmada darawalka kahor intaadan wadin ama raacin gaari ay ku xiran yihiin buufinta amaanka.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegsiga suumanka amaanka, aariyada hawada, iyo kuraasta badqabka gaariga, booqo websaydka Xafiiska Badqabka Wadooyinka ee Waaxda Badqabka Dadwaynaha oo ah [ots.dps.mn.gov](https://ots.dps.mn.gov).

## **Ha tuurin qashin**

Waa sharci daro inaad qashin ka tuurto gaarigaaga aadna ku tuurto waddada, jidadka, iyo dhulka danta guud ama gaarka loo leeyahay. Waa sharci darro in la tuuro, laga tago, meel dhigo ama lagu tuuro nooc kasta oo ah shay halis ama khatar ah, oo ay ku jiraan sigaarka, rashka, burburka dhiska, barafka adag, barafka, dhalooyinka, masaabiirta, xargaha, siliga, gasacadaha, qashinka, waraaqaha, dambaska, waxyaabaha la nacay, bakhtiga, haragga, qashinka, ama wakhda in lagu daadiyo dhulka danta guud ama dhulka gaarka ah iyada oo aan ogolaansho laga helin mulkiilaha.



## Waxa ay tahay in aad Samaynayso Marka Gaarigu Shil galo.

Haddii aad gasho shil gaari, waa inaad qaado talaabooyinka qaar si aad u hubiso badqabka aadna u raacdo sharciga:

- Waa inaad gaariga joojisaa. Ka bax haadka aad gaariga ku wado, haddii ay macquul tahay, adiga oo u baxaaya geeska waddada. Dami matoorka gaariga si loo yareeyo khatarta dabka.
- Ilaali naftaada iyo meesha shilku ka dhacay. Uga dig darawallada khatarta adiga oo daaraya nalalka digniinta xaalada degdega ah, nalalka biliglaha ah, ama nalalka tooshka.
- Haddii qof ku jira shilka uu dhaawacmay ama dhintay, waa inaad wacdo wakaalada ugu dhow ee sharci fulinta ama wac 911 sida ugu dhakhsaha badan.
- Haddii aad aqoon u leedahay, sii dadka gurmada degdega ah. Haddii kale, samee waxa aad awoodo si aad xanuunka uga yarayso dadka dhaawaca ah. Sharciga ayaa kaa doonaya inaad siiso caawimo macquul ah dhibanayaasha shilka gaariga.
- Waa inaad u sheegtaa magacaaga, ciwaanka, taariikhda Dhalashada iyo lambarka diiwaan gelinta ee gaarigaaga darawalada wada gawaarida aad isku dhacdeen iyo wixii sarkaalka sharci fulin ah ee yimaada goobta shilka. Waa inaad sidoo kale tustaa shattigaaga darawalnimada darawal kasta oo codsada inuu arko iyo wixii sarkaalka sharci fulin ah ee yimaada goobta shilka.
- Haddii qofka shilka galay uu ku weydiyo macluumaadkaaga caymiska, waa inaad bixiso magaca iyo cinwaanka shirkada caymiska iyo magaca wakiilkaaga.
- Xogta caymiska waa in la siiyo sarkaalka sharci fulinta ee baaraaya shilka gaariga. Haddii aadan haynin xogtaan markaas, waa inaad ku keento 72 saacadood gudahood.
- Haddii shilka gaarigu uu keeno keliya burbur hantiyeed, muhiim maaha inaad u sheegto booliiska. Haddii gaarigaagu hawlgab noqdo, codso in laga jiido meesha sida ugu dhakhsaha badan.
- Haddii aad waxyeelo u gaysato hanti aan ahayn gaari, waa inaad u sheegto mulkiilaha hantida.

## Caymiska

Mulkiilayaasha gaariyaasha ee lagu wado wadooyinka dadweynaha waa inay sitaan caymiska khalad la'aanta iyo magdhawga oo gaariyaashoodu leeyihiin. Cadaynta saxda ah ee caymiska waa inay gaariga saaran tahay markasta. Ku fashilmida keenista cadaynta caymiska marka uu kaa codsado sarkaalka sharci fulinta waxay keeni kartaa in lagaala laabto shattigaaga darawalnimada iyo diiwaan gelinta gaariga.

Marka mudnaantaada darawalnimada lagaala laabto sabab la xariirta inaad caymis lahayn, darawalku waa in uu ku guulaysto imtixaan qoraal ah; in uu bixiyo \$30 kharashka dib u soo celinta ah marka lagu daro ganaaxyada ay

qaado maxkamad ama tigidhada; in uu codso shatti cusub oo darawalnimo; oo uu soo gudbiyo shahaado caymis oo ka soo baxday xafiiska shirkadda caymiska. Wadista gaari matoorleh oo aan lahayn caymis ayaa keeni kara in lagaala noqdo taarigada gaariga iyo diiwaan gelinta gaariga. Aqoonsiyada darawalnimada ayaa lagaala laaban karaa ilaa muddo hal sano ah. Qof kasta oo lagu helo danbiga wadista gaari aan caymis lahayn ayaa lagu xukumi karaa ganaax dhan \$1,000 waxaana lagu xukumi karaa ilaa 90 maalmood oo xabsi ah.

## **Caymiska mootada**

Caymiska magdhawga ee darawallada mootada ee gobalkaan waa in lagu daraa waxyeelada hantida iyo dhaawaca ku dhaca dadka kale ee saaran gaarigaaga. Haysashada caymiska ee eed/khalad la'aanta iyo darawalka aan caymiska lahayn waa ikhtiyaari Difaaca caymiska ayaa sidoo kale loo heli karaa waxyeelada, khasaarada, ama xatooyada mootada.

## **Diiwaangelinta Gaarigaada**

Dhammaan gaariyaasha matoorka ku shaqeyaa ee ay leeyihiin dadka degan Minnesota kuna shaqeyaa wadooyinka dadwaynaha waa in laga diiwaan gashaa Laanta Adeegyada Gaariga iyo Darawalka ee Waaxda Badqabka Dadwaynaha. Waxaad haysataa ilaa 60 maalmood kadib markaad noqoto qof dagan gobalka inaad ku diiwaangeliso gaarigaaga gudaha Minnesota.

Si aad u diiwaan geliso gaarigaaga, waa inaad keento lahaanshaha gaariga ee hadda ama kaarka diiwaangelinta hadda ee gaariga iyo shattigaaga darawalka ama aqoonsiga kale ee sharciga ah oo aad u keenayso ku xigeenka xafiiska diiwaanka ee Adeegyada Darawalka iyo Gaariga ee maxaliga ah oo aad bixiso dhammaan khidmadaha iyo canshuuraha la xariira diiwaan gelinta iyo wareejinta lahaanshaha. Marka la diiwaangeliyo, taarikooyinka gaariga waxaa laga cusboonaysiisan karaa khadka interneedka, boostada, ama waxaa si toos ah ayaa looga codsan karaa xafiiska ku xigeenka diiwaan geliyaha.

## **Aaladaha Isgaarsiinta ee aad xarig lahayn**

Qofku ma adeegsan karo aalada isgaarsiinta Waayarleska ah, sida taleefanka gacanta, si uu u qoro, u akhriyo ama u diro fariimo elektarooniga ah intaad wado gaariga. Fariimaha elektarooniga ah waxaa ku jira emailka iyo fariimaha qoraalka taleefanka ah; fariin ku dirista elektarooniga waxaa sidoo kale ku jira fariimaha lagu sheekaysto iyo gelitanaka interneedka.

Shardi dhaafyada waxaa ku jira adeegsiga aalada si aad u hesho caawimo gurmada xaaladaha degdega ah, in aad soo sheegto shil gaari ama danbi, ama in aad isticmaasho marka aaladu tahay keliya mid amarka codka ku shaqaysa ama aan u baahnayn in gacanta lagu maamulo.

Qofka gala labo xadgudub ama ka badan oo la xariira adeegsiga aalada wada xariirka aan fiilada lahayn (wireless) si uu u qoro, u akhriyo, ama u diro fariin elektaroonig ah marka uu gaarigu socdo ama qayb ka yahay

gaariyaasha jidka ku jirta, waxaa laga doonayaa inuu bixiyo ganaax dhan \$225 oo dheeraad ku ah ganaaxa ay maxkamadu amarto.

*Sharciyada soo socda iyo macluumaadka badqabka ayaa khuseeya xaaladaha la xariira gaariyaasha kale iyo dadka jidka maraya.*

## Joogsiga

Calaamada joogsigu waxay kaa doonaysaa inaad si buuxda u joojiso gaariga. Markaad marayso calaamada joogsiga oo leh laynka astaanta joogsiga, waa inaad istaagtaa kahor intaadan gaarin laynka. Markaad marayso calaamada joogsiga oo ku taala meesha dadka lugaynaya waddada ka goynayaan waa inaad istaagtaa kahor intaadan gelin meesha dadku waddada ka gooyaan. Markaad istaagto, waddada sii dadka lugaynaya, baaskiilada iyo gaadiidka kahor intaadan sii socon.

Haddii aragaaga isgoyska uusan muuqan, u diyaar garoow inaad istaagto markale si ay u gudbaan dadka lugaynaya ama isku socodka jidkaaga.

Waa inaad sidoo kale si buuxda u istaagto xaaladaha soo socda:

- Kahor intaadan gelin waddada, adiga oo ka yimid jid yaraha, jidka xaafada, aaga baakinka, ama rakada baakinka. Markasta istaag kahor intaadan ka gudbin geeska lagu lugeeyo ama meesha dadku waddada ka gooyaan.
- Markaad joogto isgoys ama meesha dadku marayaan oo leh calaamadaha taraafiga oo muujinaya nalka cas. Sug ilaa calaamadu ka noqoto cagaar jidkaaguna banaanaado kahor intaadan dhaqaaqin.
- Marka aad joogto isgoys ama meesha dadku waddada ka gooyaan, ha lahaato calaamad ama yaysan lahaan meesha dadka lugeeya maraan ama dad baaskiil wataa ay kasoo baxeen geeska waddada ayna waddada goynayaan. Sii taagnoo ilaa qofka lugaynaya ama baaskiiluhu ka gudbayo haadkaaga.
- Markaad joogto nalka taraafiga oo falaash cas bixinaaya. Ula dhaqan tan sida calaamada joogsiga.
- Markaad marayso cabirka rakada jidka furan, marka nalku casaan muujo.
- Isgoysyada tareenada oo leh calaamada joogsiga.
- Marka qof calan haya ama qalabka taraafigu uu kuu tilmaamo inaad istaagto.
- Buundada kor loo qaaday si loo furo waddo ay doomuhu hoosta ka maraan.

## U joogsashada baska dugsiga

Basaska iskuulka waxaa ku rakiban nalalka jaallaha iyo casaanka ah oo biligle dignin ah daara si ay uga digaan darawallada kale in basku istaagaayo si uu u qaado ama u dejiyo arday.


## Fareejaynta Nalalka Jaallaha ah

Fareejaynta nalalka jaallaha ah ayaa la daari doonaa ugu yaraan 100 fiid kahor intaan baska dugsigu istaagin aag gaariyaashu ku socdaan xawaare dhan 35 mph ama kayar, iyo ugu yaraan 300 oo fiid kahor intuusan istaagin aaga

xawaaraha ka badan 35 mph. Waxay kasoo horjeedaa sharciga inaad dhanka midig ka baasto baska dugsiga asagoo ay u shidan yihiin nalalka fareejada cas ama jaallaha ah.

## **Fareejaynta Nalalka Casaanka ah**

Daarashada nala casaanka ah ayaa uga digaysa darawallada in baska iskuulku uu qaadaayo ama dejinaayo arday. Marka baska iskuulku uu istaago isagoo daartay nalka cas oo gacankiisa joogsashaduna fidsantahay, waa inaad ku joojiso gaarigaaga ugu yaraan meel 20 fiid u jirta baska. Gaariyaasha iyo dadka soo socda ee gadaal kaga soo aadan basku ma socon karaan ilaa gacanka joogsiga la laabo nalalka casna la demiyo. Waxaa lagugu xukumi karaa ficil dambi haddii aad jabiso midkood sharciyadaan. Ciqabta jabintan ayaa ah ganaax aan ka yarayn \$500, iyo in lagaala laabto shattigaaga darawalnimada.



**Wadaagista Waddada**


## **Dhaafitaanka baska dugsiga**

Waa sharci daro inaad baasto baska dugsiga marka nalalkiisa cas ay fareejo bixinayaan gacankiisa joogsiguna taagan yahay. Lagaama doonaayo inaad ka istaagto baska dugsiga oo nalka cas fareejaynaayo haddii uu taagan yahay geeska kale ee wado kala xiran. Sarkaal kamid ah booliiska oo haya sabab macquul ah oo uu ku aamino in darawal uu jabiyay sharcigaan ayaa xiri kara darawal afar saacadood gudahood kadib marka sharci jebintu dhacdo.

**LABA HAADAD OO AAN QAYBSANAYN**



**HAADAD BADAN OO AAN QAYBSANAYN**



**JIDKA WAYN OO KALA QAYBSAN**



**Mulkiilaha Gaariga waa la Ganaaxi Karaa**

Marka gaari loo adegesado jabinta sharciga ka istaaga baska iskuulka, mulkiilaha ama qofka kiraystay gaariga ayaa lagu xukumayaa danbi fudud

oo heerkiisu hooseeyo. Laakiin, haddii mulkiilaha ama qofka gaariga kiraystay uu caddayn karo in qof kale uu gaariga waday marka sharci jabinta ka joogsiga gacanta basku dhacay, darawalka — aan ahayn mulkiilaha ama kiraystaha — ayaa lagu xukumi doonaa jabinta sharciga. Marka aad codsanayso shattiga darawalnimada, waa inaad caddayso, adiga oo saxeexaya arjiga, in aad fahamtay in ay tahay inaad ka istaagto baska iskuulka oo aad ka warqabto ciqaabta ku xadgudubka sharcigan.

## **Ilaalada Badqabka Iskuulka**

Markaad aragto ilaalada amaanka badbaadada ee iskuulka oo ka caawinaysa ardayda iskuulka ka gudbida waddada ama jidka wayne, waa inaad si buuxda u istaagto. Waa inaad sidoo kale si buuxda uga istaagtaa ilaalada gudbinaysa dadka waayeelka ah kuwaasoo soo bandhiga calaamada ama calanka joogsiga. Waa sharci daro inaad ku soco laynka caruur ka gudbaaya waddada, xataa haddii aan ilaalada badqabka dugsigu la socon. Jabinta sharcigaan waa danbi fudud. Jabinta labaad ee sharciga sanad gudahiis ayaa ah danbi fudud oo heerkiisu sarreeyo.

## **Calan-wadaha Baska Dugsiga**

Calansidaha Baska Dugsiga aya joojinkara kuna celin kara gaariyaasha waddada ama jid waynaha si loogu sahlo basaska dugsiga inay ka baxaan dhismaha. Darawalku ma sii socon karo kadib marka uu joojiyo calansidaha baska dugsiga ilaa inuu fasaxo maahee calansiduhu ama sarkaal booliis ah.

## Xaqa waddada iyo boos Siinta

Sharciyada xaquuqda jidka iyo boos siinta ayaa caawinaya isu socod nadiif ah oo bad-qab leh. Waxay ku salaysanyihiin xushmad iyo caqli galmimada. Ku xadgudubka sharciyadan ayaa ah sababta ugu weyn ee keenta shilalka gaadiidka.

- Marka ay laba baabuur isku mar soo wada gaaraan meel isgoys ah, isla markaana aanay jirin wax nal ah oo taraafig ah ama calaamad ah, waa in dareewalka gaariga bidixda ahi uu u siiyo midka dhinaca midigta.
- Marka laba baabuur ay wada gaaraan isgoys isku mar, oo ay ku taallo calaamada joogsiga ee dhammaan dhinacyada waddada oo dhan ama nalalka taraafig cas oo biligleynaya ay koontaroolaan isgoyska, darawalka bidix waa in uu u siiyo jidka darawalka dhanka midig.
- Darawalka doonaaya inuu bidix u leexdo waa inuu boos siiyaa gaariyaasha ka imaanaya wajahadiisa marka ay gaariyaashani marayaan isgoyska ama ay in badan u dhow yihiin inay abuuraan khatarta shil.
- Marka calaamada falaarta cagaaran ay muujisayso in gaari uu soo geli karo isgoyska si uu bidix ugu leexdo, darawalku waa inuu jidka siiyo gaariyaasha kale ama dadka lugaynaya ee markii horaba marayay isgoyska. Kadib markuu jidka siiyo, darawalka ayaa ku sii socon kara jihada falaarta.
- Marka labo gaari yimaadaan isgoyska "T" oo cidna maamulin, darawalka gaariga leexanaaya waa inuu boos siiyaa dhamaan gaadiidka kale.
- Marka aad soo galayso jid dadwayne aadna ka imaanayso wado guri ama xaafadeed, waa inaad istaagtaa aadna boos siisaa dadka lugaynaya iyo gaadiidka.
- Darawallada ku socda haadka midig ee waddadu waa inay jidka siiyaan basaska gaadiidka dadwaynaha iyo basaska naafada (metro mobility) inay kasoo baxaan gaabta basku istaago ama geeska waddada. Tan waxaa ku jira siinta waddada bas kasta oo iskuul oo isku dayaya inuu galo haadka kasoo dhaqaaqaya geeska waddada, haadka leexashada dhanka midig, ama meel kale oo baska iskuulku istaagay si uu u dejiyo ama u qaado rakaab. Baska dugsigu waa inuu adeegsadaa calaamada leexashada dhanka bidix si uu u muujiyo inuu doonayo inuu galo haadka dhanka midig ee waddada.
- Marka gaadiidka tacsida ay isku muujiyaan adeegsiga nalalka hore ama nalalka digniinta khatarta, waa inaad boos siisaa dhammaan gaadiidka tacsida
- Sii xaqa maritaanka wadda dadka lugaynaya ee waddada ka goynaaya isgoyska iyo meelaha jidka laga gooyo, hadday leeyihiin calaamado ama haddii aysan lahaynba.



## Haadka sii Gaariyaasha Gurmada degdega ah

Marka gaariga xaalada degdega ah, sida anbalaasta, gaariga dab damiska, ama gaariga booliiska, oo uu u daaran yahay nalalka cas yeerinaayana seeriga ama ganbaleelka kuna soo socda dhinaca gaarigaaga saaran waddada labada dhan ah, waa inaad dhanka midig uga baxdaa waddada aadna joogsato. Haddii aad ku safrayso wado hal jiho ah, waa inaad u baxdaa hadba dhanka waddada ee kuugu dhow kadibna aad istaagto. Haddii aad ku jirto isgoys, horay usii soco kahor intaadan istaagin. Sii taagnoo ilaa gaariyaasha gurmada degdega ah ay kaa dhaafaan. Sarkaal kamid ah booliiska oo haya sabab macquul ah oo uu ku aamino in darawal uu jabiyay sharcigan ayaa xiri kara darawal afar saacadood gudahood kadib marka sharci jebintu dhacdo.

Looma baahna inaad istaagto haddii gaariga xaaladaha degdega ah ee soo socda uu idin kala qaybinayo haadka taraafig ah caqabad dhis ah sida xayndaab, darbi, ama falin dhiska waddada.

## Baasida Gaariyaasha Gurmada Degdega ah/Adeegga ee Baakinka Ku jirta

Marka gaariga gurmada degdega ah oo nalalka xaalada degdega ah ay u daaran yihiin, uu taaganyahay dhexda ama geeska wado leh labo haad oo isku jiho u socda, Sharciga Baasida ayaa kaa doonaaya inaad ku socoto haadka ugu geeseeya ee ka durugsan gaariga, haddii ay macquul tahay inaad sidaas qaab badbaado leh u samayso. Gaariyaasha gurmada degdega ah waxaa ku jira: gaariyaasha jiida gawaarida burburtay, aanbalaasyada, gaariyaasha dab damiska iyo gawaarida booliiska. Haddii aadan awoodin inaad layn kale uga leexato, ama aad ku socoto wado ama jid keliya leh hal layn oo jihada aad u socoto ah, yaree xawaarahaaga si taxadar lehna u dhaaf gaariga.

Iska nidaamka ayaa lagu daqabayaa marka loo soo dhawaado baabuurta fariisatay ama kuwa jabay, iyo in marka la dhaafayo baabuurta baarkinka la dhigay, sida baabuurta ilaalada adeega, baabuurta dayactirka wadooyinka, baabuurta shirkadaha tamarta, baabuurta dhismaha, baabuurta boostada, ama baabuurta qashinka adag iyo baabuurta qashinka dib u warshadaynta ee lagu joojiyo iyadoo ay u shidan yihiin nalalka digniinta ah.

## Dabagelida Gawaarida Dab damiska

Keiya gaariyaasha ku safraya shaqada rasmiga ah ee xaalada degdega ah ayaa loo ogolyahay inay dabagalaan, iyaga oo u jirsanaya 500 fiid wax ka yar gaariga dab damiska ee u ordaaya gurmada. Ha dulmarin gaariga tuubada dab damiska oon difaac lahayn ilaa inay sidaas kuu sheegaan maahee booliisku ama sarkaal kamid ah waaxda dab damiska.

## Dabagelida Gawaarida Kale

Sharciga ayaa qasab ka dhigaaya in bad ammaan ah aad u dhexaysiiso gaarigaaga iyo gaariga kaa horeeya. Waa inaad awoodo inaad istaagto ama leexan karto si aad uga fogaato isku dhac. Qaddari xaaladaha cimilada, jidadka iyo waddada markaad go'aaminayso badka aad ka danbaynayso gaariga kale. Adeegsiga xeerka sadexda sikin ayaa kaa caawinaaya inaad bad

kugu filan u jirsato gaariga kale. (Akhri "Xeerka Sadexda Sikin" oo ku qoran Cutubka 6.)

## **Darawalnimada Bilaa Taxadarka ah ee Dayaca Badan**

Darawalnimo miyir la'aanta ah waxaa lagu qeexaa inaad gaari u wado ama u joojiso qaab khatar gelinaaya nolosha iyo badqabka dadka ama hantida.

Darawalnimo nacasnimo ah waxaa lagu qeexaa inaad gaari wado adoo og kasna iskaga indho tiraaya khatar wayn oo aan la fududaysan karin oo ah in gaari wadistu keeni karto dhib ku dhacda qof kale ama hantida qof kale, ayna ku jiraan gaari wadista tartanka ama xawaaraha. Tartanka waxaa lagu qeexaa inaad si kas ah isku babac dhigto xawaarayaal gaar ah adoo kaxaynaaya hal gaari ama ka badan, ayadoon laga eegayn in xawaaruhu ka badan yahay xawaaraha la cayimay. Haddii lagu xukumo inaad si dayac iyo miyir la'aan leh u waday gaari, waxaa lagu saari karaa maxkamad si laguugu oogo danbi fudud.

## **Waxa aad Samaynayso aadna Filan Karto marka Uu ku joojiyo Booliisku**

Inuu ku joojiyo booliisku waxay noqon kartaa arin walaac badan, laakiin inaad ogaato waxa aad samaynayso marka isu socodku joogsado ayaa caawinaysa In dhammaan dhinacyada ku lugta lihi ay si bad-qab leh u wada hadlaan. Markaad aragto nalalka xaalada degdeg ah ee gadaashaada ka imaanaaya:

- Isdaji.
- Tartiibi gaarigaaga oo shido fareejada leexashada.
- Sida ugu dhakhsaha badan ee badqabka leh, ugu leexo dhankaaga midig; ama haddii aad wado layman badan aad joogto oo aad u dhawdahay dhanka bidix, aad dhanka bidix haddii uu jiro layn dhammeys tiran oo lagu bakiman karo.
- Iska ilaali inaad istaagto adoo maraaya buundada, qaybta jirada ah ee waddada, ama gudaha layn gaariyaal ku socdaan.
- Haddii aad joogsiga samayso kadib marka habaynku madoobaado, shido nalalka gudaha ee gaarigaaga.
- Hakuu xirnaadaan dhammaan albaabadu, kuna jir gaariga ilaa in sarkaalku kuu sheego maahee inaad soo baxdo.
- Gacmahaaga kuhay isteerinka si qaab fudud loogu arko.
- Sii sarkaalka dareenkaaga buuxa.

- Ha samayn dhaqdhaqaaq degdeg ah ama ha raadin shattigaaga darawalnimada ama dukumiintiga gaariga; sug sarkaalka si uu kuu siiyo amarka.
- Haddii hub ama qori kuu saaran yahay gaariga, u sheeg sarkaalka marka ugu horreysa ee aad wada hadashaan.

Sarkaalku fwuxuu kaa codsan karaa inaad tusto aqoonsigaaga (shattiga darawalka, aqoonsiga sawirka leh, iwm.) iyo caddaynta caymiska. Haddii aadan gaari karin dukumiintigaaga, u sheeg sarkaalka meesha ay yaalaan kahor intaadan soo qabsan.

Marka uu sarkaalku dhammeeyo wada shaqaynta ay kula leeyihiin, waxa laga yaabaa inay ku siiyaan digniin afka ah, digniin qoraal ah ama tigidh laga yaabo in oo ay ku jirto ganaax. Haddii aad diidan tahay go'aanka sarkaalka ee amarka khaladka waddada, ha dheerayn wada hadalka adoo la murmaaya sarkaalka.

Haddii aad doonayso inaad ka doodo ganaaxa, waxaad heli doontaa fursad aad maxkamada ugu sharaxdo doodaada. Haddii su'aalo qeexitaan ah loo baahdo in laga sameeyo digniinta ama ganaaxa, waydii sarkaalka kahor intiinaan hadalka dhamaysan iskana ilaali inaad kasoo baxdo gaarigaaga kadib marka sarkaalku kaa tago.

Ku guuldaraysiga inaad raacdo ama in aad diido inaad u hogaansanto amar kasta ama tilmaamo sharci ah oo uu ku siiyey sarkaalka fulinta sharciga ayaa ah sharci darro waxayna keeni kartaa in lagu xiro. Ha diidin haddii sarkaalka booliis ah xabsiga kuu kaxeeyo.

Sharci fulinta/booliiska wadooyinku waa hay'ad ku haboon badalida dabecada gaari wadista khatarta ah, yaraynta iskudhaca gaariyaasha iyo dhawacyada, iyo badbaadinta nololaha. Haddii sarkaalka booliis ah ku siiyo digniin ama ganaax ah inaad jebisay sharciga waddada, ujeedadiisu waa inuu kahortago dabecada sharci darada ah ee xilliyada soo socda iyo/ama kuwa amaanka dhibka ku ah ee gaari wadista si loo ilaaliyo badqabka wadooyinkeena. Wada xariir waxtar leh oo qeexan oo ay sameeyaan dhammaan dhinacyada ku lugta leh ayaa ka dhigaaya joojinta ciidanka wadooyinku sameeyaan khibrad badqab leh.

Marka lagu daro tilmaamaha kor ku xusan, haddii aad hub ku haysato gaariga, Gacmahaaga ku qabo isteerinka meel muuqata oo marka oo uu sarkaalku kuu yimaado u sheeg in aad baabuurka hub ku haysato, una sheeg meesha uu hubku yaallo adiga oo sii wada in aad gacmahaaga ku hayso isteerinka. Ha laacin hubka. Sarkaalka ayaa kaa qaadan kara qori sababo dhanka badqabka ah awgood ilaa uu hubinta ka dhameeyo.

Darawalladu waa inaysan:

- Laacin meel gudaha gaariga ah. Haddii aad u baahan tahay inaad laacdo shay, la hadal sarkaalka af ahaan si aad u tilmaanto shayga aad u baahan tahay inaad hesho oo laac shayga kaliya ka dib marka sarkaalku bixiyo ogolaansho afka ah.

- Kasoo bixidda gaariga si lama filaan ah ama soo aadidda dhanka sarkaalka. Haddii aad u baahan tahay inaad ka baxdo gaarigaaga, la hadal sarkaalka af ahaan si aad u waydiiso inaad ka baxdo baabuurka, oo ka bax oo kaliya ka dib marka sarkaalku ku siiyo fasax afka ah inaad sidaas sameeyo.

Inkasta oo joojin kasta oo tarafigu ka duwan yahay kuwa kale kuna xiran tahay xaalada, darawalladu waxay badanaa filan karaan in sarkaalku uu:

- Salaamo darawalka.
- Uu sheego inuu yahay sarkaalka booliis ah.
- Uu ka helo shattiga darawalnimada iyo cadaynta caymiska darawalka.
- Uu u sheego qofka sababta uu u joojiyay uuna u sharxo xaaladaha keenaya in ganaaxa ama digniin uu baxsho.
- Inuu hubiyo ansax ahaanshaha iyo run ahaanshaha shattiga darawalka.

Noocyada soo socda ee aqoonsiga ah ayaa la aqbali karaa marka la aqoonsanaayo darawalka inta lagu jiro joojinta ay boolisku sameeyaan:

- Shattigaaga darawalka ee Minnesota.
- Shattigaaga darawalnimada ee meel ka baxsan gobalka.
- Shatti ku meel gaar ah.
- Ogolaanshaha ardayga darawalnimada.
- Aqoonsiga Milatariga.
- Shattigaaga darawalka qunsuliyada/caalamiga ah.

Iyada oo ku xiran nooca joojinta, sarkaalka ayaa bixin kara ganaax ama digniin, ama xiri kara qofka sharciga jebiyay. Ganaaxu waa inuu sheegaa xeerarka ama qaanuunka gaarka ah iyo sharaxaada sharciga la jabiye. Inaad aqbasho ganaax uu ku saaray sarkaalka maaha inaad aqbalashay danbiga ama masuuliyada; waa keliya inaad heshay amarka ganaaxa oo la marsiinaayo kiiska madaniga ah iyo inaad balan qaado inaad soo xaadirayso dacwada danbiga sharci jabinta. Dhammaan ganaaxyada waxaa loo gudbin doonaa maamulka maxaliga ah si dacwada loo dhagaysto. Darawallada ayaa u adeegsan kara nidaamka maxkamada si ay uga hadlaan arimaha danbiga ama madaniga ah, ayagoo haysta dookha ah barnaamijka dhaqan celinta oo lagu sameeyo kiisaska qaar, sida tababarka waxbarashada darawalka. Saraakiisha sharci fulinta waxaa laga doonayaa inay lahaadaan heerka ugu sareeya ee xirfadeed marka gaari ay ku joojiyaan waddada. Haddii su'aalo ka yimaadaan anshaxa sarkaalka intii uu waday joojinta gaariga, darawalladu waa inay la xariiraan wakaalada sharci fulinta ee sarkaalku ka socdo ama kormeeraha ayagoo adeegsanaaya xogta sarkaalka ee ku qoran warqadda ganaaxa.

## Ka cararida Sarkaal Booliis ah

Inaad sarkaalka booliis ah uga cararto gaari waa sharci daro wayna khatar badan tahay. Qof kasta oo jebiya sharcigan waa danbiile wayn waxaana lagu xukumi

karaa xabsi muddo aan ka badnayn sadex sano iyo hal maalin, ganaax aan ka badnayn \$5,000 ama labadaba.

Haddii qof la dilo ama dhaawacmo, darawalka cararaaya ayaa lagu xukumi karaa sida soo socota:

- Haddii dhimasho ka dhalato intuu ka cararayo sarkaal booliis ah, darawalka waxaa lagu xukumi karaa xabsi muddo aan ka badnayn 10 sano, waxaa lagu ganaaxi karaa lacag aan ka badnayn \$20,000, ama labadaba oo la isku daray.
- Haddii dhibaato wayn oo jireed ka dhalato intuu ka cararaayo sarkaal booliis ah, darawalka ayaa lagu xukumi karaa xabsi muddo aan ka badnayn todobo sano, waxaa lagu ganaaxi karaa lacag aan ka badnayn \$14,000, ama labadaba oo la isku daray.
- Haddii waxyeelo aad u weyn oo jireed ay ka dhalato, darawalka ayaa lagu xukumi karaa xabsi muddo aan ka badnayn shan sano, waxaa lagu ganaaxi karaa lacag aan ka badnayn \$10,000, ama labada oo la isku daray.

## **Iska Ilaali Dadka Jidka Lugaynaaya**

Haddii aad gaariga ku wado wadooyinka mashquulka badan ee magaalada, tuulooyinka baadiyaha ama wado wayn, markasta ka feejignoow dadka lugaynaya. Sii xaqa marinka dadka lugaynaya ee waddada ka goynaaya isgoyska iyo meelaha

jidka laga gooyo. Iska ilaali dadka jidka lugaynaya ee maraaya meelaha gaariyaashu ay yaallaan, inta lagu jiro xiliyada aragu liito, iyo markasta oo carruur ay agagaarka joogaan.

Haddii qofka lugeynaya uu ku jiro waddo isgoys ah oo calaamadeysan ama aan calaamad lahayn, ka istaag oo sug ilaa inta uu qofka lugaynaya uu ka gudbayo haadkaaga.

U fiirso dadka lugeynaya ee indho la' kuwaas oo laga yaabo inay wataan bakooraad cadd ama bir u eg ama isticmaalka eeyga dad haga. Haddii qof lugaynaya oo indho la' uu taagan yahay meesha waddada laga gooyo, ha u adeegsan hoonkaaga ama ha sheelarayn matoorkaaga maadaama ay taasi keeni karto khalkhal gelinta qofka waddada lugaynaya ama eeyga hagaaya. Waa sharci daro inaad baasto gaari kale oo u istaagay qof jidka goynaaya.

Haddii

gaari kale istaagay, fiiri dad waddada goynaaya oo maraaya meesha waddada laga gooyo una diyaar garoow inaad istaagto. Jabinta sharciyada xaqa waddada ee dadka lugaynaya waa danbi fudud. Jabinta labaad ee sharciyadaan sanad gudhiis ayaa ah danbi fudud oo heerkiisu sarreeyo.

## **Meelaha waddada laga gooyo**

Isgoysyada wadooyinka ee calaamadeysan ayaa waxay leeyihiin sadarro cadcad oo aan kala go'nayn waxayna leeyihiin calaamado waddada ku dhegan ama nalal biligleynaya si ay kuuga digaan inaad ku soo wajahan tahay isgoys.

Meelaha dadku jidka ka gooyaan ee aan calaamadaysnayn waa meelaha wadadu

uga darsanto laynka geeska ee lagu socdo aysana ku oolin laymanka midabka leh ee waddada. Markaad istaagayso meesha dadku jidka ka gooyo ee calaamada leh ama aan lahayn, ha ku goyn gaarigaaga meesha dadku marayaan.

Marka aad tahay qofka waddada goynaya, raac sharciyada wadooyinka ee loo sameeyay inay dhawraan badqabkaaga ayna ka caawiyaan darawaliinta inay ku arkaan.

- Raac digniinaha xakamaynta ee ku yaala isgoysyada. Dhawr talaabo ka durug waddada marka aad sugayso in calaamada WALK (SOCO) ay soo baxdo.
- Haadka sii gaariyaasha ku jira isgoyska xiliga calaamada WALK (SOCO) ay daaran tahay.
- Muuji inaad doonayso inaad jidka goyso, isha ka fiiri darawalka oo xaqiiji in darawalku ku siinayo fursad kahor intaadan goynta jid ku dhaqaaqin.
- Adeegso meelaha geeska waddada marka la heli karo aadna adeegsan karto.
- Marka aad ka gudbayso waddo aan lahayn calaamadaha jid ka gudbida, sii fursad ay gaariyaasha waddada maraaya oo dhan ay kugu dhaafaan.
- Ha gelin haadadka gaariyaashu ku socdaan, markay suuragal tahay, oo jidka sii gaariyaasha waddada ku socda.
- Haddii ay muhiim tahay inaad waddada ku lugayso, ku soco dhanka bidix, ama ku soco haadka gaariyaasha kaa hor imaanaaya ku socdaan.

Markaad lugaynayso habaynkii, ama marka aragu liito, xiro dhar midab cad leh oo leh wax iftiinku qabanaayo ama qaado toosh si aad uga caawiso darawallada inay ku arkaan. U diyaar garoow inaad ka fogato darawallada aan ku arkayn. Dadka jigka lugaynya waxay xaq u leeyihiin inay maraan isgoysyada iyo meelaha jika laga gooyo, laakiin darawallada ayaa laga yaabaa inaysan ku arkayn xiligii la rabay inay joogsadaan. Xataa marka ay jiraan xaaladaha cimilada caadiga ah, caadka ka yimaada qoraxda iyo sababaha kale ayaa ku adkayn kara darawallada inay arkaan jidka ka horeeya ayna arkaan dadka lugaynaya waqti ku filan inay ka istaagaan.

## La wadaagista Waddada Baaskiileeyda

Baaskiiladu waa gaadiid sharci ah oo ku socda wadooyinka Minnesota waxayna leeyihiin isla xaquuqaha iyo waajibaadka saaran gaariyaasha kale.

Laymanka baaskiilada ayaa loo sameeyay inay gaadiidka baaskiilka ka duwaan jidka gaariyaasha caadiga ah. Waa sharci daro in aad gaari ku wado laymankaan marka laga reebo inaad gaariga baakimayso, marka lagu fasaxo, si aad u gasho ama uga baxdo wado, ama aad ugu diyaar garoowdo leexasho. Kahor intaadan ka gudbin laynka baaskiilka, xaqiiji inay badqab leedahay samaynta sidaan. Haadka sii baaskiileeyda soo socota. Marka laynka baaskiilku banaan yahay, muuji inaad donayso inaad leexato kadibna u leexo dhanka laynka baaskiilka kahor intaadan kala wareegin.

Taxaddar markaad baasayso qof baaskiil wada. Markaad baasayso, sharciga ayaa qasab ka dhigaaya inay u dhexeyso ugu yaraan sadex fiid gaarigaaga iyo baaskiilaha. Markaad baasayso baaskiille, xaqiiji in baaskiiluhu uusan bixinayn tilmaan ama uusan dhanka bidix u leexanayn. Markaad baasayso baaskiille, darawalka waxaa loo ogol yahay inuu waddada ka gooyo bartamaha xataa marka lagu asteeyo inay tahay aag aan la ogolayn inaad baasto gaariga marka ay badqab leedahay inaad sidaan samaysid.

## Sharciyada Baaskiilka

Darawallada baaskiilada ayaa laga doonayaa inay ku dhaqmaan sharciyada wadooyinka.

- Dadka wata baaskiilada waa inay u socdaan isla jihada gaariyaashu u socdaan, kamana hor imaan karaan.
- Baaskiileeydu waa inay bixiyaan digniin dhammaan makay leexanayaan ayna raacaan calaamadaha/digniinaha xakamaynta waddada iyo aaladaha.
- Dadka baaskiilka wataa marka ay soo gaaraan calaamada joogsiga waa in ay xawaaraha ku soo yareeyaan heer u ogolaanaya in ay joogsadaan kahor inta aysan gelin isgoyska ama isgoysyada lugta lagaga gudbo ee ugu dhow. Haddi uuna agagaarka gaadhi joogin, darawalku waxa laga yaabaa in uu leexdo ama uu ka gudbo isgoyska isga oo aan istaagin.
- Baaskiileeydu waa inay adeegsadaan isla calaamadaha gacanta iyo dhudhunka sida darawallada kale u adeegsadaan laakiin waxay sidoo kale dhudhunkooda midig u taagi karaan horay si ay u muujiyaan inay midig u leexanayaan.
- Baaskiileeydu waa inay ku socdaalaan dhanka midig ee baabuurta xoogga u socda. Hase yeeshee, khataraha qaarkood sida wadooyinka qalafsan, walxaha qashinka ah, bulaacadaha daboolkooda ama haadadka tarafiga cariiriga ah ayaa ka uga baahan kara baaskiileeyda inay u socdaan dhanka bartamaha haadka. Baaskiileeydu waxay sidoo kale ka bixi karaan laynka marka ay baasayaan gaariga ama marka ay bidix u leexanayaan.
- Baaskiileeyda waxaa loo ogol yahay inay is bar-bar socdaan haddii aysan carqalad ku ahayn isku socodka, marka ay ku socdaan wado layman lehna, waa inay ku socdaan hal layn.
- Baaskiileeyda waxaa lagu boorinayaa inay xidhaan koofiyadaha badqabka.

- Baaskiileeyda waxaa laga doonayaa inay wataan nalalka sharciga ah iyo asteeyyaasha marka ay habaynkii soconayaan. Baaskiil ayaa lahaan kara nalka hore kaasoo bixinaaya fareejooyin cad, ama nalka danbe oo bixinaaya nalka cas, ama labadaba.
- Baaskiilka ayaa wuxuu lahaan karaa taayiro leh giraangiro, qodxo, ama waxyaabo shaaga ka soo taagtaagan oo loo sameeyay inay kordhiyaan qabasashada laamiga.

Marka aad baaskiil ku wado geeska waddada, ama aad ka goynayso wado meesha dadka lugaynaya ay ka gooyaan, sii wado dadka lugaynaya oo sii digniin cod ah kahor intaadan gudbin. Waxa laga yaabaa in aadan ku wadi karin baaskiil geeska lagu socdo ee waddada gudaha suuqyada ganacsiga, ilaa in sharciga maxaliga ah fasaxaayo maahee. Maamullada maxaliga ah ayaa sidoo kale mamnuuci kara in baaskiileeydu ay ku socdaan geeska waddada ama gooyaan waddada. Baaskiileeyda baaskiilka ku wada geeska waddada ama meesha waddada laga gooyo ayaa leh dhammaan xaquuqaha iyo waajibaadka dadka waddada goynaaya.

Sanadka 2010, Baarlamaanka Minnesota ayaa dhaqangeliyey sharci si xal loogu raadiyo dhacdooyinka marka gaariyaasha ku socda labada taayir aan nidaamyada xakamayntu qabanayn markay marayaan nalalka taraafikada, isbadalka calaamada nalkuna aysan dhicin.

Sharcigu wuxuu siinayaa baaskiileeyda dookh ay kusii socon karaan isgoyska kadib markay waqti macquul ah sugayeen, wuxuuna siinayaa difaaca sharciga oo gaar ah talaabadaan, ayadoo lagu salaynayo shan shardi:

- Baaskiilku inuu si buuxda u joogsaday.
- In astaanta xakamaynta taraafigu sii muujinaysay nalka cas muddo aan macquul ahayan.
- In ay caddahay in nidaamka calaamada xakamaynta taraafigu aysan si sax u shaqaynayn ama, haddii lagu xiray inay cagaar isku badasho keliya markay aragto gaari caadi ah oo soo socda, nidaamku uu gabi ahaanba ku guulaysatay inuu ogaado baaskiilka.
- In uuna jirin gaari ama qof kusoo socda waddada baaskiilku goynayo ama galayo, ama
- Gaariyaasha ama dadka soo socda ay aad uga fog yihiin meesha oo aysan khatar muuqata ahayn.

Difaaca dhabta ahi waxa uu khuseeyaa oo kaliya xadgudubka lagu eedeeyay ee gelitaanka ama ka gudubka isgoys ay maamusho nalka xakamaynta gaadiidka ee goynta nalka cas. Ma siinaayo difaac ficil kale oo jabinta sharciga madaniga ama danbi ah.

Baaskiileeyda waxaa adkaan karta in la arko marka la maraayo waddada. Ka fiiri isgoysyada, waddada dadku lugeeyo, iyo marka aad gelayso ama ka baxayso luuqyada iyo waddooyinka guryaha laga galo. Iska eeg baaskiilada socda habaynkii.



## Baaskiilada Matoorka ku shaqeeya

"Baaskiil mator ku shaqeeya" waxaa lagu qeexaa awoodiisa xawaaraha; wuxuu awoodaa inuu ku safro xawaarayaasha 30 mph ama ka yar. Xeerarka qabanaaya baaskiilka caadiga ah ayaa qabanaaya baaskiilada matoorka leh. Baaskiilada ku shaqeeya matoorka looma ogola inay ku socdaan waddada lagu lugeeyo, wadooyinka waawayn, ama haadadka iyo luuqyada loo sameeyay dadka lugaynaya iyo baaskiilada caadiga ah.

## Mootooyinka

Mootooyinku waa inay raacaan isla sharciyada waddada si lamid ah darawallada kale. Maadaama mootooyinku ay ka yar yihiin gaariyaasha, waa wax dhib badan in la cabiro xawaarhooda iyo inta ay kuu soo jiraan marka ay kugu soo socdaan.

Inta aad u jirsanayso mootada kaa horaysa waa in ay la mid noqoto ama ka badantahay inta aad u jirsato gaariyaasha kale ee aad daba socoto. Dadka mootada wada ayaa dhib ku qabi kara xakamaynta mootada, taasoo keenaysa inay taraarxdo. Sii boos si aad uga fogaato inaad isku dhacdaan mootolaha.

Markaad u diyaar garoowdo inaad gasho haadka ka horeeya mooto, sii mootada boos badan oo gadaasha gaarigaaga ah taas oo lamid ah kaad siin lahayd gaari caadi ah.

Haddii mooto isku daydo inay ku dhaafdo, ku sugnoow haadkaaga iyo xawaarahaaga, una ogolow darawalka inuu ku dhaafdo.

Ciriiri galinta mootada waa sharci daro waana khatar. Weligaa ha isku dayin inaad baabuur ku dhinac waddo mooto isla haadka ay ku socoto.

Mootooyinku ma lahan isla difaaca shilka ee ay leeyihiin gaariyaashu. Shilalka ka dhaca isgoysyada magaalooyinka ayaa ah kuwa ugu badan ee u dhexeeya mootada iyo gaariyaasha. Qaar badan oo kamid ah ayaa dhaca marka darawalladu ku guuldaraystaan inay xaqa waddada siiyaan ayna dhanka bidix u leexdaan ayagoo ay mooto soo socoto.

Sharciyada xaqa waddada ayaa qabanaya mootoleeyda, si lamid ah darawallada kale. Darawallada mootada ayaa adeegsan kara laymanka gaariyaasha dadka badan qaada.

## Gaariyaasha korontada ee xaafada (NEV)

NEV waa gaari ku shaqeeya koronto oo leh sadex ama afar taayir wuxuuna ku socon karaa xawaare dhan ugu yaraan 20, laakiin kama badan karo 25 mph. NEV waa inuu aqoonsi iyo diiwaangelin ka haystaa DVS. Qof kasta oo haysta shattiga darawalka heerka D ayaa wadi kara NEV, laakiin wuxuu keliya ku kaxayn karaa wadooyinka leh xadigga xawaaraha dhan 35 mph ama kayar. NEV lama adeegsan karo imtaxaanka waddada.

## Gaariyaasha Ganacsiga

Gaariga ganacsiga waa gaari matoor ku shaqeeya ama isudarka gaariyaasha matoorka ku shaqeeya oo miisaankoodu ka badan yahay 26,000 bown kuwaasoo loo adeegsado in lagu qaado dadka ama alaabta. Basaska, oo ay ku jiraan basaska iskuulka ee dhammaan xajmiyada oo dhan, iyo gaariyaasha yaryar ee leh astaamaha alaabaha khatarta ah ayaa sidoo kale ah gaariyaal ganacsi.

## Baasida Gaari Ganacsi

Kahor intaadan baasin gaari ganacsi, xaqiiji inaad haysato badbaado dhanka dhinaca, gadaal, io horta gaarigaagaba.

Markaad ku socoto jidadka waaweyn ee is kor saaran, waxay qaadataa sadex ilaa shan sikin inaad baasto gaari ganacsi marka loo fiirsho gaariga caadiga ah. Sii wakhti ku filan in aad u baasto gaariga ganacsiga aadna ku laabato jidka dhinaca midig kahor intaadan 100 fiid/tallaabo u jirsan gaadiidka kugu soo socda.

Ha dhaafin gaari ganacsi haddii aad qorsheynayso inaad waddada ka baxdo ama ka leexato jidka mardhow. Halkii aad samayn lahayd baasid aan amaan ahayn, soco gadaasha gaariga ganacsiga ilaa aad ka gaarto meesha aad ka baxayso. Gaariyaasha ganacsiga, ee kor u socda ayaa badanaa yareeya xawaaraha, taasoo ka dhigaysa wax fudud inaad baasto marka loo eego gaariga caadiga ah.

Marka waddadu hoos u daadeg tahay, hoobadka baabuurka ganacsigu wuxuu kordhin doonaa xawaarihiisa Waxaa laga yaabaa in aad u baahato bad dheeraad ah si aad u baasto. Dhamee baasidaada sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah hana sii wadin inaad garab socoto gaariga ganacsiga. Dib ugu laabo laynkaaga keliya marka aad ka arki karto wajiga hore ee gaariga ganacsiga muraayad haadkaaga danbe. Joogtee xawaarahaaga kadib markaad baasto gaariga ganacsiga. Marka gaariga ganacsigu ku baaso, waad caawin kartaa darawalka adoo maraaya geeska ugu geeseeya laynkaaga xoogaana yaraynaaya xawaarahaaga. Ha kordhin xawaaraha marka gaariga ganacsigu ku baasaayo. Markaad aragto gaari ganacsi oo ka imaanaya hortaada, ku soco cirifka ugu fog ee midig sida ugu macquulsan si aad isaga ilaaliso inaad baalaha isku dhufataan aadna u yarayso xawliga dabaysha u dhaxaysa labada gaari. Dabaysha xawliga ah ayaa gaariyaasha kala riixaysa, iskuma soo riixayso.

Xajmigooda oo wayn dartii, gaariyaasha ganacsiga ayaa badanaa u muuqda inay xawaare gaaban ku socdaan marka loo barbar dhigo xawaarhooda dhabta ah. Tiro badan oo isku dhacyada gaariga iyo gaadiidka ganacsiga ayaa ka dhaca isgoysyada sabab la xariirta in darawalka gaarigu fikir khaldan ka aamino xawaaraha iyo badka uu u jiro gaariga ganacsiga.

## Badalida Laynka Adoo Hor socda Gaariyaasha

### Ganacsiga

Badalida laynka iyo layn ka jarida adoo wax aad u yar ka horeeya gaari kale ayaa ah wax markasta khatar ah, laakiin gaar ahaan ayay khatar u tahay inaad "hor jarto" bas ama gaari xamuul ganacsi. Haddii aad si degdeg ah ugu socoto labada gees midkood, waxay u badan tahay inuusan darawalku ku arkayn xili ku filan. Xataa haddii uu kuu jeedo, gaariga ayaan awoodi doonin inuu tartiib u socdo isla markaaba si uu iskaga ilaaliyo inaad isku dhacdaan waayo waqtiga uu haysto inuu ku istaago oon ku filnayn.

### Daba gelida Gaari Ganacsi

Gaariyaasha ganacsiga ayaa u baahan meel ay ku istaagaan oo ka badan inta gaariyaasha kale. Gaariga caadiga ah ee rakaabka oo ku socda xawaare dhan 55 mph ayaa ku istaagi kara 130 ilaa 140 fiit. Gaari xamuul ah oo

buuxa ayaa u baahan in ka badan 400 oo fiit si uu si buuxda ugu istaago.

Daba gelida gaari ganacsi adoo aad ugu dhow ayaa yarayn doonta awoodaada arkida waddada kaa horaysa. U jirso bad kugu filan gadaasha gaariga si darawalku kaaga arko muraayad haadda. Inaad bad amaan ah ka danbayso gaariga ayaa sidoo kale ku siinaysa waqti aad uga falceliso haddii gaariga ganacsigu si lama filaan ah u istaago. Gaariyaasha ganacsiga ayaa leh muraayad haad waawayn oo nalku qaban karo. Marka aad daba socoto gaari ganacsi habeenkii, markasta gaabi nalalkaaga si aad uga hortagto inaad indhaha ka cawarto darawalka. Marka gaari ganacsi uu soo galo waddada, wuxuu u baahan yahay wakhti ka badan

kan gaariga yar inuu sheelareeyo uuna qaato xawaare ku filan. Diyaar u ahoow inaad tartiib u socoto ama badasho laymanka, haddii aad u baahato, si aad ugu furto gaariga xamuulka ah inuu jidka si amaan ah usoo galo.

Haddii aad gadaal uga timaado gaari xamuul ah oo taagan meel taag ah, sii gaariga xamuulka ah meel banaan oo uu dib ugu soo taraaraxo waxyar markuu bilaabo inuu socdo. Ku beeg gaarigaaga dhanka bidix ee haadkaaga si darawalku kaaga arko muraayad haadka.


### Gaariyaasha ganacsiga iyo Leexashooyinka Balaaran

Fiiro gaar ah u yeelo fareejooyinka leexashada ee gaariyaasha ganacsiga. Qaar badan oo gaariyaasha ganacsiga ah ayaa sameeya leexashooyinka balaaran ee dhanka midig oo badan waana inay mararka qaar dhaafaan aag banaan dhankooda midig kahor intaysan leexan. Taayirada danbe ee gaariga leexanaya ayaa qaata jiirka ka yar tan taayirada hore; hadba intuu dheer yahay gaarigu, ayuu wayn yahay farqigu. Si aad iskaga ilaaliso iskudhac, ha baasin gaariga ganacsiga adiga oo ka maraya dhanka midig, haddii ay jirto suuragalnimada ah in uu dhanka midig u leexdo.

### "Aagaga Aan la galin" ee Gaariga ganacsiga

Haddii aad daba socoto gaari ganacsi ka fogaow "aaggiisa aan la galin." Aaggagani waa meelo uuna kaa arki karin horay, geesaha, iyo gadaashada

gaariga. Qaar kamid ah darawallada gaariyaasha xamuulka ayaan awoodi karin inay arkaan ilaa 20 fiit horta shirkooda, ama labada dhanba ee tareelaha, iyo ilaa 200 oo fiit gadaashooda.



## Dulqaadka Markaad Marayso Agagaarka Gaariyaasha Ganacsiga

Taraagyada iyo basaska ayaa ku shaqeeya xaddidaado, mararka qaarna u adeegsada tignooloojiyada sida xaddidayaasha xawaaraha. Hoon yeerinta, gaari u wadista si xad dhaaf ah, ama kolba haad ku boodista ayaan dedejin doonin safarkaaga, laakiin waxay sababi karaan mashqulin khatar ah iyo shil.

## Isgoysyada Waddada Tareenka

Isgoysyada waddada tareenka ayaa si gaar ah noqon kara meelo khatar ah oo isku dhacyadu ka dhacaan. Sabab la xariirta xajmiga iyo miisanaka tareenka, inta badan isku dhacyada gaariga iyo tareenka ayaa khatar weyn u leh darawalka gaariga. Tani waa sabab wanaagsan oo darawalladu ku muujin karaan feejignaan dheeraad ah markay marayaan aaga tareennada ama qalabka kale ee jidka tareenka ku socda markay marayaan jidadka tareenka.

## Aaladaha Digniinta Goynta Jidka Tareenka

Goynta jidadka dadweynaha ee tareenka ayaa lagu calaamadeeyaa qalabka digniinta kaasoo loo sameeyay inuu u sheego darawallada marka meeshu ay tahay jidka tareenku maro. Calaamadaha digniinta iyo calaamadaynta laamiga ee muujinaya inaad kusoo socoto meesha laga gooyo jidka tareenka.

Calaamadaha ku yaala meel u dhow jidka tareenka ayaa muujinaya inta ay yihiin tirada jidadka tareenku. Markaad kusoo socoto isgoyska, isha mari jidadka tareenka si taxadar leh una diyaar garoow inaad istaagto markaad aragto calaamadahan.

Nalalka fareejada, ganbaleelada, iyo gacanka waddada tareenka ayaa muujinaya in tareen ama qalab kale oo ku socda jidka tareenku uu soo socdo. Marka aad aragto nalalkan ama gacanka xira waddada tareenka oo laga

shaqey siiyey, ha ku sii socon dhanka waddada tareenka. Ku jooji gaarigaaga ugu yaraan 10 fiit meel u jirta jidka tareenka ama usha waddada xirta ee kuugu dhow. Waa ammaan inaad gudubto marka gaadiidka kaa horeeya uu dhaqaaqo aadna sii socon karto adiga oo aan joogsanaynin gudaha 10 fiit meel ku jirta jidka tareenka. Isgoysyada qaarkood, qof calanside ah ayaa maamuli kara isku socodka waddada inta tareen ama qalab kale ee jidka tareenka ku socdaa uu soo socdo. Raac calansidaha isla sida aad u raaci lahayd aalada digniinta.

## **Gaariyaasha khaaska ah ee Maraaya Isgoysyada**

### **Waddada Tareenka**

Gaariyaasha qaarkood, sida caasiyaasha dadka qaada, basaska, iyo taraagyada waawayn ayaa laga doonayaa inay ku istaagaan dhammaan meelaha ay marayaan jidadka tareenku, haddii tareenku joogo iyo haddii kalaba. Ha dhaafin gaariyaashan. Waa sharci daro inaad baasto gaari kasta oo 100 fiit kayar u jira isgoyska tareenka.

### **Badqabka Isgoyska Waddada Tareenka**

Wax ka badan hal tareen ayaa iman kara isku wakhti ayagoo ka imanaaya jihooyin kala duwan. Marka gaariga ugu danbeeya tareenka uu gudbo, hakusii wadin gaariga jidka tareenka ilaa aad ka hubiso inaan tareen labaad kusoo socon jidka tareenka.

Ka fiiri tareennada labada jihaba isgoyska wado tareen kasta, haddii ay ku dheganyihiin aaladaha digniintu iyo haddii kale.

Marka carriiri badan ka jiro waddada labada dhan ee looga gudbo waddada tareenka, ku sug gadaashada

waddada tareenka ilaa aad ka hubto inaad gaari karto dhanka kale adiga oo aan ku istaagaynin waddada tareenka dusheeda.

Ha la baratamin tareen si aad u gaarto dhanka kale ee isgoyska. Tareenadu ma awoodaan in ay si degdeg ah u joogsadaan sida gaariyaasha. Haddii aad khalad u fahanto xawaaraha tareenka ama gaarigaagu ku dhago isgoyska, waad dhiman kartaa ama dhaawac xun ayaa ku soo gaari kara. Ha badalin geerkaaga inta gaarigaagu ku dhex jiro isgoyska. Haddii gaarigaagu yahay geerka marshada gali kahor intaadan gelin isgoyska.

Darawallada mootadu waa inay ku galaan isgoysyada waddada tareenka si taxadar leh. Ha leexin gaariga si aad u hesho rako fudud oo aad isgoyska kaga gudubto. Inaad gees isku leexiso ayaa keenaysa inaad gasho haadka gaadiidka jihada kaa soo horjeeda kasoo socda.

Inkastoo tareennada ay ku xiran yihiin nalal cadad iyo hoon aad u qaylo dheer, inta ay kuu soo jiraan iyo xawaaraha ay ku socdaan way adag tahay inaad qiyaasto, gaar ahaana xiliyada habeenkii. Haddii aad ka shakido ka gudbida jidka tareenka marka tareenku soo muuqdo, joogso. Sug tareenku ha gudbee kahor intaadan kusii socon goynta waddada tareenka. Waa inaad marna ku dil istaagin jidka tareenka.

## Nidaamka Ogeysiinta Xaaladaha Degdega ah (ENS) ee Isgoysyada ay Iska Jaraan Waddada Weyn-Jidka Tareenka



Isgoysyada kasta ee ay iska goyaan waddada tareenka iyo waddada weyn waxay leeyihiin calaamada Nidaamka Ogeysiinta Degdega ah (ENS) oo bixisa lambarka taleefanka ee 24/7/365 si aad u soo wacdo si aad u soo sheegto dhibaatooyinka ama xaaladaha degdega ah

ee ka dhaca goobta waddada tareenka. Calaamadaha ENS oo leh midabka buluuga ah ayaa ku yaala baraha isgoysyada waddada tareenka ama birta sanduuq kantaroolka ee u dhow jidka tareenka. ENS waxaa loogu talagalay xaaladahaas degdega ah oo u baahan in la joojiyo tareenka sabab la xariirta carqalad ama xanibaad ku gudban isgoyska. Ayagoo lambarka DOT ku dhajinaya calaamada, shaqaalaha gurmada ayaa yaqaana meesha isgoysku yahay waxayna u sheegi karaan tareennada kusoo socda jihada inay joogsadaan ama ay galaan xadidaada xawaaraha.

## Aaga Shaqada ee Jidka Wayn

Aaga Shaqada ee Jidka Wayn waa aagaga ay shaqada dhismaha waddada ama dayactirku ka socoto. Mashiinada ayaa shaqeeya maalin iyo habayn waxayna noqon karaan kuwo socda ama kuwo taagan. Shaqaalaha waddada ayaa aaga ku xira calaamado iyo astaamaha waddada si ay u leexiyaan gaariyaasha. Gaarileeydu waa inay awoodaan inay fahmaan ayna ka falceliyaan tilmaamahaan.

Xasuuusnoow inaad dulqaadato aadna filato dib u dhacyo, gaar ahaana xiliyada safarku badan yahay. Yaree xawaarahaaga, ilaali badqabka shaqaalaha iyo qalabka, oo raac tilmaanta qof kasta oo calanside ah. Ku fashilmida raacida tilmaamaha calansidaha jooga aaga shaqada ayaa keenaysa inaad jabisay sharciga iyo ganaax dhaqaale.

Xadiyada xawaaraha la yareeyay ayaa lagusoo dhajiyaa aagaga badan ee shaqada. Haddii aysan jirin xaddidaada xawaaraha la yareeyay oo meesha ku dhagan, raac xadigga xawaaraha ee meesha ka muuqda. U hogaansanaan la'aanta inaad raacdo xadigga xawaaraha ee goobta shaqada ayaa keenaysa inaad sharciga jabisay aadna waajahdo ganaax dhaqaale. Iska fiiri shaqaale iyo qalab oo ka beddelo haadka aad ku socoto si aad si badbaado leh uga fogaato.

## "Gelitaanka Haadka Goor Dambe" ("Late Merge — Zipper Merge")

Zipper Merge waa xeelad cusub oo darawalnimo oo u baahan in la badalo fikirka darawallada dhaqan ahaan horay loo baray inay xili hore soo baxaan markay aqoonsanayaan in haadku dhammaan doono. Natiijada ku biirida hore maaha hadda kuwo wax tar leh, waxaa kordhay isku dhacyada iyo shilalka waddada.

Habraac cusub oo gaari wadista ee la raacayo marka aad aragto calaamada "lane closed ahead" ("haadku xagga kaa horraysa wuu ka xirmayaa" oo ay gaariyaashuna istaagayaan, ku sii jir haadkaaga hadda ilaa aad gaarto meesha haadka kale lagaga darsamayo. Kadibna marba fursad la qaata darawallada kale si aad qaab fudud oo dabacsan ugu leexato qaybta hartay ee laynka. Marka gaariyaashu badan yihiin cariirina jiro, waxaa ugu badbaqab badan in darawalladu ay ku sugnaadaan laynkooda hadda ee waddada ilaa laga gaaro marka gaariyaasha la nidaamiyo si ay si kala horayn leh ugu galaan waddada. Xeelada Zipper Merge waxay faa'iido u leedahay darawallada ayadoo:

- Yaraynaysa farqiga u dhexeeya xawaaraha u dhexeeya labo haad. Beddelashada haadka marka gaadiidku ay ku safrayaan xawaare isku mid ah ayaa badbaqab badan oo fudud.
- Hoos u dhigida dheerarka guud ee isdaba istaaga ciriiriga illaa heer dhan 40%.
- Yaraynta ciriiriga ka jira kala meelaha loogu kala wareego waddooyinka waawayn, gaar ahaana aagga magaalada weyn.
- Abuurida dareen cadaalad iyo sinaan ku dhisan oo ah in dhammaan haadadku ay ku socdaan xawaare isku mid ah.
- Yaraynta dhacdooyinka isku dagaalka waddooyinka.



*Calaamadaha, digniinaha, iyo calamadaha laamiga Minnesota ayaa waafaqsan heerarka qaranka. Waxaa loogu talagalay inay tilmaamo qeexan bixiyaan si ay kaaga caawiyaan inaad si badqab leh u waddo gaariga. Baro sida loo aqoonsado loona fahmo calaamadaha gaadiidka, astaamaha, iyo calaamadaha laamiga.*

## Calaamadaha




Calaamadaha wadooyinku waxay adeegsadaan tiro astaamo iyo sawiro ah, iyo sidoo kale tilmaamo qoraal ah. Qaababka iyo midabyada calaamadaha ayaa loo asteeyey in ay kuu siiyaan fikir guud oo ku aadan waxa calaamaduhu sheegayaan, xataa kahor intaadan usoo dhawaan si aad u akhrido.

## Macnayaasha Midabka Calaamada




### Sharciga

-  Casaan: Mamnuucyo iyo amaro
-  Caddaan: Sharciyad Digniin

### Digniinta

-  Jaalle: digniin bixin
-  Jaalle-cagaaran: Digniin bixin iyo xakamaynta kala goysyada dadka lugaynaya iyo baaskiilka iyo aagaga iskuulkas
-  Oranjiga: Digniin bixin iyo xakamaynada aagaga dhismuhu ka socdo

### Xog bixin

-  Cagaar: Tusmooyinka iyo xogaha
-  Buluug: Waxay qeexaysaa adeegyada loogu talagalay gaadiidleyda
-  Bunni: Waxay muujinaysaa baraha taariikhiga ah, kuwa dhaqanka, ama madadaalada



## Qaababka Guud



Siddeed Geesle



Saddex Xagal



Dheeman



Leydi (Afar Geesle)



Shan Geesle



Callaamadda istallowda ah ee isgoyska tareenka



Goobaabin

## Calaamadaha Sharciga ah

Calaamadaha sharciga ah ayaa ku haga darawallada inay raacaan sharciyada wadooyinka. Waa qasab inaad raacdo calaamadahan si aad gaari ugu wado qaab amaan ah oo sharci ah. Haddii aad u hoggaansami weydo calaamadahan, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo tigidh baabuur oo laga yaabo in lagu ganaaxo.



### Joogsi

Si dhammaystiran u joogso. Taagnoow ilaa dadka jidka maraya iyo gaariyaasha waddada kaa leh ay ka gudbaan isgoyska. Kadibna si taxadar leh u sii soco.



### Sii Waddada

Tartiib u soco ama joogso, haddii loo baahdo. Sii waddada dhammaan gaadiidka iyo dadka lugaynaya, oo sug ilaa ay ammaan leedahay inaad sii socoto.



### Ha Gelin

Ha galin haadkaas ama waddadaas haddii calaamadani kugu wajahan tahay.



### Jid Khaldan

Waxaad gashay haad khaldan oo ay gaariyaal dhanka kale jihada kale ka soo socdaan. Waxaad ku socotaa jiho khaldan.



Lama Ogola u  
Leexashada Bidix



Lama Ogola u  
Leexashada  
dhanka Midig



Lama Ogola Dib u  
jiirayn (U-turn)



Baakinka Lama  
Dhigan karo

Goobabada cas ee leh calamad guduud gudban ee ku taalla calaamada ayaa waxay muujinaysaa inaadan waxaas samayn karin.



### Xadigga Xawaaraha

Calaamadaha xadigga Xawaaraha ayaa muujinaya xawaaraha ugu badan ee aad ku wadi karto gaari qayb kamid ah waddada. Xadigga ugu yar ee xawaaraha ayaa badanaa lagu dhajiyaa wadooyinka gobalada u kala goosha ee waawayn oo leh gelitaan xadidan. Haku wadin xawaare ka hooseeya kan ku qoran xadigga ilaa in cimilo xun ama xaaladaha waddada ee liita ay qasab ka dhigaan mooyaane.



**Ha Baasin**

Calaamadaha biloowga aaga aan la ogolayn in gaari kale la dhaafo.



**Hal Jiho**

Gaadiidka ku socda wado gaar ah oo raacaya keliya jihada falaarta.




**Dhanka Midig Ku soco**

Ku soco dhanka midig ee waddada, bartamaha, ama caqabad ayaa kaa horaysa.



**Meertada**

Markaad kusoo socoto meerto haadad badan raac laynka saxda ah xili hore intaadan soo gaarin meertada. Calamadaha adeegsiga haadka ayaa markasta muujinaya haadadka loo adeegsan karo leexashooyinka kala duwan. Tusaalahan, si aad dhanka midig ugu leexato, raac haadka midig keliya, haddii aad u leexanayso dhanka bidixna gal haadka dhanka bidix keliya loo leexdo. Calaamadu waxay muujinaysaa in aad toos usoo geli karto adiga oo ka imanaaya midkood labada haadba.



**Calaamadaha Xakamaynta Adeegsiga Haadka**

Leexashada ayaa qasab ah ama laga soocayaa layn gaar ah.



Gaadiidka ku socda haadka midig ayaa horay usii socon kara ama leexan kara.



**Ma leexan kartid Marka Nalku Cas yahay**

Sug inta nalka tarafigu isu badalayo cagaar kahor intaadan leexan.



### Haadka Bartamaha Keliya

Haadka bartamuhu waa wadaag, si ay dhanka bidix ugu leexdaan, gaariyaasha ku safraya labada jihaba.



### Xawaaraha la Yareeyay Ayaa kaa Horreeya

Xadigga xawaaraha la yareeyay ayaa xagga kaa horraysa ku dhejisan. Bilow inaad hoos u dhigto xawaarahaaga.



### Laynka Xadidan

Astaanta dheemanka ayaa muujinaysa in laynka taraafiga loo kaydiyay isticmaal gaar ah ama gaari nooc gaar ah. Haadka ayaa loo qorsheyn karaa gaariyaasha qaada labo ama ka badan oo rakaab ah ama baska, gaariga xamuulka, ama adeegsiga baaskiilka.



### Baakinka Naafada

Goobaha gaariga la dhigto ee lagu dhejiyay calaamad buluug ah ee "handicapped parking" "neesha gaariga ay dhigato naafadu" waxaa loogu talagalay baabuurta ay ku qoran tahay taarikada naafada ama haysto ogolaanshaha gaari dhigashada naafada. Marka meelaha baabuurta la dhigto ee naafada loogu talagalay la buuxiyey ama aan la heli karin, baabuurka ay ka muuqato ogolaanshaha gaari dhigashada naafanimada oo ansax ah ama leh taariko ayaa dhigan kara xagal oo qabsan kara laba boos oo meesha gaariga la dhigto ee caadiga ah.

## Calaamadaha Digniinta

Calaamadaha Digniinta ah Calaamadaha digniintu waxay kaaga digayaan khataro kaaga imaan kara jihada aad usii socoto. Si aad u dhawrto badqabka naftaada iyo badqabka dadka kale, waa inaad aqoonsan kartaa dhibaatooyinka aadna si ku haboon uga falcelisaa.

Inta badan calaamadaha digniintu waa jaalle. Calaamadaha ka digaya isgoysyada ay ka gudbaan dadka lugaynaya ama baaskiilka iyo aagagga iskuulku waxay noqon karaan huruud ama dhalaal huruud-cagaar ah. Qaar kamid ah calaamadaha digniinta ee ugu caansan ayaa hoos lagu muujiyay.



### Isgoysyada Waddada Tareenka

Calaamadaha digniinta, calaamadaha laamiga, ganjeelada, iyo nalalka cas ee fareejaynaaya ayaa la dhigaa inta badan meelaha laga gooyo waddada tareenka. Calaamadaha laamiga waxaa ku jira laynka joogsiga, "X," iyo xarfaha "RR" oo lagu rinjiyeeyay meelaha laamiga ee ka hoseeya meesha waddada laga gooyo.

Calaamada leh qaabka X ayaa muujinaysa meesha laga gooyo waddada tareenka. Haddii uu jiro wax ka badan hal marin oo waddada tareenka ah, calaamad ka hoosaysa isku talaabadka ayaa muujinaysa tirada marinnada tareenka.



Calaamada "ka reebida" ayaa ka dhigan in darawallada baska iyo taraaga ee badanaa laga rabo inay istaagaan meelaha laga gooyo waddada tareenka ay sii socon karaan ayagoon istaagin. Darawallada ayaa wali u baahan inay iska fiirshaan labada jiho ee tareenka ka imaan karo.



### Isgoysyada Waddada Tareenka

Calaamadahaan waxay uga digaan darawallada in jidka tareenku ka horeeyo.



Tartiib u soco. Si taxadar leh u eeg labada jihaba una diyaar garoow inaad joogsato. Xasuusnoow, in tareennadu ay degdeg u joogsadaan.

### Aaga Dugsiga

Calaamadahaan digniinta shan xagalka ah ee leh midabka jaallaha ama jaallaha-cagaaran ayaa muujinaysa in aaga uu ku yaallo iskuul ama jidka looga gooyo iskuulka oo la aqoonsan yahay uu kaa horeeyo. Iska fiiri carruurta oo u diyaar garoow inaad joogsato.



### Meesha Dugsiga Looga Gooyo Waddada

Iska fiiri carruurta Meelaha waddada laga gooyo maraaya oo u diyaar garoow inaad joogsato. Darawalladu waa inay waddada siiyaan dhammaan dadka lugaynaya ee maraaya isgoyska waddada. Calaamada isgoyska dugsiga oo leh falaarta hoose ayaa ah calaamada rasmiga ah.



### Isgoyska dadka lugayaana

Calaamadahaan waxay ku hagaan darawallada inay iska fiirshaan dadka lugaynaya ee goynaaya waddada. Tartiib u soco oo u diyaar garoow inaad ka istaagto dadka jidka goynaaya. Sii xaqa marinka dadka lugaynaya ee waddada ka goynaaya isgoyska iyo meelaha jidka laga gooyo. Calaamada isgoyska dadka lugaynaya oo leh falaarta hoose ayaa ah calaamada rasmiga ah.





**Aaga aan la Ogolayn Baasida**

Calaamadan waxay ku taalaa dhanka bidix ee wado wayn oo labo jiho ah. Waxay bixisaa digniinta ah in ay bilaabatay aaga aan baasid la samayn karin.



**Astaanta Gaari Tartiib U socda**

Astaantan waa in lagu dhejiyo dhammaan gaariyaasha ku safraya xawaare dhan 30 mph ama ka yar, sida qalabka beeraha ama gaariyaasha ay jiidayaan xayawaanku, marka ay ku soconayaan waddada dadwaynaha. Wax ka badal xawaaraha gaarigaaga ama u diyaar garoow inaad badasho laymanka markaad aragto calaamadaan.



**Gaari uu Xayawaan Jiidayo**

Iska ilaali gaariyaasha xawaaraha yar ku socda, ee xayawaanku jiidayo ee waddada ku socda. Yaree xawaarahaaga oo tartiib u baas. Gaariyaashu uu xayawaanku jiidayo ayaa laga doonayaa inay lahadadaan nal ama laambad looga jeedo laga soo arki karo 500 fiid laga bilaabo qorax dhaca ilaa qorax soo baxa, ama inta lagu jiro xiliyada aragu liito, hawadu xun tahay ama uusan jirin iftiin ku filan.

**Astaamaha Digniinta Isgoyska**



**Isgoyska waddada**

Isgoys ayaa kaa horeeya. Diyaar garoow inaad waddada siiso.



**Waddada Geeska ka Imanaysa**

Gaariyaal ayaa ka imanaya dhankaaga midig. Iska eeg gaariyaasha soo galaya waddada.



**Isgoyska T ayaa kaa Horeeya**

Jidka aad ku safrayso wuu dhamaan doonaa mardhow. U diyaar garoow inaad u leexato midig ama bidix. U diyaar garoow inaad goysyo waddada.



**Isgoyska Y ayaa Kaa horeeya**

Jidka kaa horeeya ayaa u qaybsamaya labo jiho. U diyaar garoow dadka goynaya waddada una diyaar garoow inaad u leexato dhinac ama dhinac kale.



**Qalocasho**

Waddada ayaa u qalooanaysa jihada la muujiyay. Haddii calaamadu muujiso xadigga xawaaraha, tartiib ugu soco xawaaraha la tilmaamay.



**Meertada**

Markaad kusoo dhawaato martada tartiib u soco oo raac xawaaraha lagu talinaayo una diyaar garoow inaad joogsato haddii loo baahdo.



**Waddo Laa-laabmaysa ayaa kaa Horaysa**

Waddada kaa horaysa ayaa horay iyo gadaal u laablaabmaysa. Ku soco xawaare badbaado leh ama xawaaraha la cayimay.



**Wado labo Jiho ah ayaa Kaa horaysa**

Waxaad ka baxaysaa waddo hal jiho u socota waxaadna gelayaa waddo labo jiho ah. Ku sugnoow dhanka midig.



**Jidka wayn ee Labada qaybood ah ayaa Bilaabanaaya**

Wadadu way kala qaybsamaysaa Ku sugnoow dhanka midig.





### Waddada weyn ee labada qaybood ah hadda kadib

Jidka qaybsan xagga kaa horaaysa ma qaybsanaan doono. Labada haad ee gaadiidka waxba uma dhaxayn doonaan



### Calaamada Taraafiga

Nalka taraafiga ayaa ku yaalla isgoyska xiga.



### Waddadu Hortaada way Leexan doontaa

Waddada kaa horraysaa si xooggan ayey jiho kale ugu leexan doontaa. Ku soco si badbaado leh.



### Calaamadaha ka Gudubka Waddada

Calaamadaha isgoysku waxay uga digayaan darawallada in ay iska eegaan xoolaha, dadka, iyo baabuur goynaysa waddada.



### Waddo Siisiibasho ah

Oogada jidku marka ay qoyan tahay waa siisiibasho. Calaamadani waxay inta badan ku taalaan meel u dhow buundooyinka iyo meelaha waddooyinka korka waddo kale mara.



### Daadeg

Waddada kaa horraysa ayaa si aad ah hoos ugu daacaysaa. Hubi in bareegyada gaarigaagu si fiican u shaqaynayaan kahor intaadan sii socon.



**Haadku wuu dhamaanayaa**

Laba haad ayaa hal haad noqon doona. Tusaalahan, baabuurta ku jirta haadka midig waa inay ku biiraan baabuurka ku jirta haadka bidix. Baabuurta haadka midig waa inay jidka siiyaan.



**Gaadiidka Waddada soo Galaya**

Gawaaridu waxay ku soo darsami doonaan haadka aad ku socoto. Isi diyaari in aad u ogo laato gawaarida kale in ay haadka ku soo biiraan.



**Haad lagu soo daray**

Waddada waxaa ku soo darmi doona haad dheeri ah oo gawaaridu marto. Gaadiidka cusub uma baahna in ay haadka soo galaan



**Buundo Gaaban ayaa kaa Hooraysa**

Ha ku sii soconin haddii gaarigaagu ka dheer yahay dhererka lagu tilmaamay calaamada, ama waxa laga yaabaa in gaarigaagu ku xannibmo.



**Buundada Ciriiri ah/dhuuban**

Buundada kaa horraysa ayaa ka cidhiidhisin jidka.

## Calaamadaha Dhismaha

Calaamadaha liimiga ah ee xarfaha farta madow ayaa loo adeegsadaa aagga dhismaha iyo aagagga shaqada. Tartiib u wad gaariga markaad aragto calaamad liimi/oranji ah. Calaamadahani waxay uga digayaan darawallada waddooyinka ka xaniban gaadiidka, leexinta iyo khataraha kale ee shaqada waddooyinka.



Haamaha, dhululubooyinka, tuubyada, fallaadhaha biligleynaya, iyo xayndaabyada liimiga iyo caddaanka ah ayaa dhammaantood loo isticmaalaa in gaadiidka laga ilaaliyo goobta dhismaha ama meelaha ay khatarta ku tahay in

baabuur lagu wado. Waxa kale oo laga yaabaa inaad aragto dad wata calamadaha liimiga ah, astaamaha ama calaamadaha joogsiga, iyagoo bixinaya tilmaamo goobaha shaqada. Had iyo jeer raac tilmaamahooda.



Waxay tilmaamaysaa in qof calan haya uu kaa horeeyo. Si taxadar leh u wad.



Waxay muujineysaa in shaqaale ay dayactir ku sameynayaan waddada. Yaree xawaaraha oo u beddelo haadka ka fog shaqaalaha.



Xawaaraha la dhimay ayaa badanaa lagu dhejiyaa aagagga shaqadu ka socoto. Wadayaasha ku xadgudba xadka xawaaraha lagu dhajiyay aagagga shaqada marka ay shaqaaluhu joogaan ayaa waxa lagu soo dallici doonaa ganaax dhan \$300.

## Calaamadaha goobaha Taariikhiga ah, Dhaqanka, iyo Madadaalada

Calaamadaha bunniga ah waxay tilmaamayaan goobaha taariikhiga ah, jardiinooyinka, iyo meelaha kale ee xiisaha leh.



### **Calaamadaha Adeegyada Dadka Baabuurta Wata**

Calaamadaha buluuga ah ayaa kuu tilmaamaya adeegyada sida telefoonada, gaaska, cuntada, mootellada, isbitaallada, iyo meelaha nasashada.



### **Calaamadaha Hagitaanka iyo Macluumaadka**

Calaamadaha cagaarka ah waxay muujinayaan meelaha laga baxo, fogaanta loo jiro magaalooyinka, meelaha loogu kala gudbo waddooyinka waaweyn ee gobolka, magacyada waddooyinka ama jidadka, iyo jidadka baaskiilka.



### **Calaamadaha Jidadka**

Calaamadaha jidadku waxay muujinayaan noocyada kala duwan ee waddooyinka.



Waddada Weynee isku xirta Gobollada



Waddo Weyn U.S.



Waddo Weyn oo Minnesota



Waddada Degmo



Waddada Degmo

### **Tilmaamaha Maamulidda Gaadiidka**

Calaamadaha maamulka waddada waxaa loo adeegsadaa isgoysyada saxmada gaariyaashu ku badan tahay. Digniinuho waxay kor u qaadaan badqabka iyo nidaamka isku socodka waddada. Haddii aanu nalka wadadu shaqaynayn, ula dhaqan isgoyska sidii aad ula dhaqmi lahayd isgoys aan lahayn kala xakamayn.

### **Isgoys Leh Wado Afar jiho kala aada.**

Darawalku waa inuusan gelin isgoys ay maamusho calaamada taraafiga aan ka ahayn marka uu darawalku awoodo inuu gaariga dhaqaajiyi isla markaaba,

**Calaamadaha, Tilmaamaha, iyo Calaamaha Laamiga**

asagoo istaagayn, uuna si buuxda uga bixi karo isgoyska isaga oo aan xanibin ama xirin socodka gaadiika gudbaya.

Tani ma qusayso dhaqdhaqaaq gaariga marka:

- uu hagayo sarkaalka maamulka waddada ama ciidanka nabadgalyada,
- uu u soconayo si uu meel uu maro u siiyo gaariga gurmadka degdega ah oo aqoonsi leh kaas oo nalalka digniintu u shidan yihiin; ama
- uu samaynaayo leexasho u sahlaya gaariga inuu si badqab leh uga baxo isgoyska.

**Calaamadaha, Tilmaamaha, iyo Calaamaha Laamiga**



**Nalka midabka cas ee taagan waxaa laga wadaa "joogso."**


Joogso oo sug inta uu nalku isbadalayo. Si buuxda u joogso khadka joogsiga, kahor intaadan gaarin meesha dadku jidka ka goynayaan, ama kahor intaadan gelin isgoyska.

Kadib marka aad joogsato, waxaad u leexan kartaa midig marka isgoysku faaruq noqdo, haddii gaariyaasha loo ogol yahay inay dhankaas u socdaan. Haddii ay ku dhagan tahay isgoyska calaamada "No Turn on Red" ("Lama leexan karo Ayadoo Nalka Cas shidan yahay"), waa inaad sugto inta nalku cagaar ka noqonaayo. Haddii shuruudaha qaarkood la buuxsho, waxaad samayn kartaa leexashada waddada halka wado ah adoo u leexanaaya waddada halka jiho aada ee isgoyska ayadoo nalka cas ee taraafigu shidan yahay. Kahor intaadan leexan, waa qasab inaad marka hore si buuxda u istaagto, aad hubiso in isgoysku bannaan yahay, aadna fursad siiso wixii dad ama gaariyaal kale ah ee maraya meesha. Gaadiidka waa in loo fasaxay inuu u socdo keliya dhanka jihada aad u leexanayso.



**Falaar cas macneheedu waa "joogso."**

Waa inaad si buuxda ugu istaagtaa xariiqda joogsiga, kahor inta aadan soo gelin meesha dadku jidka ka goynayaan, ama kahor inta aadan gelin isgoyska. Marka falaartu noqoto midab cagaar, waad kusii socon kartaa jihada lagu tilmaamo.




U qaado nalka cas ee fareejaynaaya sida calaamada ku amraysa joogsiga. Si buuxda u istaag, jidka sii gaariyaasha iyo dadka jidka maraya ee soo gaaray isgoyska adiga hortaa, oo soco marka isgoysku banaanaado.



### **Nalka jaallaha ah ee taagan ama falaarta ayaa ka dhigan "digniin" Calaamada ayaa noqonaysa casaan.**

Ha gelin isgoyska haddii aadan si badqab leh u istaagi karin kahor intaadan gelin. Haddii aadan u istaagi karin si badqab leh, kusii soco isgoyska adoo feejigan. Haddii aad taagan tahay isgoyska si aad u leexato, calaamaduna ka soo wareegto jaalle oo noqoto noqoto casaan, leexo sida ugu dhakhsaha badan ee ay si badqab ah macquul u tahay. Dib gadaal ha ugu bixin.





### Nalka jaallaha ah ee biligleynaya ama falaarta biligleynaysa macnaheedu waa "taxadar."

Kusii soco isgoyska si taxadar leh. Sii meel ay maraan gaariyaasha iyo dadka lugaynaya ee horay ugu jiray isgoyska. Gaadiidka u leexanaaya bidix ama kala wareega U ku aadaaya bidix waa inay marin siiyaan gaariyaasha kale ee ka imaanaaya dhanka jihada ay u socdaan ee haddii kale keeni kara khatar isku dhac.

### Nalka cagaaran.

Waxaad bilaabi kartaa inaad ka gudubto isgoyska isla marka uu banaanaado. Waddada sii gaariyaal kasta ama dadka lugaynaya oo isgoyska ku jira.. Markaad bidix u leexanaysa, boos sii gaariyaasha wajahadaada ka imaanaaya. Markaad u leexanaysa bidix ama midig, boos sii dadka lugaynaya ee jidka ka goynaaya horta gaarigaaga.

### Falaarta cagaaran waxaa laga wadaa inaad si badqab leh ugu leexan karto jihada ay falaartu tilmaamayso.

Leexashadaada waa "laga difaacayaa" gaariyaasha wajahadaada ka imaanaaya ama dadka jidka goynaaya.

### Tilmaanta Dadka Lugaynaya

Waxaa jira calaamadaha soco iyo istaag ee loogu talagalay dadka lugaynaya. Dadka lugaynaya waa qasab inay raacaan calaamadahan.

Marka calaamada dadka lugaynaya ama "Socodka" soo muuqato, dadka lugaynaya waa inay fiirshaan si ay u arkaan inay badqab leedahay inay gooyaan isgoyska kahor intaysan sii socon. Markay soo galaan isgoyska, dadka lugaynayaa ayaa sii wadan kara lugtooda si ay ugu gudbaan dhanka kale ee waddada.

Marka calaamada gacanta taagan ama "Ha Socon" ay fareejo bixinaysa, dadka lugaynaya waa inaysan bilaabin inay ka gudbaan isgoyska. Dadka lugaynaya ee markii horaba ku jiray isgoyska ayaa sii wadan kara inay usii gudbaan dhanka kale ee waddada si tallaabo caadi ah.

Marka calaamada gacanta taagan ama "Ha Socon" ay so baxdo, dadka lugaynaya waa inaysan isku dayin inay ka gudbaan isgoyska. Dadka lugeynaya ee markii horaba ku jiray isgoyska waa in ay u socdaan meesha ugu dhow ee ammaan ah sida ugu dhakhsaha badan iyo sida ugu ammaansan ee suurtoalka ah.

## Calaamadaha Xakamaynta Adeegsiga Haadka

Calaamadahaan waxay u sahlayaan inay laymanka isticmaalaan gaadiidka ka imaanaaya jihooyinka kaladuwan xiliyo kaladuwan. Darawalladu waa inay sidoo kale raacaan dhammaan calaamadaha iyo tilmaamaha kale ee waddada ee khuseeya.



Falaarta taagan ee dhanka hoose u jeeda ee cagaaran ayaa ka dhigan in lagu ogol yahay inaad ku socoto laynka kahooseeya falaarta cagaaran.



Calaamada X ee jaallaha ah ee taagan waxaa laga wadaa inaad u baahan tahay inaad u diyaar garoowdo u leexashada layn kale si amaan ah. Maamulidda badalka haadka ayaa lagu samaynayaa haadka ka hooseeya calaamada jaallaha ah ee X. Nalka Cas ee taagan ee calaamada X ayaa ku xigi doona, kuna mana socon kartid haadka markaas.



Nalka biligleynaya ee jaallaha ah ee calaamada X ayaa ka dhigan inaad adeegsan karto haadka ka hooseeya calaamada fareejada jaallaha ah ee X si aad bidix ugu leexato. Waa inaad feejignaataa waayo gaariyaasha u leexanaaya bidix ee ka imaanaaya dhanka kale ee waddada ayaa laga yaabaa inay adeegsadaan isla laynka aad ku socoto.



Calaamada falaarta ee jaallaha ah ee hoos u jeeda waxaa laga wadaa inaad u baahan tahay inaad u diyaar garoowdo u leexashada layn kale si amaan ah. Laynka waddada wayn ee ka hooseeya falaarta jaallaha ah ee hoos u jeeda ayaa la xiri doonaa.



Falaarta biligleynaya jaallaha ah bixinaysa ee hoos u jeeda waxaa laga wadaa inaad adeegsan karto laynka waddada wayn ee ka hooseeya falaarta fareejada jaallaha ah ee hoos u jeeda. Feejignaan ku mar haadkan.



Calaamada X ee casaanka ah ee taagan waxaa laga wadaa waa inaad gaari ku wadin hoosta calaamada cas ee X.

## Nalka ku Yaalla Meesha Jidweynaha

Nalka ku yaalla meesha waddada weyn laga galo waa nalal ku yaalla afka meesha laga galo waddada wayn kuwaas oo gacan ka gaysta xakamaynta socodka gaadiidka waddada soo galaya. Si lamid ah calamaadaha taraafiga ee ku yaalla isgoosyada, nalalka cas, jaallaha, iyo cagaarka ah ayaa muujinaya marka darawaladu ay sii socon karaan. Keliya hal gaari ayaa sii socon kara markasta oo nal cagaar ah shidmo.



### Hal Gaari Nalkii kasta oo Gagaaran

Waxaa lala adeegsadaa nalka ku yaalla halka laga soo galo waddada wayn si loo muujiyo in hal gaari uu socon karo mar kasta oo nal cagaaran shidmo.

## Calaamadaha Laamiga

Calaamadaha laamiga waxay hagaan ayna maamulaan gaariyaasha.

### Laymanka cadcad

Laymanka cadcad ayaa kala qaybsaha laymanka gaariyaasha u safraaya isku jihada.

- Layn ka kooban xariiqo cadcad oo kala go'an ayaa muujinaya in darawaladu ay badali karana laynka markay marayaan meelaha calaamadaha noocan ah ku yaalaan.
- Layn leh xariiqo cadcad ee gaagaaban oo balaaran ayaa muujinaya in haadku uu dhammaanayo.
- Laynka cad ee xiriirsan ayaa muujinaya in beddelashada haadka aan la dhiirigelinaynin meelaha calaamada noocan ah ku taalo. Laymanka aan kala go'nayn ee cadcad ayaa sidoo kale muujinaya meelaha dadku jidka ka goyaan, laymanka isgoysyada, baraha baakinka, iyo cirifyada waddada.
- Laymanka xariijimaha laba cadcad ah ayaa muujinaya in bedelashada haadku ay mamnuuc ka tahay Meelaha calaamada noocan ah ay ku taalo.
- Laynka xariijinta cad ee xirrisan ee leh astaanta baaskiilka oo ku taalla geeska waddada ayaa muujinaysa in aagga loo asteeyay keliya isku socodka baaskiilka keliya. Baaskiiladu waa inay ku safraan isla jihada ay ku socdaan gaadiidka dhinacdooda maryaa.

### Laymanka jaallaha ah


Laymanka jaallaha ah ayaa kala qaybiya gaadiidka u kala gooshaaya jihoooyinka iskasoo horjeeda.

- Laynka xariijimaha jaallaha ah ee xiriirsan ayaa muujinaya in baasidu ay mamnuuc tahay aagaga calaamadani ku taalo. Baasida marka la maraayo aagaga aan baasid la samayn karin ayaa sharci daro ah.
- Haadka leh xariijimo jaalle ah ayaa muujinaya in baasida la ogolyahay meelaha calaamada noocan ah ku taalo.
- Laynka xariijimaha jaallaha ah ee xiriirsan ayaa ka muuqan karta hal dhinac oo waddada kamid ah,
- halka laynka xariijimaha ka kooban xariiqo kala go'go'an uu ka muuqan karo dhinaca kale. Darawalladu waa inay raacaan calaamada ku taala haadka ay ku socdaan.
- Labo layn oo jaalle ah oo xiriirsan, oo midkoodba ku yaalo layn kasta oo waddada, ayaa muujinaya in baasidu ay mamnuuc ka tahay labada jihoba. Darawallada u socdaalaaya labada jihoba waa ka mamnuuc inay dhaafaan laynka labada xariijin ee adag bartamaha ku leh si ay u dhaafaan gaari kale.


### **Calaamadaha Haadadka**

Calaamadaha waddada ayaa loo adeegsan karaa in lagu kala qaybiyo haadadka loo gaar yeelay shaqooyinka gaarka ah ama noocyada gaariyaal gaar ah.


**Buug Gacmeedka Darawalka Minnesota**




Wado labo haad leh oo gaariyaashu u socdaal labada jihaba. Gaariyaasha waxaa u dhexeeya layman jaallee ah oo kala go'go'an, waxay muujinayaan in gawaarida labada dhinacba loo ogolyahay in ay baasaan.




Wado labo haad leh oo gaariyaashu u socdaal labada jihaba. Gaadiidka ku socda waddada haadka leh xariiqda jaalaha ah ee adag (kala go'nayn) waa mamnuuc in uu gaari kale dhaafto.



Wado labo haad leh oo gaariyaashu u socdaal labada jihaba. Gaadiidka labada haadba waa mamnuuc in ay gaari kale dhaafaan.



Wado leh afar haad, oo ay laba haad ku yaalaan jiho kasta ayna kala qaybiyaan labo xariijimood oo aay kala go'nayn oo jaalle ah. Ha ka gudbid xariijimaha aan kala go'nayn ee jaallaha ah si aad gaari kale u dhaafto.



Waddo leh haadad badan gaariyaashuna u socdaan labada dhanba uuna kala qaybiyo gidaar hoose oo adag. Ma jiraan qoolado ka banaan garbaha geesaha gudaha waddada.


### Haadadka Leexashada

Haadadka leexashada ee u dhow kala goysyadu waxay kala qaybiyaan gaadiidka u leexanaaya bidix - ama midig - ee kasoo leexanaaya jidka oo dhan. Falaar cad, taasoo uu la socon karo erayga "only" ("keliya") ayaa muujinaysa in darawalada ay qasab ku talay inay ku sugnaadaan isla haadka loo cayimay marka ay ku leexanayaan waddada kale. Haddii gaarigaagu ku socdo haadkan, waa inaad leexataa.

Qaar kamid ah haadadka leexashada ayaa leh falaaro badan, taasoo kuu sahlaysa inaad u leexato bidix ama midig, ama aad toos u socoto. Si looga celiyo darawallada bedelashada haadadka markay u dhow yihiin isgoys, haadadka leexashada ayaa laga fogeeyaa dhammaan haadadka waddada waxaana kala qaybiya laymanka cadcad.

### Haadadka leexashada ee Bartamaha

Haadka bartamaha oo u dhexeeya haadad gaadiidka u safraya jihooyin iskasoo horjeeda ayaa loo cayimi karaa keliya leexashooyinka dhanka bidix. Haadka noocan ah waxaa lagu asteeyaa laymanka isbarbar socda oo aan kala go'naynoo leh xariiqyo jaalle ah. Laymankan waxaa mararka qaar la socda falaaro cadcad oo ku qoran laamiga. Gaariyaasha u socdaalaaya midkood labada jihoba ayaa adeegsan kara in haadkan si ay sameeyaan leexashooyinka dhanka midigta oo u leexanaaya wado kale ama marin xaafadeed.



*Wado leh sadex haad gaariyaashuna ay u socdaan labada jihaba. Haadka dhexe ee laga leexo ayaa waxaa loo gaar yeelay gaariyaasha u leexanaaya dhanka bidix ee ka imaanaya labada jihaba.*

### Haadadka Labada Jihaba loo Qaadan karo

Haadadka labada jihoba loo qaadan karo ayaa gacan ka gaysta isku socodka waddada xiliyada saxmada badan jirto. Waxaa kala qaybiya xariijimaha layman jaalle laba isula socda ah Waxaad ka gudbi kartaa laymankan keliya haddii calaamada kore ee ka koraysa haadka aad doonayso inaad gasho ay leedahay falaar cagaaran, ama haddii calaamad ay kuu fasaxayso inaad sidaan samayso.

### Laymanka Rakaabka Badan

Haadadka Rakaabka badan waxaa loo cayimay gaariyaasha qaada rakaab dhan labo qof ama ka badan. Waxaa lagu asteeyaa calaamada dheemanka ama calaamada “Carpool Only” (“Gaariyaasha Rakaabka keliya”). Badanaa waxay ku yaalaan dhanka bidix ee fog ee waddada weyn waxaana looga soocaa haadadka kale ee baabuurta iyadoo leh layman la isku daray oo cad ama jaalle ah.

### Calaamadaha Digniinta ah

Fariimaha laamiga ayaa loo adeegsan karaa in looga digo darawallada xaaladaha qaarkood, sida “School Zone Ahead.” (“Aaga Dugsiga ayaa Kaa Horeeya.”)

### Saraakiisha Nabadgalyada Wadooyinka

Saraakiisha sharci fulinta iyo shaqsiyaadka kale ayaa kala haga wadooyinka mararka qaarkood. Marka booliis uu joogo, raac tilmaamo kasta oo gacanta uu kaa siiyo halkii aad raaci lahayd calaamadaha waddada, astaamaha, ama calaamadaha laamiga.

Inta badan ciidanka nabad galyada waddada ayaa u tilmaama darawallada inay istaagaan ayagoo kor u qaadaaya hal gacan calaacashuna u jeedo dhanka gaariga firinbi dheerna u yeerinaaya. Saraakiisha ayaa u tilmaama darawallada inay bilaabaan ama sii wadaan socodka ayagoo gacanta uga tilmaamaaya firinbi gaabana u yeerinaaya. Saraakiisha ayaa tilmaanta ku bixin kara toosh marka nalku daciif yahay.



# Cutubka 6 Shuruudaha Gaari Wadista

*Cutubkaan wuxuu bixinayaa tusmo la xariirta sida qaab badqab leh loo wado gaari xaaladaha kaladuwan.*

## Adeegsiga Nidaamka SIPDE

Ma jiro wax aad samayn karto oo u damaanad qaadaaya in dadka kale ku arkaan. Indhaha keliya ee aad si dhab ah iskugu halayn karto waa kuwaaga. Darawallada waayo araga ah ayaa u bartay in ay la socdaan waxyaabaha hareerahooda ka jira. Waxay abuuri karaan xeeladooda gaarka ah ee darawalnimada ayagoo adeegsanaya nidaam loo yaqaano SIPDE.

SIPDE waa nidaam 5 talaabo ah oo loo adeegsado in go'aan ku haboon lagu gaaro laguna dabaqo si sax ah xaaladaha kala duwan ee wadooyinka ka jira.

- Qiimee (Scan) • Aqoonso (Identify) • Saadaali (Predict) • Go'aanso (Decide)
- Fuli (Execute)

*Aan sharaxno mid kasta oo kamid ah talaabooyinkan.*

### Qiimee (Scan)

Si adag u fiiri/wax ka sii eg xagga kaa horreeya, geesaha iyo gadaasha si aad uga fogaato khataraha imaan kara xataa kahor intaysan soo bixin. Hadba sii fiirinta aad samayso inta ay adagtahay, iyo mudada waqtiga iyo badka aad haysato, ayaa meesha ka saari karta ama yarayn kara saamaynta burburka. Diirada saar helitaanka marinnada aad ku baxsan karto ee ku yaala isgoysyada, aagaga dukaamaysiga, iskuullada iyo aagaga ganacsiga. Raadi:

- Gaariyaasha kugu soo socda ee ka leexan kara hortaada.
- Gaariyaasha kaaga imaanaaya dhanka bidix iyo midig; ayna ku jiraan baaskiilada iyo dadka lugaynaya.
- Gaadiidka gadaal kaaga soo socda.
- Xaaladaha waddooyinka khatarta ah.

### Aqoonso (Identify)

Ogoow khataraha iyo iskudhaca imaan kara.

- Gaariyaasha, mootooyinka, baaskiilada, dadka lugaynaya ama baabuurta kale ayaa soo geli kara waddadaada oo kordhin kara suuragalnimada shilka.
- Carruurta iyo xayawaannada aan qof wayn la joogin ayaa samayn kara fal lama filaan ah waxayna sameeyaan dhaqdhaqaaqyo gaaban, oo degdeg ah.
- Waxyaabaha meel ku dhagan, godadka, kurtunnada difaaca ah, buundooyinka, calaamadaha waddada, cirifyada, ama geedaha ayaan ku soo dhaqaaqaynin waddadaada, laakiin waxay saamayn ku yeelan karaan xeeladaada gaari wadista.

### Qiyaas (Predict)

Ka fakar xawaaraha, badka, iyo jihada khataraha si aad u qiyaasto sida ay kuu saamayn karaan. Gaariyaasha kusoo socda jidkaaga ayaa ka khatar badan kuwa ku hor socda ama taagan.

### **Go'aanso (Decide)**

Adiga oo ku salaynaya qiyaastaada, go'aanso waxa aad samayn lahayd haddii xaaladu degdeg isku badasho. Waa inaad si joogto ah go'aano u qaadanayso si aad ula qabsato xaaladaha waddada ee sida joogtada ah isu badalaaya.

### **Fuli (Execute)**

Fuli go'aankaaga. Si aad u abuurto boos aadna u yarayso khatarta:

- Ku muuji inaad meesha soo gashay nalal iyo/ama hoon.
- Wax ka badal xawaarahaaga sida ku haboon.
- Wax ka badal meesha aad marayso iyo/ama jihadaada.

## **Shuruudaha Gaari Wadista Xeerka Sadexda Ilbiriqsi**

Adeegsiga "Xeerka Sadexda Ilbiriqsi" waa qaab kaa caawinaaya inaad in amaan ah gaarigaaga u jirsiiso gaariga kaa horeeya. Xeerkaan wuxuu goynayaa badka ay isku jirsanayaan gaariyaasha ku socda wado jawigeedu caadi yahay.

Ka dooro meel aad tixraacayso geeska waddada kaa horaysa, sida tiirka taleefannada, boorka calaamada, geed, ama buundo.

Marka gaariga kaa horeeya uu dhaaf barta tixraaca, biloow inaad tiriso: "Kun-iyo-kow, kun-iyo-labo, kun-iyo-sadex." Haddii aad ka gudubto meesha aad tixraacayso adoon tirsiga dhamayn, aad ayaad ugu dhowdahay gaariga kaa horeeya.

Si tartiib ah u yaree xawaaraha ilaa aad ka gaarto badka daba socoshada gaariga kaa horeeya ee badqab leh. Marka xaaladaha wadadu liitaan, ama haddii aad wado gaari ka dheer jooga caadiga ah, kordhi badka aad u jirto gaariga kaa horeeya kana dhig tirsiga afar ama shan sakin.

Haddii gaariga kaa danbeeya kuu daba socdo si dhow yaree xawaaraha xoogaa, una ogolow inuu ku dhaaf.

## **Shuruudaha Gaari Wadista Fogaanta Masaafada Joogsiga**

Masaafada aad u baahan tahay si aad u joojiso gaarigaaga ayaa go'aamin kara fogaanta badqabka leh aad u jirsanayso gaariga kaa horeeya, laakiin badka rasmiga ah ee aad ku joogsan karto ayaa ku xirnaan doonta arimo badan, ayna ku jiraan:

- Wakhtiga ay ku qaadanayso darawalku in uu arko oo ogaado in ay jirto khatar soo socota.
- Muddada wakhtiga laga bilaabo aragtida khatarta ilaa isticmaalka bareega ayaa waxay dhacdaa 3/4 ilbiriqsi gudahood.
- Xaaladaha cimilada.
- Xaaladaha dunta taayiradaada.
- Nooca iyo xaalada bareegyadaada.

### **Gaari wadista Habaynkii**

Inkastoo gaariyaasha habeenkii socda ay yar yihiin, ku dhawaad nus kamid ah iskudhacyada wadooyinka ee loo dhinto ee ka dhaca Minnesota ayaa dhaca habeenkii. Si gacan looga gaysto inaad gaarto meeshaad u socoto si badqab leh, akhri qariiradaha waddada iyo jihoooyinka kahor intaadan

safarka bilaabin. Xaqiiji in nalalka gaarigaaga ay shaqaynayaan muraayadaada horena ay nadiif tahay aysana lahayn dildilaac.

## **Nalalka Hore**

Markaad u jirto wax ka yar 1,000 talaabo gaari kugusoo socda, ama ad dabo joogto gaari kale adoo u jira bad dhan 200 oo talaabo ama kayar, nalalka hore waa in iftoonkoodu yaraado. Nalalkaaga hore waa in la shidaa marka qoraxdu dhacdo lana isticmaalaa ilaa qoraxdu soo baxdo Waa in sidoo kale la isticmaalaa inta lagu jiro cimilooyinka ay ku jiraan roobka, barafka, cimilado mugdi ah, cir cadaaga, ama caadka iyo xili kasta oo aadan si faseex ah u arkay waddada kaa horaysa ugu yaraan 500 oo fiid.

Ha kordhin "iftiinka" nalalkaaga hore. Waa qasab inaad awoodo inaad gaariga ku joojiso isla badka ay nalalkaaga hore ka gaaraan jidka kaa horeeya. Gaariyaasha badankooda, badkan ayaan ka badnayn 350 fiid marka nalka buuxa u daaranahay.

Markaad gaariga ku wado meel mugdi ah, waxaad waajihi kartaa caad kaaga imaanaaya nalalka hore ee gaariyaasha kugusoo socda ama iftiinka nalalka hore ee qabanaya muraayad haadkaaga. Haddii caadka iftiinku kaa qariyo aragtida, adeegso xariijinta laynka cad ee geeska waddada si aad u tixraacdo. Markuu jiro iftiin ku cawaraya oo uu keenay nalalka hore ee gaariga kaa danbeeya, adeegso "muraayada maalin-habeenka" ama hagaaji/leexi muraayadaada caadiga ah.

## **Gaari ku wadista Waddada Wayn**


Wadooyinka waawayn waxay leeyihiin haadad badan, kala qaybsan oo ay yar tahay in wadooyin kale docda kasoo galaan. Sabab la xariirta inaysan jirin meela la istaago ama gaariyaal kaa soo horjeeda, waxay ku siinayaan inaad socoto masaafu dheer adiga oo aan istaagin.

## **Soo gelida Waddada wayn**

Rakooyinka lagasoo galo ayaa ah kuwo gaaban, oo hal jiho u socda kuwaas oo kugu daraya waddada wayn. Dhammaan dhamaadka inta badan wadooyinka laga soo galo waddada, waxaad ka helaysaa haadka xawaaraynta oo kuu sahlaya inaad kordhiso xawaarahaaga si aad qaab badqab leh ula jaanqaado gaariyaasha awal ku socday waddada.

Si looga fogaado carqaladaynta isku socodka gaadiidka ama "horgoynta" darawallada kale markaad soo gasho, iskuday inaad badasho xawaarahaaga si aadan u carqaladayn gaariyaasha horay ugu socday jidka wayn. Waa inaad boos siisaa gaariyaasha kale markaad soo galayso waddada.

Adeegso fareejada leexashada si aad ugu sheegto darawallada kale waxa aad doonayso. Fiiro meel ka furan haadka waddada ee kuugu xiga kadibna ku bax si aad u raacdo gaadiidka waddada marka aad awoodo.



Haku istaagin rakada ama haadka xawaaraynta ilaa inay gabi ahaanba qasab tahay maahee.

Markuusan jirin haad loogu talagalay in xawaaraha waddada lagula qabsado, oo ay calaamada “Yield” "Jidka Sii" ay ku dhejisantahay halka laga galo waddada, u hogaansan calaamada. Joogso, haddii ay qasab tahay. Xoog haku gelin haadka waddada.

## **Nalka ku Yaalla Meesha Jidweynaha**

Nalka ku yaalla meesha jidweynaha laga galo ayaa waxay ku yaallaan meelo badan oo wadooyinka waaweyn ee magaalada weyn ah si loo yareeyo ciriiriga taraafikada, shilalka, iyo si ay u fududayso sgelitaanka jidka weyn.

Cabiradu waa calaamado wadooyin, oo la dhigo bartamaha jid halka laga soo galo, kuwaasoo badanaa la hawl geliyo saacadaha gaadiidku badanyahay. Nalalka cas, jaallaha, iyo cagaarka ah ayaa muujinaya marka darawaliintu ay sii socon karaan. Waa sharci daro inaad socoto ayadoo nalka cas shidan yahay. Keliya hal gaari ayaa sii socon kara markasta oo nal cagaar ah shidmo.

## **Xawaaraha Waddada Weyn iyo Isticmaalka Haadka**

Sii joogtee xawaare lamid ah kan gaariyaasha ku agmaraya, markay suuragal tahay, laakiin marna ha dhaafin xadkas xawaaraha la cayimay. Haddii aad ku socoto xawaare hooseeya kaasoo ka yar kan gaariyaasha kale, ku soco haadka ugu dhow dhanka midig ee waddada. Haddii ay qasab noqoto inaad badasho haadka si aad u baasto gaariyaasha kale ama aad uga baxdo jidka wayn, fareejo ku muuji inaad sidaas doonayso oo xaqiiji in jidkaagu banaan yahay kahor intaadan baasid samayn.

## **Adeegsiga Cirifyada la istaago Jidka wayn ama Waddada Furan ee Basaska.**

Basaska rakaabka iyo Isku socodka Bulshada ayaa loo ogol yahay inay adeegsadaan dhinacyada waddada wayn ama waddada furan. Basaska aqoonsi u haysta inay adeegsadaan garabka waddada ayaa adeegsan kara keliya marka xawaaraha laynka guud ee waddada uu ka yar yahay 35 mayl saacadiiba. Darawallada basaska ku shaqayn kara garabka waddada ma dhaafi karaan xawaaraha guud ee waddada in ka badan 15 mayl saacadii marnana ma dhaafi karaan xawaaraha 35 mayl saacadii. Darawallada basaska ku shaqaynaaya garabka waddada waa inay boos siiyaan gaariyaasha kusoo leexanaaya, soo galaaya, iyo kuwa horay ugu socday jidka waana inay boos u baneeyaan gaariyaasha kale ee garabka soo galaaya.

## **Calaamadaha Fariinta**

Calaamadaha fariinta iyo adeegsiga haadka ee ku yaala wadooyinka waawayn qaarkood ayaa uga digaya darawallada gaariyada isku dhacay, gaariyaal socon waayay, ama xaaladaha kale ee wadooyinka ee ka horeeya.

Calaamadaha digniinta ayaa laga shaqaysiin karaa marka gobalku soo saaro digniinta AMBER (America's Missing: Broadcast Emergency Response) (Dadka La Waayey ee Maraykanka ah: Faafinta Gurmada Xaalada degdega ah) si looga falcelyo afduub loo gaystay ilmo yar. Calaamadu waxay bixin doontaa xog, sida qeexitaanka nooca gaariga. Darawalada arka baabuur ku habboon qeexitaanka, ama haya macluumaad kale oo ku saabsan ilmaha maqan, waxaa la weydiisan doonaa inay soo ogaysiiyaan sharci fulinta.




## **Haadadka Gaariyaasha Rakaabka Badan**

Haadadkan waxaa adeegsan kara keliya mootooyinka, basaska, iyo gaariyaasha ay saaranyihiin dad dhan labo qof ama ka badan.


## **Iskuxirka Waddada wayn**

Isku xirku waa meesha ay iska galaan waddada wayn iyo jid yar ama wado kale oo wayn lehna wadooyin laga soo galo oo badan. Wadooyinka iskuxirka ah ayaa kuu sahlaaya inaad ka baxdo hal waddo oo aad gasho waddo kale si badqab leh, adiga oo aan carqaladayn isku socodka gaadiidka.

Shuruudaha Gaari Wadista



Waddo Dheeman Jihooyin u kala Socota  
(Diverging Diamond Interchange (DDI))



## **Waddo Dheeman Jihooyin u kala Socota (Diverging Diamond Interchange)**

Waddo Dheeman Jihooyin u kala socota waa marka jidadka taraafikada ay ka kala gudbaan cidhif kasta oo buundada ah si loo baabi'yo leexashada dhanka gacanta bidix ee gudbaysa gaadiidka ka soo horjeeda. Mamnuucida Leexashada Dhammaadka Buundada Shuruudaha Gaari Wadista Layn xirayaashaan ayaa kor u qaadaaya badqabka waddada iyo isku socodka waxayna yareeyaan dib u dhacyada gaariyaasha ilaa 60 boqolkiiba.

Faa'iidooyinka badqabka ee joojinta leexashada dhamaadka buundada waxaa kamid ah:

- Meelaha isku dhaca oo yaraada.
- Meelaha gaariyaashu isku dhici karaan ayaa ku kala firdhisan aaga jidka
- Fogaanta wax aragga oo fiican marka la leexanayo.
- Inaad si khaldan u gasho jid doceedka ayaa aad u adag.
- Meelaha dadka lugaynaya ay waddada ka goynayaan ayaa gaaban.

## **Adeegsiga Waddo Dheeman Jihooyin u kala Socota (Diverging Diamond Interchange)**

Isgoysyada waddada ayaa ku yaala midkood labada cirif ee buundada, si halkii qofku leexasho dheer oo bidix ah u samayn lahaa, darawalladu waxay boos ka qaadayaan dhanka bidix. Dadka lugaynaya ayaa ku gudbaaya baraha buundada waxayna ku soconayaan baraha inta u dhexaysa haadadka leh janbiyo ka difaacaaya gaariyaasha labada dhan ka xiga.

## **Joogsiga, Baakinka, iyo Reefis u bixida**

Waa sharci daro inaad ku joojiso ama gaari dhigato meesha laga galo waddada wayn u kala gudubta gobollada, marka laga reebo inay xaalad

degdeg ah dhacday. In shidaalku kaa dhamaado looma arkaayo xaalad degdeg ah.

Haddii ay arintaani kugu dhacdo, waxaa lagu siin karaa amarganaax.

Haddii ay qasab noqoto inaad jid waynaha istaagto sabab la xariirta xaalad degdeg ah, qaad talaabooyinka soo socda:

- Ku baakin gaarigaaga garabka waddada, meel ka fog waddada wayn inta macquulka ah.
- Fur dabada danbe ee gaariga kadibna taag daboolka ama ku xir maro cad anteenada raadiyaha ama gacanta albaabka.
- Adeegso nalalka digniinta khatarta, haddii uu gaarigaagu leeyahay.
- Haddii aad haysato fareejooyin ama qalabka iftiima ee meesha fog looga jeedo, dhig meel kuu jirta 100 ilaa 500 oo talaabo gadaasha gaarigaaga geeska midig ee waddada wayn.
- La joog gaarigaaga, hadday macquul tahay. Hadday qasab noqoto inaad ka tagto gaarigaaga, haku socon aaga waddada ee gaariyaashu marayaan. Tani waa sharci daro aad ayayna khatar u tahay.

Waa sharci darro in aad gadaal u baxdo iyo in aad dib u jirayso waddada weyn Shardi ka dhaafka sharcigan ayaa qabanaaya darawallada gaariyaasha gurmadka degdega ah iyo gaariyaasha wadooyinka dayac tiraaya. Darawallada gaariyaashaan ayaa reefis u bixi kara ama ku kala jirayn kara, haddii loo baahdo, si ay u fuliyaan shaqadooda.

## **Gaariyaasha Xaalada Degdega ah ee ku socda Jidka wayn**

Marka aad aragto nalalka biliqlaha ah ee gaariga anbalaasta, dab damiska, ama booliiska oo garabka waddada taagan, waa inaad gasho haadka ka fog gaariga gurmadka degdega ah, haddii ay suurtagal tahay inaad si badbaado leh u samayso.

Haddii aadan awoodin inaad si amaan ah hal haad uga durugto, tartiib u socio.

Markaad aragto gaariga gurmadka degdega ah oo nalalkiisa iyo seerigu u shidan yihiin gadaalna kaa socda, u leexo geeska kuugu dhow ee waddada kadibna istaag. Ha qaban bareegga ama haku boodin haad kale. Xasuusnoow inaad adeegsato digniintaada leexashada.

Sii taagnoo ilaa gaariga gurmadku si buuxda kuu dhaafo. Fiiri gaariyaal kale oo kuwa gurmadka ah oo daba socda gaarigaas kahor intaadan haadka ku laaban.

U jirso ugu yaraan 500 oo talaabo gadaasha gaari kasta oo dab damis ah.

## **Ka soo bixitaanka Waddada Wayn**

Waa wax fiican inaad ogaato, kahor intaadan bilaabin inaad gaariga wado meesha aad u baahan tahay inaad uga baxdo waddada wayn.

Raadi calaamadaha macluumaadka ka bixinaaya jidadka kaa horeeya ee laga leexdo.



Markaad usii dhowdahay meeshaad rabtay inaad ka leexato fareejo ku muuji inaad doonayso inaad beddelato haadka, kadibna u beddelo haadka xawaare dhimida, marka aad si badqab leh sidaan ku samayn karto. Tani waxay ku siinaysaa waqti aad gaariga ku tartiibiso kahor intaadan gaarin halka aad jid weynaha kaga baxayso. Sidoo kale waxay kaa caawinaysaa inaad iska ilaaliso xanibida gaariyaasha xawaaraha dhaksada ah ku socda.

Haddii aad dhaafto meeshaad ka leexan lahayd, kusii soco midka xiga. Gadaal ha u bixin ama ha samayn kala wareegga U si aad ugu laabato jid yaraha aad doonayso.

## **Shilalka**

Haddii aad isku dhacdaan gaari taasoo keentay dhaawac, ha katagin meeshaas.

Haddii aad awoodo, wac 911 ama wakaalada kuugu dhow ee booliiska.

Haddii iskudhaca keeno keliya waxyeelo hantiyeed, u dhaqaaq meel amaan ah. Ha ka soo degan gaarigaaga ilaa aad u dhaqaaqday meel amaan ah, oo ka fog jidadka waddada.

Isweydaarsada shattiyada iyo xogta caymiska darawalka kale

ama darawallada. Qoro lambarka taargada ee gaariyaasha kale ee shilka qaybta ka ah. Waxaad sidoo kale siin kartaa lambarka aqoonsiga gaariga. Codso caawimaada booliiska, haddii loo baahdo.

## **Gaari wadista adoo Mashquulsan**

Mashquulka darawalka ama feejignaan la'aanta ayaa kamid ah waxa ugu badan ee shilalka gaariyaasha keena gudaha Minnesota, taasoo ka dhigan ugu yaraan 25 boqolkiiba dhammaan shilalka gaariga sanad kasta.

Darawallada mashquulsan ayaan awoodin inay aqoonsadaan khatarha suurtagalka ah ee waddada ka jira ayna kaga falcelin waayaan wakhti ku haboon xaaladaha waddada, taas oo hoos u dhigaysa heerka badqabka.

Waxaa jiro sadex nooc oo waawayn oo mashquuliya darawalka:

- Aragga - inuu ka jeesto waddada.
- Arin farsamo/Jireed - inuu gacanta ka qaado isteerinka.
- Dhimirka - inuu noqodo "mid wax kale ka fakaraaya."

Mashquulinta ka jirta gudaha gaariga waxaa kamid ah shaqooyinka sida adeegsiga taleefanka gacanta, adeegsiga aalada GPS, wax laacida, cunto cunista ama wax cabida, wax ka badalka raadiyaha, la hadlida rakaabka kale, iyo akhrinta qariiradaha iyo waxyaabaha kale. Xataa markaad iska eegayso waddada, dabecadaha sida inaad eegto meel shil ka dhacay, ama maahsanaan, ayaa ka leexin kara dareenka waajibaadkaaga gaari kaxaynta. Sababo amaan awgood, xaqiiji inaad masuuliyada wadista gaariga siiso dareenkaaga buuxa xili kasta. Waxaa jira qaar kamid ah dabecadaha darawalka kuwaasoo sharci daro ka ah wadooyinka Minnesota, gaar ahaana:

- Adeegsiga taleefanka gacanta ama aalada kubuuyuutar waayar aan leheyn ah si aad ugu dirto fariin qoraal, iimeel, ama aad uga gasho interneedka intaad gaariga wado — ayna ku jirto markaad taagan tahay jid jaam garoobay.
- Darawallada ka yar da'da 18 sano ee leh ogolanshaha casharka ama shattiga ku meel gaarka ah ee adeegsanaaya taleefanka gacanta, hadday gacanta ku hayaan ama cod ku hagayaanba — marka laga reebo inay wacayaan 911 marka xaalad degdega ah jirto.
- Xirashada sameecadaha dhagaha ama gasho gashiyada codka oo la gashto labada dhagood ba si joogto ah si loogu dhagaysto raadiyaha ama aalad kale oo cod laga dhagaysto.

### **Gaari u wadidda si Xun**

Dadka sida xun u wada gaariyaasha ayaan muhiimad badan siinayn darawallada kale. Waxay muujiyaan xanaaq iyo niyad xumo marka ay gaariga wadaan, ayadoo aysan qasab ahayn in darawallada kale sabab u yihiin, laakiin ay keenayso fikirkooda gaarka ah.

Gaari u wadista si axmaqnimo ah ayaa badanaa qusaysa gaari u wadista si ka xawaare badan gaariyaasha kale, taasoo keenaysa dabeecadaha sida inaad gaariyaasha aad ugu dhawaato; badalida haadadka si joogto ah oo iswaal ah, badanaa ayagoon bixin wax digniin ah; iyo indho u gaduudin ama u hanjabida darawallada u dhow.

Haddii aad dabeecadahaaga ka aragto qeexitaankaan, waa inaad samaysaa dadaal badan si aad isku dejiso marka aad gaariga wado. Waa muhiim In wadooyinka aad wadaagto. Gaari wadista amaanka ah ayaa u baahan qadarin iyo wada shaqaynta dhammaan darawallada.

Haddii uu afka kulasoo galo darawal caraysan, hala murmin. U banee qofka wadadiisa, ha fiirin, hana ogolaan in xaaladu kasiidarto.

### **Aragga la Xiray**

Waa sharci daro inaad wado gaari ay ka buuxaan alaab, ama ay saaran yihiin wax ka badan sadex qof oo fadhiya shirka, haddii alaabta ama dadku ay xiraa aragaaga jidka kaa horeeya ama geesaha gaariga ama ay carqalad ku noqdaan awoodaada xakamaynta gaariga.

### **Qaadista Alaab Gaariga Ka horaysa**

Alaabtu waa inaysan ka horayn taayirka hore ama saqafka hore ee gaariga wax ka badan sadex talaabo.

Haddii alaabtu dhaafto afar fiid/tallaabo ama ka badan gadaasha danbe ee gaariga, calaamad cas, jaalle ah, ama liimi ah oo ah ugu yaraan 16 inji waa in lagu xiro cirifka alaabta. Habeenkii, nal ama iftiin cas, oo meel fog oo dhan ugu yaraan 500 talaabo laga arki karo, waa in lagu xiraa cirifka danbe ee alaabta.

Gaariyaasha rakaabku ma qaadi karaan alaab dhaafsiisan laynka buudka gaariga dhanka bidix iyo ugu badnaan lix inji gadaasha budka laynka dhanka midig.

## **Gaariyaasha kaamka iyo Tareelayaasha**

Haddii aad gaari guriga kaamka ama tareele ah ku jiidayso gaarigaaga, waa inaad ka danbayso ugu yaraan 500 oo talaabo gaariyaasha kale.

Marka ay alaab saaran tahay, 10 ilaa 15 boqolkiiba miisaanku tareelaha waa in lagu dheelitiro cufta inta u dhexaysa tareelaha iyo gaariga. Marka rarka si saxan loo saaro, sagxada tareelaha waa in ay simantahay. Kadib markaad socoto dhawrka mayl ee ugu horeeya, istaag oo hubi birta gaariga jiidaysa, taayirada, nalalka, iyo alaabta saaran. Nidamakaan ku celi dhammaan markaad meelaha nasashada u istaagto.

Ku soco xawaare hooseeya. Tareelayaal badan ayaa leh taayiro yar oo degdeg u wareegaya marka loo eego taayirada gaarigaaga, taas oo keenaysa kororka kulaylka oo keeni kara in boorimada taayirku ay xumaadaa.

Xasuusnoow in bareegyada gaarigaaga ay u badan tahay inaan loo naqshadaynin inuu jiido tareele culus. Inaad si degdeg ah u istaagto adiga oo xawaare sare ku socda ayaa rogi karta labadaba tareelaha iyo gaarigaadaba.

Si taxadar leh xawaaraha u kordhi, adoo adeegsanaaya gayrka hoose haddii loo baahdo. Bad kugu filan u jirso si aad uga baaqsato inaad si dhakhso ah u joogsato. Markaad baasayso gaariyaasha kale, xasuusnoow badka dheeraadka ah ee isjiidkaaga xasuusnoowna in awoodaada xawaarayntu yar tahay.

Dabaysha iyo roobka ayaa saamaynaya awoodaada maaraynta iyo xakamaynta gaariga jiidaya miisaanka dheeriga ah. Markaad jiidayso isjiid ama gaariga kaamka xili roobaad ama leh dabaylo, yaree xawaarahaaga in kasii yar cadadkii aad yarayn lahayd cimilada caadiga ah. Sii boos badan leexashada. Isjiidyada dhaadheer ayaa kusoo liici kara geeska waddada in ka badan inta gaarigaagu sameeyo. Feejignaan dheeraad ah sii nidaamka wax qaboojinta gaarigaaga markaad jiidayso miisaan dheeraad ah. Matoorkaaga ayaa si dhakhso ah u kululaanaaya marka cimiladu kulushahay, markaad xawaare badan ku socoto, iyomarkaad marayso meelaha taaga ah.

## **Shuruudaha Isjiidka (tareelaha)**

### **Cabbiraadaha:**

Jooga ugu badan — 45 fiid/talaabo  
Balaca ugu badan — 8 fiid talaabo 6 in  
Jooga ugu dheer — 13 talaabo 6 inji

### **Nalalka:**

Nalalka Danbe — Labo, casaan  
Fareejooyinka — Labo, casaan  
Taargada Gadaale — Hal, Cadaan

Calaamadaha joogsiga iyo leexashada tareelaha waa in loo adeegsadaa wadista habeenkii iyo markasta oo calaamadaha joogsiga iyo leexashada ee gaariga wax jiidaya aysan arkayn darawallada kale.

Xadka balaca ee 102 inji ah (8 fiid/talaabo iyo 6 inji) oo ah gaariyaasha madadaalada kuma jiraan isjiidyada aan balaar ahaan dhaafsanayn muraayad haadka danbe ee bannaanka ee gaariga haddii gaariga raaxadu uu yahay mid iskii isu wada. Balaca tareelaha ayaan ka dhaafsanaan karin muraayad haadka bannaanka ee gaariga tareelaha jiidaaya.

Guryaha gaariga ah ee noocyada A, B, ama C ayaan ka dheeraan karin 45 talaabo. Xadigga guud ee jooga gaariyaasha halka qayb ah waa 40 fiid/talaabo.

Dhammaan isjiidyada leh miisaanka guud ee gaariga oo dhan 3,000 rodol ama ka badan waa inay leeyihiin bareeg.

Dhammaan isjiidyada la dego waa inay leeyihiin taariko si fiican u muuqata oo diiwaan gelin shaqaynaysa leh.

Silsilada badqabka waa inay si rasmi ah ugu xiran tahay tareelaha laguna adkeeyo gaariga loo adeegsanaayo in lagu jiido.

### **Gaariga isjiidka ah ee la dego (RV)**

Gaariga isjiidka ah ee la dego (RV) waxaa laga wadaa iskudarka wax aan ka badnayn sadex gaari oo ka kooban taraaga wax qaada ama jiidaha gaariga guriga ah oo ku xiran iskiidka kaamka lagu seexdo kaasoo leh rimoor lagu jiidaayo isjiidka. Gaari isjiid ah ayaa sidi kara doon, mootooyin, baaskiil matoor leh, mootooyinka wadooyinka rafka ah, qalabka barafka ku socda, gariyaasha ciyaaraha beerta, kareetooyinka, ama kooraha faraska ama agabka.

Waa inaad ugu yaraan jirtaa 18 sano si aad u wado gaariga isku dhafan ee dalxiiska. Heerka jiidista ee gaariga wax wada ama jiidaha gaari guriga waa inuu u dhigmaa, ama ka wayn yahay, miisaanka guud ee dhammaan gariyaasha la jiidaayo.

Gaariga isjiidka ah ee la dego (RV) ayaan ka badan karin 70 fiid/talaabo joog ahaan.

Gaariga isjiidka ah ee la dego (RV) laguma dhex wadi karo aaga todobada degmo ee Magaalada weyn Isniinta ilaa Jimcaha inta lagu jiro saacadaha 6 a.m. ilaa 9 a.m. iyo 4 p.m. ilaa 7 p.m.

## **Gaari Wadista Xiliga Jiilaalka - Badqabka Gaariga**

Ka nadiifi barafka dusha gaariga, daaqadaha, iyo nalalka kahor intaadan kaxayn.

- Xaqiiji in biyaha aalada sifaysa muraayadaada kore ay ka kooban tahay daawada barafka ka hortagta.
- Iskuday inaad dareento waddada: tijaabi bareegyadaada adiga oo gaariga tartiib u wada si aad u tijaabiso dusha waddada.
- Waafaji xawaarahaaga jawiga waddada.
- Iska ilaali inaad gaariga qaab shub ah u wado markaad marayso wadooyinka sibiqda ah.

Haddii gaarigaagu ku dhago baraf, iskuday inaad gaariga ka bixiso meesha adiga oo horay iyo gadaal u ruxaya. Toosi taayirada hore kadibna tartiib horay ugu wad gaariga, kadibna gadaal u wad, ilaa intaad awoodo, adiga oo aan taayirada silitaynaynin. Si tartiib ah u kordhi xawaaraha marka taayiradu qabsadaan meel. Haddii gaarigaagu bilaabo inuu siibiibto ama taayiradu bilaabaan inay raftaan, qabo bareega kuna celi wadista adiga oo u wadaya jihada kale.

## **Xaaladaha Degdega ah ee Barafka iyo Xeerarka**

### **Baakinka**

Marka cadad badan oo baraf ah uu ka da'o magaalada, maamulka magaalada ayaa ku dhawaaqa xaalada degdega ah ee barafka. Qaar kamid ah sharciyada baakinka ayaa dhaqan geli kara ilaa inta barafka laga saaraayo wadooyinka.

Raac sharciyada baakinka xaalada degdega ah ee barafka si aad uga fogaato in gaarigaaga la jiito iyo ganaaxyada.

### **La wadaagista Waddada Qalabka Barafka Xaaqa**

Marka wadooyinka uu xiro baraf ama baraf adag, iska eeg nalalka biligleynaya ee cad, jaallaha ah, iyo kuwa buluuga ah ee baabuurta barafka xaaqda. Jidka haka xirin marna qalabka barafka xaaqa. Dhaaf baabuurta barafka xaaqda keliya marka aad arki karto gaariga oo dhan. Wax badan ka danbee baabuurta barafka xaaqda si aad uga fogaato faniinada ciida, iyo barafka, ee gaarigaaga ku dhici kara.

Iska fiiri burtuqyada khatarta ah ee barafka ama xaaladaha "cir cadaaga". Baabuurta barafka xaaqda ayaa abuuri kara daruuro baraf lasoo xaaqay ah kuwaas oo qarín kara waddada kaana qarín kara khataraha waddada.

Qalabka barafka xaaqa iyo qalabka kale ee jidka xaaqa ayaa badanaa ku socda xawaare hooseeya. Meelaha la dagan yahaya, gadaal ayay u bixi karaan si ay u Kala wareegaan. Sii darwallada qalabka masaafo si ay ugu qabsadaan shaqadooda si badqab leh.

## **Badbaadida xiliga Jiilaalka**

### **Ku hayso Kiishada Badbaadada Gaarigaaga dhexdiisa**

Badqab awgiis, waa muhiim inaad soo diyaarsato kiishada badbaadada ee xiliga qaboobaha si aad ugu dhex haysato gaari kasta ood wado. Qalabka lagu talinaayo qaarkood waxaa kamid ah:

- Badeel.

- Qasac ciid iyo cusbo ku jiraan.
- Dhar iyo kabo qaboowga kaa celiya.
- Calanka cas ee anteenada gaarigaaga.
- Buste ama jawaan aad ku seexato.
- Cuntooyinka tamarta degdega ah, biyaha la cabo, iyo qasab maran ood qashinka iskaga rido.
- Silsilada gaariga lagu jiido iyo silsiladaha taayarka.
- Digniinaha waddada ama astaamaha.
- Fiilooyinka bayteriga lagu kiciyo.
- Shumacyada iyo taraqa ama qaraxada.
- Kiishada gurmadka caafimaadka.

## Waxa ay tahay inaad samayso haddaad Meel Ku xayiranto

Haddii aad meel ku xayiranto intaad ku safrayso cilmiada qaboobaha, la joog gaarigaaga. Inta badan dhimashooyinka ka dhasha xaaladaha noocaan ah ayaa dhaca marku dadku ka baxaan gaarigooda, jihadu ka lunto, uuna muddo badan ku dhacaayay barafku.

Isdaji, sug inta caawimo kuu imanayso, oo qaad talaabooyinka soo socda inta ugu badan ee ka awoodo:

- Daar nalalkaaga khatarta khatarta.
- Ku xir calan cas anteenada raadiyahaaga.
- Rakibo calamo iyo qaylo dhaamiyaal, hadday suuragalayso.
- Haddii dharka, busteyaasha iyo agabka kale ee badbaadadu ku jiraan dabada danbe ee gaariga, soo gasho gudaha gaariga.
- Ka fogee meesha naqaska dambe ee gaarigu ka baxdo barafka iyo qashinka.
- Daar matoorka iyo kululeeyaha ilaa gaarigu uu diiranaan yeesho, kadibna dami matoorka. Sidaan ku wad ilaa inta gaariga shidaal kuugu jiro, ama ilaa lagaa badbaadinayo. Inaad matoorka shido ku dhawaad toban daqiiqo halkii saacba, si aad u dabayso baytariga una kululayso gudaha gaariga, ayaa lagu talinayaa.
- Xataa marka cimiladu aad u qaboowdahay, hal daagad ha kuu furnaato qayb ahaan si aad u hesho hawo nadiif ah. Dadka saaran gaari taagan ee iska daaran ayaa ku sumoobi kara kaarboon monoxide haddii aysan helin hawo bixin/laydhin ku filan.
- Ugu yaraan hal qof oo gaariga ku jira waa inuu soo jeedaa markasta.

## Joogtaynta Feejignaanta iyo Dedaalka

Inaad daasho ama hurdooto adoo gaariga saaran ayaa badanaa dhacda, laakiin waa arin khatar badan. Si aad arintaan uga hortagto, xaqiiji inaad nasiimo badan qaadata kahor intaadan bilaabin safarkaaga dheer.

Soo jeedinnada soo socda ayaa ku caawin kara, laakiin ma lahaan doonaan saamayn sii jirta:

- Jooji gaariga intaad awoodo ee aad u baahan tahay -- Ugu yaraan halmar 100 mayl ba ama labadii saacba mar. Kasoo dego gaariga oo soo socsoco, isa soo kala bixi, jimicsio, oo naso. Cun cunto ama cabitaan.
- Haddii aad sido rakaab, wada sheekaysta si aad usoo jeedo. Ka codso qof kale inuu gaariga wado marka aad dareento inaad daashay.
- Haddii aad keligaa tahay dhagayso raadiyaha ama hees cod dheer ku hees.
- Marka cimiladu saamaxayso in yar fur daaqada si aad ku kordhiso hawada cusub ee soo galaysa. Ha isku halayn daawooyinka "soo jeedka."
- Haddii waxaan dhan shaqayn waayaan, jooji maalintaas safarka ama gaariga ku baakin meel waddada ka fog kadibna naso. Haddii aad kusii jirto gaariga, quful dhammaan albaabada xoogaana fur daaqadaha si aad u hesho hawo cusub.

## **Bariiqashada**

Markaad gaari ku wado jid sibiq ah, tartiib u soco oo bad amaan ah u jirso gaariyaasha kaa horeeya. Ha u adeegsan kuruusk kantaroolka marka wadadu tahay mid siisiibasho ah.

Bariiqashada gaariga ayaa dhacda marka taayiradu ay lumiyaan xanafta ku xajinaysa waddada. Haddii sidani dhacdo, isdeji — ha samayn khalkhal ama haku boodin bareega. Taas badalkeed, ka qaad cagtaada sheelaraha iyo bareega ilaa aad uga leexato jihada aad doonaysay.

## **Nidaamka ka hortagga Xirmitaanka Bareega**

Gaariyaasha qaar ayaa leh nidaamka bareega oo elektaroonig ah iyo nidaamka kahortaga bareega kaasoo ka caawiya gaariga in la xakameeyo inta bareega la qabanaayo. Haddii aad haysato nidaamka kahortaga xirmitaanka bareega, ha u riixin sidaa u riixi lahayd bareega caadiga ah oo kale. Taas badalkeed, hoos u riix batoonka bareega siina wad inaad wareejiso isteerinka gaariga ilaa aad xakamayso. Haddii aadan hubin in gaari leeyahay nidaamka kahortaga xirmitaanka bareega elektarooniga ah akhri buug tasmada mulkiilaha ee gaarigaaga si aad uga hesho tilmaamo gaar ah.

## **Gaari Ku wadista Roob daran iyo Ciiryaamo**

Haddii aad waajahdo duufaan ama ciiryaamo, yaree xawaaraha, adeegso taxadar dheeraad ah, una diyaar garoow inaad joogsato. Kordhi badka aad u jirto gaariga kaa horeeya. Nalalkaaga hore, sida sharcigu qabo, waa in la adeegsadaa xiliyada aadan arki karin wax ka badan 500 oo talaabo hortaada iyo marka roob da'ayo, baraf dhacayo, ciiryaamo dhacayso, ama qaruurax baraf ah uu da'ayo. Yaree iftiinka nalka si aad u yarayso caadka ay abuurayaan. Haddii aadan u jeedin bad amaan ah oo kaa horeeya, ka leexo waddada kadibna joogso ilaa aragu ka hagaagaayo.

## **Biyo qaadka taayirada**

Markaad ku socoto xawaare dhan 35 mph ama ka yar, inta badan taayirada ayaa "xaaqaaya" biyaha saaran waddada si ay taayirada u qabsadaan waddada.

Marka aad ku socoto xawaare intaas ka badan, biyaha ayaa ku aruuri kara hoosta taayirada korna taayirada uga qaadi kara waddada — tan waxaa loogu yeeraa “hydroplaning.” (“Biyo qaadka taayirada.”)

Marka taayiradaadu biyaha sabeeyaan, waxay luminayaan taabashada waddada oo Shuruudaha Gaari Wadista dhan. Haddii sidaan dhacdo, ma awoodi doontid inaad gaariga bareeg ku qabato, sheelarayso, ama badesho jihadaada. Haddii taayiradaadu bilaabaan inay bilyaha dul heehaabaan, ka qaad cagtaada sheelaraha.

Dul-heehaabka waddada ayaa ku yar inuu dhaco markaad ku socoto xawaaraha jidka wayn haddii gaarigaagu ku qalabaysan yahay taayiro wanaagsan oo leh giraagir qoto dheer. Laakiin dul-heehaabka biyaha ayaa ku dhici kara xawaare kasta haddii dhumucda biyaha waddada saaran ay ka badan tahay qotoda giraangirta taayirada. Marka roob culus da'aayo, gaariyaasha caadiga ah ayaa bilaaba inay heehaabaan markay ku socdaan xawaaraha 35 mph.

Si looga hortago heehaabka biyaha, hagaaji xaalada taayiradaada oo yaree xawaaraha markaad dulmarayso wadooyinka qoyan.

## **Gaari Ku wadista Wadooyinka Cariiriga ah iyo Taagaga**

Markaad kusoo dhawaato casradaha ku yaala jidadka cariiriga ah, ama meelaha ay geedaha jidka ka ag baxa ay xiraan aragga jidka kaa horeeya, Waxaad adeegsan kartaa hoonkaaga si aad uga digto darwallada kale ama dadka lugaynaya inaad jidka soo hayso.

Maaha wax wanaagsan inaad korto taagaga dhaadheer adoo xawaarahaaga gooshidu yahay dhexdehaad. Markaad marayso taagaga dhaadheer, si joogso ah u fiiri aalada la socota xawaarahaaga. Xawaaraha gaariga ayaa kordhi doona xataa marka aadan cagta kuhayn sheelaraha.

## **Banjarka**

"Banjarku" waa taayir dilaacay kaasoo lumin kara xakamaynta gaarigaaga. Kahor intaan banjar dhicin, waxaad maqli kartaa cod qarax ah ama waxaad ka ogaanaysaa isteerinka oo u booda dhanka midig ama bidix.

Haddii taayir kaa banjaro, Xoog u qabo isteerinka, ku toosi jidka kaa horeeya, si tartiib ahna uga qaad cagtaada sheelaraha. Ha qaban bareega ilaa aad gaariga ka xakamayso.

Gaariga si buuxda uga leexi waddada meesha kuugu dhow ee amaan leh.

## **Fashilka Isteerinka**

Haddii aan taayirada hore ee gaarigaaga aysan shaqaynayn markaad leexiso isteerinka, cagta ka dabi sheelaraha. Ha qaban bareega ilaa in ay muhiim tahay maahee si aad uga fogaato burbur.

Gaarigaaga ayaa isku dheelitiri kara iskiis kuna socon kara jid toosan intaad hoos u dhigayso xawaaraha. Hadday qasab noqoto inaad qabato



bareegga, u qabo si tartiib ah. Haddii aad bareegga u qabato si degdeg ah, ama aad iskudaydo inaad badasho gayrka, isbadalka xawaaraha ayaa ka saari kara gaariga isku dheelitirnaanta kana dhigi kara mid taraaraxa.

## **Fashilmida Bareegga**

Batoonka bareegga oo tartiib u yaraynaaya cadadiska saaran ayaa ah hal calaamad oo muujinaysa in bareega gaarigaagu fashilmaayo. Nalka digniinta waa in la shidaa haddii ay jirto dhibaato wayn.

Haddii batoonkaaga bareegu hoos u dhaco si lama filaan ah ilaa uu sagxada ku dhaco, iskuday inaad bam garayso batoonka si aad u siiso cadaadis. Haddii aan arintaani shaqayn, si tartiib ah u saar gaariga bareegaaga xaalada degdega ah/ baakinka. Inaad si degdeg ah bareega u qabato ayaa gaariga ku keenaysa inuu bariiqdo. Xasuusnoow: bareegga xaaladaha degdega/baakinka ayaa keliya qabanaaya bareegyada danbe.

Haddii xaaladaha waddadu kuu sahlayaan inaad isgtaago astaa, geli gaarigaaga geer fudud. Sii wad inaad hoos u wado intaad xawaaraha ka jarayso ilaa aad si amaan ah uga bixi karto waddada aadna ku istaagi karto.

## **Ka bixida Laamiga**

Haddii taayiradaadu u bariiqdaan garabka waddada, ha iskuday inaad dib ugusoo celiso laamiga. Ku sugnoow garabka waddada si tartiib ahna u siidaa sheelaraha. Kadib markaad yarayso xawaaraha, ku laabo laamiga. kadibna kordhi xawaaraha.

## **Iska Ilaali Deerada**

Waxaa jira waxyaabo aad samayn karto si aad u yarayso khatarta jiidida deerada. Deerada ayaa inta badan socada saacadaha habaynkii, marka waa inaad feejignaan dheeraad ah u lahaato inta lagu jiro xiliyadaas. Iska eeg geesaha waddada habaynkii si aad u fiiriso iftiinka nalalka gaarigaaga oo qabanaaya indhaha ugaarta. Haddii aad aragto iftiinka oo qabanaaya indhaha ugaar taagan geeska waddada, tartiib u soco. Yeeri hoonka una diyaar garoow inaad istaagto. Markasta iska fiiri wax ka badan hal deero. Inkastoo ugaarta waddada goysa ay badanaa joogto goobaha baadiyaha ah, deerada ayaa mararka qaar dhex wareegta magaaloyinka ama xataa magaaloyinka weyn. Deeradu waxay jidka ka goyn kartaa meel kasta, xili kasta.

## **Gaariyaasha Kusoo Socda Laynkaaga**

Haddii gaari horay kaagasoo socdo asagoo soo haya haadkaaga, u leexo dhanka midig. Ha adeegsan haadka bidix si aad uga fogaato gaariga. Darawalka ayaa ku laaban kara haadka saxda ah kadibna waxaad ku laaban kartaa haadkaaga.

Haddii gaarigu usoo socdo dhankaaga, uga leexo waddada dhanka midig, haddii ay muhiim tahay si aad uga fogaato isku dhac. Yeerinta hoonkaaga iyo fareejaynta nalalkaaga hore ayaa kaa caawin karta in darawal hurdaysan ama mashquulsan uu feejignaado.

## **Gaari Doonaaya inuu Ku dhaaf**

Darawal kale ayaa dooni kara inuu ku dhaaf adoo ku socda waddada labada haad leh oo gaariyaashu u socdaan labada jihaba. Haddii darawalku uu si khalidan u fahmo xawaaraha gaari soo socda ama uusan awoodin, sabab kale awgeed, inuu baaso gaariga, adigga iyo darawallada kale ayaa dhammaantiin khatar ku jira. Waa inaad qaadaa talaabo si aad uga hortagtaa isku dhaca gaariyaasha.

Haddii gaariga ku baasaaya uu u dhow yahay inuu dib ugu laabto haadka midig, tartiib u soco oo sii darawalka fursad uu baasida ku dhamaysto sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah. Haddii ay qasab noqoto in gaariga ku baasaaya uuyareeyo xawaaraha, kordhi xawaaraha si aad u xaqiijiso inaad siiso boos ku filan oo gaarigu ku geli karo haadka kaa danbeeya.

Haddii ay u muuqato in isku dhac uu dhacaayo, garabka midigna uu u dhow yahay gaarigaaga, si degdeg ah ugu leexo midig oo u ogolow gaariga ku dhaafaaya inuu galo haadkaaga.

## **Ku damidda Jidka Tareenka Dushiisa**

Haddii gaarigaagu ku damo jidka tareenka tareenkuna uu soo socdo, iskaga tag gaariga. Si aad uga fogaato in ay kugu dhacaan burburka isku dhaca shilku ka fogow waddada tareenka. Si degdeg ah ugu soco xagal 45 digrii ah adiga oo ka fogaanaaya jidka tareenka oo aadaaya dhanka tareenku ka imaanaaya.

## **Marinnada waddada Daadku yaalo Shuruudaha Gaari Wadista**

Daadka ayaa imaan kara marka ilaha iyo webiyo ay fatahaan, marka biyo xireenadu ay butaacaan, marka ay jirto baraf wayn oo dhalaalay ama xili kasta oo ay roobab badan da'aan. Biyaha daadka ayaa laga heli karaa wadooyinka, buundooyinka iyo aagaga godka ah. Daadka soo rogmada ayaa si dhakhsa ah oo lama filaan ka ku imaan kara. Waxay dhacaan dhawr daqiiqo ama dhawr saacadood gudahood marka roob badan da'o kadib.

- Haku kaxayn gaariga aagaga daadku ku soo rogmaday. Haddii aad aragto wado daad jiifo oo kaa horaysa, leexo o raadso wado kale si aad u tagto meeshii aad u socotay.
- Taxadar, gaar ahaan xiliga habaynkii, marka aragu kooban yahay.
- Xasuusnoow in 6 inji oo biyo ah ay gaari karaan salka candhada hoose ee inta badan gaariyaasha rakaabka, taas oo keenaysa inaad lumiso xakamaynta ama suuragalnimada in gaarigu istaago.
- Labo fiid oo biyo socda ah ayaa qaadi kara inta badan gaariyaasha ayna ku jiraan gaariyaasha SUV iyo taraagyada alaabaha yaryar.
- Xataa haddii biyuhu u muuqdaan kuwo aan qoto dheerayn oo aad ka gudbi karto, ha iskudayin inaad ka gudubto waddo ay jiifaan biyo daad ah. Biyuhu waxay kuu qarir karaan godadka, ama wax ka sii xun, oo waxay waxyeelo u geysan karaan wadooyin ayagoo qaadaya sagxada kore ee waddada.
- Haddii aysan jirin wado kale, u sii soco dhul taag ah kadibna sug intabiyuhu ka gudbayaan.

## **Ku qaraqmida Biyaha**

Inta badan gaariyaashu waxay dul heehaabi doonaan biyaha 30 ilaa 60 sikin. Haddii gaarigaagu galo biyo mool ah, samee iskuday kasta si aad degdeg uga baxdo gaariga. Hadday suuragalayso, uga bax gaariga daaqada furan kahor intaan biyuhu gaarin heerka daaqada.

Haddii qayb kamid ah gaarigaaga biyuhu qariyaan. Albaababad gaariga lama furi karo ilaa cadaadiska biyaha ku jira gudaha gaariga ay lamid tahay kan biyaha banaanka. Marka gaarigu gabi ahaanba buuxsamo, albaabada waa la furi karaa, haddii aysan jirin waxyeelo qalfoofka gaartay.

Miisaanka matoorka ayaa keenaaya in qaybta hore ee gaarigu libiqdo marka hore. Qaybta danbe ee gaariga ayaad ka heli kartaa hawo intaad qorshaynayso sidaad uga bixi ahayd gaariga. Haddii dad kale saaran yihiin gaariga, go'aami xaaladooda iskuna day inaad gaariga uga wada baxdaan si wada jir ah.

## **Dabka**

Haddii aad ogaato qiiq kasoo baxaaya salka hoose ee buudka gaariga, ka bax waddada, dami matoorka, si degdeg ahna u gabax gaariga. Ha ku shubin biyo si aad dabka u damiso — tani waxay dhab ahaantii balaarinaysaa holaca.

## **Kulaylka Xad dhaafka ah**

Inta badan gaariyaasha ayaa leh cabirada shirka ama nalal sheegaaya heer kulka matoorka. Shaqooyinka sida wadista gaari marna joogsanaaya marna soconaaya maalin kulayl jiro, ku wadista gaariga meel taag ah, iyo jiidista gaari isjiid ah ayaa keeni kara in matoorku ka kululaado sidii caadiga ahayd.

Marka matoorkaagu kululaado, dami qalab kasta oo gaariga ka shidan oon muhiim ahayn, sida hawo qaboojiyaha. Haddii heerkulku uu wali sareeyo, daaridaaalada kulaylisada gaariga ayaa kaa caawin doonta inaad hawada kulul ka saarto matoorka. Haddii aan farsamooyinka shaqayn heerkulka matoorkuna uu si degdeg ah ku kordho ama qiic kasoo baxo matoorka gaariga, ka leexo waddada, jooji gaariga, kadibna dami matoorka isla markaba.

## **Hallaabitaanka Nalalka Hore**

Haddii nalalka hore ee gaarigaagu si lama filaan ah u damaan, iskuday inaad shidato nalalkaaga baakinka, nalalka digniinta khatarta, ama daaro fareejooyinka — Midkood ayaa shaqayn kara kuna siin kara nal kugu filan si aad uga baxdo waddada. Haddii nalalkaaga hore fashilmaan maalin mashquul badan ama wado nalal leh, markaas waxaad helaysaa nal kugu filan ood ku leexato. Haddii dhammaan nalalkaagu kharaabaan aadna mugdi marayso, joogto wado cidla ah, tartiib u socoto oo ku hay gaarigaaga laamiga ilaa aad si badqab leh u istaagi karto geeska waddada.

## **Hallaabitaanka Sifeeyayaasha Muraayada Hore ama Furanka Lama Filaanka ah ee Daboolka qaybta Matoorka**

Haddii sifeeyayaasha muraayadahaaga hore ay si lama filaan ah u fashilmaan xili uu daaayo roob ama baraf araga xiraaya, tartiib u soco oo shido nalalkaaga digniinta

khatarta. Ha yarayn xawaarahaaga si degdeg ah haddii gaariyaal kale ku dabo socdaan. Ka leexo waddada kadibna istaag meel amaan ah sida ugu dhakhsaha badan.

Haddii saqafka matoorka ee gaarigaaga uu degdeg u furmo, asagoo xiraaya aragaaga, waxaa laga yaabaa inaad wax ka aragto meesha banaan u dhexaysa kawarka hore iyo saqafka hore ee matoorka gaariga. Haddii aan tani macquul ahayn, hoos u dhig daaqada kadibna gees isku leexi si aad u fiiriso horta geeska saqafka. Shido nalalkaaga digniinta khatarta, yaree xawaaraha, oo dooro marin amaan ah ood uga baxdo waddada.

### Sheelaraaha Gaariga oo ku Dhegay

Haddii sheelaraaha gaarigaagu shaqayn waayo, waxaad awoodi kartaa inaad ka shaqaysiiso adoo faraha cagta hoos ka galinaaya kuna riixaaya sheelaraaha korna u qaadaaya. Haddii aan talaabadaan shaqayn, qabo bareega una wareeg heerka dhexdhexaadka, tani waxay daminaysaa matoorka. Talaabada xigta, xulo marin badqab leh una leexo geeska waddada. Haddii aan geeska wadu lahayn meel la istaago, daar nalalka khatarta ee gaarigaaga siina wad inaad kusii wado gaariga jid toos ah ilaa aad si badqab leh ugu leexan karto garabka waddada.

### Gaariga Ku dhaca Tiirka Koronto ama Bokiska Korontada

Haddii gaarigaagu ku dhaco tiirka korontada, fiilo, ama bokiska korontada, waa inaad:

- Waa inaad KU NAGAATAA gaarigaaga aadna wacdo 911.
- Waa inaad KELIYA kasoo baxdo gaariga haddii dab qabsaday.
- Hadday qasab noqoto inaad ka baxdo, ka bood gaariga adoo labadaada lugood wada socdaan, kuna jiid cagahaaga dhulka intaad ka baxayso meesha shilku ka dhacay.
- MARKASTA u qaado in dhammaan fiilooyinka iyo qalabku ay koronto sidaan.

### Ku sumoobida Qiiqa Kaarboon Monoxide iyo Tilmaamaha Badqabka

Sunta kaarboonka ee Monoxide waa gaas loo dhinto, aan ur lahayn, aana lahayn midab oo kasoo baxa matoorada. Wuxuu ku aruuri karaa gudaha gaarigaaga marka daaqaduhu xiran yihiin, ama aad joogto garaashka, haddii matoorkaagu uusan shidnayn. Daawada keliya ee uu leeyahay sunta kaarboon monoxide waa hawo nadiif ah oo cusub.

Calaamadaha hore ee sunta kaalboonka monoxide waxaa kamid ah daal degdeg ah, madax xanuun, dawakhsanaan, iyo lalabo. Haddii aad isku aragto wax kamid ah calaamadahaan, fur daaqadaha, dami matoorka, kadibna ka bax gaariga ama garaashka sida ugu dhakhsaha badan. Codso in la hubiyo nidaamka qashin saarka ee gaariga haddii aad ka shakido in qashin saarku dilaacay.

Sunta kaarboon monoxide ka ayaa dhacda inta ugu badan bilaaha qaboobaha marka daaqadaha gaariga la xirto. Marka cimiladu tahay qaboow, kaarboon monoxide ayaa ku xanibmi kara gudaha garaashka xataa marka albaabka garaashka gabi ahaanba la furo. Kaarboon monoxide ayaa geli kara guriga ku dhagan aaga. Kaarboon monoxide ayaa qofka ka dhigi kara mid miyir daboolma daqiiqado gudahood. Si loo yareeyo sunta kaarboon monoxide iyo dhimashada ka imaan karta:

- Iska ilaali in gaarigu iska daarnaado garaashka gudihiiisa. Meel amaan ah oo aad isku kululayn karto gaariga ayaa ah jidka xaafada.
- Iska ilaali inaad dhex fariisato gaari asagoo matoorku uusan soconayn.
- Ha wadin gaariga ayadoo dhammaan daaqaduhu si adag u xiran yihiin.
- Iska ilaali in gaarigu iska daarnaado markaad ku xanibanto baraf ama dhiigo.
- Xaqiiji in nidamaka naqas saarka dambe ee gaarigaagu uusan dilaacin uusana gufaysmin.
- Marar goos-goos ah u ogolow hawo nadiif ah inay soo gasho gaariga adiga oo hoos u dhigaya muraayada daaqada.

*Inaad gaari ku wado gudaha Minnesota waa faa'iido. Waxaad lumin kartaa mudnaantaada wadista baabuurta haddii aad jebiso sharciyada qaarkood ama aadan helin inaad la kulanto gaar ah Shuruudaha.*

*Waaxda Badqabka Dadwaynaha ee Minnesota ayaa haysa diiwaankaaga gaari wadista, kaas oo ay ku jirto xog ku saabsan jebinta sharciyada gaari wadista iyo shattiyeynta ee aad ka gashay Minnesota iyo gobollada kale. Jebinta daran ama soo laalaabata ayaa keeni karta inaad lumiso aqoonsigaaga darawalnimada ama in la xadido meesha, goorta, iyo nooca gaariga aad wadi karto.*

## Kala Laabashada Shattiga

Shattigaaga ayaa lagaagala laaban karaa hakin, baabi'in, ama joojin.

Haddii aad gasho danbi lagaana qaado shattigaaga, Waaxda Badqabka Dadwaynaha ee Minnesota ayaa kuusoo diraysa ogaysiiska lagaaga ceshtay shattiga iyo liiska shuruudaha aad dib ugu heli karto shattigaaga.

Qaar kamid ah shuruudahan keeni kara inaad lumiso aqoonsiyadaada darawalnimada ayaa hoos ku qoran.

### Shaqo ka hakin

Shattigaaga darawalnimada ayaa lagaa hakin karaa haddii aad:

- Marar kala duwan jabisay sharciyada wadooyinka.
- Maxkamad ay kugu xukunto jabinta sharci taas oo keentay inaad gasho shil keenay dhimasho, dhaawac shaqsi ah, ama waxyeelo wayn oo hantiyeed.
- Aad adeegsato, ama u ogolaato qof kale inuu u adeegsado, shattigaaga fal sharci daro ah. Waa sharci daro inaad qof u ogolaato inuu adeegsado shattigaaga ama ogolaanshahaaga.
- Aad gasho danbi wado oo ka dhacay gobal kale kaasoo u qalma in shattiga lagaala laabto gudaha Minnesota.
- Ay maxkamad kugu xukunto inaad sharciyan u qalmin inaad wado gaari matoor ku shaqeeya.
- Aad ku fashilanto inaad soo sheegto xaalad caafimaad oo keeni kartay in lagaa kansalo aqoonsiga darawalnimada.
- Aad ku guulaysatay inaad ka istaagto baska iskuulka oo gacankiisa istaaga uu taagnaa nalalkiisa casna uu u daaranyahay,, muddo shan sano ah gudaheed markii horay laguugu xukumay danbi kan lamid ah.
- Lagugu helo inaad haysato shatti been abuur ah ama wax laga badalay.
- Aad codsi been abuur ah ku qadato ruqsad ama aad u codsato kaar aqoonsi.
- Aad wax uun qayb ah ka qaadatay imtaxaanka shattiga darawalnimada ee qof kale, ama aad u ogolaatay in qof kale uu imtaxaanka kuu galo.
- Aad si been abuur ah iskugu sheegto inaad tahay sarkaal booliis ah.

- Aad ku fashilanto inaad timaado maxkamada ama aad dhiibto ganaax la xariira jabinta sharciga gaariga marka sidaas lagu amro.
- Lagugu xukumo danbiga jabinta sharciga wadooyinka ee Minnesota.
- Aad ku fashilanto dhiibista taageerada ilmaha ee maxkamadu kugu xukuntay.
- Isticmaalka, ama u ogolaanshaha qof kale inuu isticmaalo, shatiga, ogolaanshaha barista, ama kaarka aqoonsiga si uu ugu soo iibsado alaabta tubaako ah qof ka yar 18 sano, ama khamri qof ka yar 21 sano jir.
- Aad ka yar tahay 21 sano jir, ayna maxkamadu go'aamiso inaad waday gaari matoor ku shaqeeya adiga oo khamri cabaya, ama kadib markii aad cabtay khamro.
- Marka aad khidmad aad ku bixisay wakiilka shattiyeynta gobolka aad u qortay jeeg ayna lacag ku jirin. (Hakinta ayaa lagaa qaadayaa marka aad bixiso lacagtii jeega aan lacag ku jirin ee aad dhiibtay iyo wixii khidmad ah ee la xariira aad si buuxda u bixiso.)
- Waxaa lagugu xukumay xatooyo shidaal.

Marka ay mudada hakinta shattigu dhamaato, mudnaantaada darawalnimada ayaa lagu soo celin karaa, haddii dhammaan shuruudaha la buuxiyo. Hal shardi ayaa ah inaad dhiibto qarashka soo celinta shattiga. Haddii shattigaagu dhacay intii lagu jiray muddada hakinta, ama magacaaga ama ciwaankaagu isbadallay, waa qasab inaad codsato shatti cusub oo aad bixiso khidmada ku haboon.

### **Shattiga Kala laabashada**

Shattigaaga darawalnimada ayaa lagaala laaban karaa haddii aad:

- In aad diido inaad gasho baaritaan si loo go'aamiyo inaad cabtay khamri ama isticmaashay maandooriye, ama aad ku dhacdo baaritaankaas.
- Lagugu xukumay inaad qof dishay ama fal danbiyeed kale adiga oo gaari wada.
- Waxaa lagugu xukumay inaad waday gaari adiga oo daroogo isticmaalay ama khamraysan.
- Waxaa lagugu xukumay danbi aad u adeegsatay gaariga aad waday.
- Lagugu xukumay inaad gaariga ku waday xawaare ka badan 100 mph.
- Lagugu xukumay inaad ka carartay sarkaal booliis ah.
- Lagugu xukumay inaad ku fashilantay inaad istaato, sheegto qofka aad tahay, aad bixiso gurmada markaad qayb ka ahayd shil gaari—gaar ahaana shil keenay dhimasho ama dhaawac shaqsi ah oo ku dhacay dad kale.
- Lagugu xukumay inaad been sheegtay adoo lagu dhaarshay, adoo saxiixay dukumiinti ay ku qoran tahay xog been abuur ah oo ku saabsan mulkiyada sharci ama wadista gaari, ama hadal been ah u sheegay Waaxda Badqabka Dadwaynaha ee Minnesota ama wakiiladeeda ood uga sheegtay xogta noocaas ah.

- Aad qirato danbiga ama aad bixiso damaanada sadex sharci jabin ood gashay sanad gudihis aadna jabisay sharci kamid ah kuwa Minnesota ama xeer u baahan in lagu dhigo xabsi marka lagu xukumo.
- Lagugu xukumo danbi aad ka gashay gobol kale kaasoo lagaagala noqon karo ruqsada haddii aad ka geli lahayd Minnesota.
- Lagugu xukumo danbi fudud oo la xariira wadista gaari adoon aqoon in qofka gaariga leh uusan haysan caymiska eed tirka ee gaariga.
- Aad leedahay gaari aan lahayn caymiska eed-tirka laguguna ogaaday inaad kaxaynaysay, ama aad u ogolaatay in dad kale kaxeeyaan, adoo si buuxda u oгаа inaan gaarigu diiwaan gashanayn.
- Lagugu xukumay danbi wado oo wayn oo la xariira inaad ku guuldaraysatay inaad ka istaagto baska iskuulka oo calaamada gacanka joogsigu u taagan tahay nalalka casna u shidan yihiin.
- Lagugu xukumo inaad iibinaysay ama haysatay maandootiyaal adoo wada gaari.

Marka mudada shattiga kala laabashada dhamaato, aqoonsigaaga darawalnimada ayaa laguusoo celin karaa, haddii dhammaan shuruudaha dib usoo celinta shattiga la buuxsho. Waa qasab inaad keento aqoonsi sax ah marka aad galayso imtaxaanka qoran ama waddada. Waa inaad codsataa ruqsad cusub kadib marka dhammaan shuruudahaaga imtaxaankaaga aad buuxiso. Faa'idooyinkaaga Gaari Wadista

### **Shatti Xadidan**

Markay jiraan xaaladaha qaarkood, ruqsad xadidan ayaa la siin karaa qofka aqoonsigiisa darawalnimada lala laabto ama la hakiyo. Kahor intaan la bixin shattiga xadidan, shuruudo gaar ah waa in la buuxshaa, ayna ku jiraan in la dhamaysto waqti kasta oo sugitaan waajib ah. Haddii lagu siiyo ruqsad kooban, waxaa lagugu xadidayaa:

- U safrida ama ka imaanshaha goobtaada shaqada.
- U socdaalida iyo ka imaanshaha daawaynta ku tiirsanaanta kiimikooyinka ama talo bixinta.
- Inaad gaari ku qaado carruurta kugu tiirsan, iyo dadka kale ee kugu tiirsan ee ku nool gurigaaga, si aad u gayso baahiyaha caafimaadka, waxbarashada, ama nafaqada.
- U safrida ama ka imaanshaha xarunta waxbarashada kuleejka ee aad dhigato.

### **Joojinta**

Shattigaaga ayaa la joojin karaa haddii aadan haysan sharciyad aad ku lahaato ruqsad darawal oo lagu siiyay. Shattigaaga ayaa lagaa joojin karaa haddii aad:

- Haddii aad qaado naafonimada dhimirka ama jirka oo kaa dhigaysa qof aan awoodin inuu gaari si badqab leh u wado.
- Aadan ku baasin imtaxaan sharciyan ay kaaga doonayso Waaxda Badqabka Dadwaynaha ee Minnesota si loo go'aansho awoodaada gaari wadista si badqab leh.

- Aad ku bixiso xog been abuur ah ama marin habaabin ah arjigaaga shattiga. (Arjigaaga waa la joojin doonaa muddo 60 maalmood ah, ama ilaa aad xogta saxda ah keento – hadba muddadii dheer.)
- Aad gasho danbi kaas oo joojinta shattigaaga dawalnimo ka dhigaaya ciqaab sharci ah.
- Aadan u qalmin inaad hesho ruqsad darawalnimo sida uu qabo sharciga Minnesota.

## **Burinta Shattiga Darawalnimada Ganacsiga**

Waad lumin kartaa shattiga darawalka ganacsiga kadib markaad gasho danbiyada gaari wadista qaarkood. Akhri Buuga Tasmada Shattigaaga Darawalnimada Ganacsiga ee Minnesota si aad u hesho xog ku saabsan shuruudaha shattiga darawalka.



*Waa sharci daro inaad gaari ku wado wadooyinka Minnesota marka aad ku sarqaanto khamro ama maandooriyaal kale.*

## Khamriga iyo Gaari Wadista

Khamro cabista iyo gaari wadistu waa dhibaato xun oo ka jirta Minnesota iyo wadanka oo dhan.

Waxaa jira xariir adag oo u dhexeeya cabista khamrada iyo shilalka xunxun ee wadooyinka ka dhaca. Cabista khamrada ayaa la xariirta in ka badan sadex meelood hal meel dhimashooyinka ka dhaca wadooyinka Minnesota sanad kasta.

Shilalka gaariyaasha ee la xariira darawallada cabsan ayaa dila celcelis ahaan dad dhan 240 sanad kasta gudaha Minnesota dhaawacna u gaysta kumanaan kale. Qofka inta ugu badan lagu dilo shilalka khamro cabistu keento waa darawalka cabsan qudhiisa. Dhalinyarada ragga ah ayay u badan tahay inay sameeyaan ficilo dhimasho sababa in ka badan dadka kale.

## Daroogada iyo Gaari Wadista

Gaari wadista darawalka daroogada cunay ayaa ka khatar badan darawallada khamrada ayagoo cabay gaariga wada. Sharciga Minnesota ayaa mamnuucaaya inaad gaari wado adoo cunay maandooriye ama wax daroogo ah.

Maandooriyaashaan waxaa kamid ah daawooyinka sharci darada ah, daawooyinka lagu qoro, iyo daawooyin dukaamada laga iibsado (daawada qaboowga), iyo sidoo kale alaabaha guriga. Maandooriyaashaan ayaa keeni kara dawakhsanaan iyo in awooda maskaxda ama jirka darawalku daciifaan si uu qaab badqab leh ugu kaxeeyo gaariga uuna uga falceliyo xaaladaha waddada. Daawada sharciga ah ee aan keeni karin sarqaanka ayaa keligeed aburi karta

saamaynta maandooriyaha marka lagu daro khamriga. Xeerka ugu badqabka badan waa inaad daawooyinka isku qasin markaad gaari wadayso xili kasta. Adeegsiga daroogooyinku waxay keenaysaa in gaariyaashu isku dhacaan taasoo dhalinaysa dhimasho, dhaawac iyo waxyeelo hantiyeed. Waxay keeni kartaa in lagu xiro, ganaax lagu saaro ama xabsi lagu dhigo.

Haysashada iyo adeegsiga daawo uu darawalka siiyay dhakhtar ayaa la ogolyahay haddii dhakhtarku u sheego darawalka inaysan wax saamayn ah kulahayn awoodiisa gaari wadista si amaan ah. U feejignoow calaamadaha muujinaya digniinta ee daawooyinka sharciga ah iyo caafimaadka iyo amarada dhakhtarka ee la xariira ciladaha imaan kara.

Iska ilaali daawooyinka sharci darada ah. Ha isticmaalin daawo kasta oo sheegaysa inay daalka daawayso - daawada keliya ee daalku waa nasiino.

## Saamaynta khamradu ku leedahay Xirfadaha

### Darawalnimada

Khamradu waa maandooriye sarqaaminaysa shaqada jirka dhaawacaysana xirfadaha gaari wadista. Cadadka khamriga dhiiga ku jira ayaa loogu yeeraa "baraxa khamrada." Baraxa khamrada dhiiga ku jirta oo badan ayaa ka dhigan inaad aad u sarqaansan tahay. Awooda darawalnimada ayaa naafoobaysa kadib markaad hal mar khamriga cabto.

### Noocyada Saamaynada

Khamrada ayaa saamaysa nidaamka dhexe ee neerfaha waxayna naafaysaa awooda gaari wadista si badqab leh. Qaybta soo socota waxay qeexaysaa sida qaybaha gaarka ah uu u saamaynaayo cabitaanka khamridu.

#### Garashada

Darawallada caba khamrada ayaa sahlada heerkooda naafanimada. Waxay gaari u wadi karaan si xawaare badan, waxay si khaldan u xisaabshaan badka joogsiga, waxay ku fashilmaan inay xidhaan suunka amaanka, waxayna ilaawaan inay gaari u wadaan si difaac leh.

#### Aragga

Cabirka heerarka dhaqdhaqaaqa isha ayaa hoos u dhacaya, taasoo yaraynaysa aragga durugsan. Arag caad saaran yahay ayaa sidoo kale kugu dhacaya markaad khamriga iska badiso.

#### Waqtiga Falcelinta

Waqtiga Falcelinta ayaa dheeraada. Darawallada sarqaansan ayaan awoodin inay degdeg uga falceliyaan calaamadaha waddada, ficilada darawallada kale iyo dadka jidka lugaynaya, iyo waxyaabaha ka dhacaya jidka ay marayaan.

#### Isteerinka

Darawallada sarqaansan ayaa si xad dhaaf ah u wareejiya isteerinka, taasoo keenaysa inay bariiqdaan ayna ka baxaan waddada.

#### Fikirka

Darawallada sarqaansan ma ogaadaan codadka iyo muuqaallada — ama si sax ah uma fasiraan.

#### Iskuxirka iyo Isku dheelitirka

Darawallada naafada ah waxay lumiyaan awooda isku dheelitirka xawaaraha iyo toosnaanta.

#### In dareenka loo soo jeediyo.

Darawalladu waxay dhib ku qabaan inay dareenkooda siiyaan shaqooyin badan oo looga baahan yahay si ay gaari u wadaan.

## **Waxyaabo La xariira Khamrada**

Khamri 12 firiqo ah, galaas khamri ah oo shan firiqo ku jirto, cabitaan caadiyan la isku qasay, iyo qaboojiye sagaal firiqo ah ayaa badanaa ka kooban ku dhawaad isla cadadka khamriga. Hase yeeshee, waa muhiim inaad ogaato, in cabitaannada la isku qasay ay ka koobnaan karaan wax ka badan hal iyo nus firiqo khamri ah, halka cadadka khamrada ku jirta cabitaanka ay kala duwan tahay ayna gaari karto ilaa 40 boqolkiiba.

Erayga "cadaynta" waxaa laga wadaa awooda cabitaanka waxayna u dhigantaa labo jeer boqolkiiba khamrada ku jirta cabitanaka. Dhalo ay ku jirto 80 cadayn oo whiskey ah, tusaale ahaan, waxaa ku jirta 40 boqolkiiba khamro.

Muddada wakhtiga aad cabitaanka cabaysay ayaa saamaynaysa heerka saamaynta ay kugu yeelanayso khamriga aad cabtay. Haddii aad cabtay wax ka badan hal cabitaan oo caadi ah saacadiiba, heerka la aalkolada jirkaaga galaysa ayaa kordhaysa. Saamaynta khamrada ayaa aad ugu kaladuwan dadka kaladuwan.

Arimaha sida da'da, jinsiga, miisaanka jirka, dareenka, cuntada aad cuntay, xawaaraha dheefshiidka, iyo hide sideyaasha ayaa saamayn ku leh sida khamradu u saamayso qofka. Khamrada ayaa saamayn kugu yeelan karta xiliyo kaladuwan ayadoo ku xiran xaaladaha isbadbadalaya ee dareenka, cuntada aad cunto, iyo hurdada wanaagsan.

Ragga iyo dumarka ayay khamradu u saamaysaa siyaabo kaladuwan.

Ragga ayaa badanaa leh hilib murqo badan, kaa soo ka hortagaya in khamradu ku miiranto dhiiga si lamid ah dufanka. Qof aad uga dufan badan qof ay isku miisaan yihiin ayaa gaaraaya heerarka sare ee khamrada isla cadadka qofka ka dufanka yar. Qaabka keliya ee aad ku yarayn karto heerka khamriga dhiigaaga ku jira waa inaad sugtaa.

Khamriga ayaa badanaa ku baaba' ku dhawaad halkii cabitaanba saacad, laakiin arimo badan ayaa saamayn ku leh heerka khamriga jirkaaga ku jiraaya.

Jirka ayaa meesha ka saaraaya 95 boqolkiiba khamrada asagoo adeegsanaaya qashin saarka beerku sameeyo. Khamriga soo haray waxaa lagu bixiyaa neefsi, dhididka, iyo kaadida. Cabista qaxwada, jimicsiga, iyo qubayska biyaha qaboow ma kordhiyaan heerka qashin saarka.

## **Samaynta Dookhyada Khatarta Yar**

Inaad dad isla cabtaan ayaa badanaa keenta in qofku asagoo sarqaansan gaari ka xeeyo. Xeerka ugu adbqaka badan waa kan: haddii aad doonayso inaad cabto, ha wadin gaari; haddii aad doonayso inaad gaari wado, ha cabin khamri. Waxyaabaha kale ee aad ku badalan karto gaari wadista adoo sarqaansan ayaa ah:

- Qoondayso darawal.
- Waco tagsi.
- Waco saaxiib.
- Joog habaynkaas guriga saaxiibkaa.
- Ka qaad furayaasha, haddii saaxiib sarqaansan yahay.

Maadaama khamradu dhaawaco garaadka qofka, waa muhiim inaad go'aan gaarto kahor intaadan cabin khamriga si aad u go'aamiso sida aad iskaga ilaalin doonto inaad gaari wado adiga oo cabsan kadib marka aad cabtay.

### **Sharciga DWI ee Minnesota**

Qof cabay khamri dhan 0.08 ama ka badan (0.04 haddii qofku wado gaari ganacsi), kaasoo wada gaari soconaaya ama gaari baakin ku jira, ayaa la xiri karaa intuu sarqaansan yahay (DWI). Haddii sarkaalka booliis ah uu caddeeyo in khamri ay ku sababtay darawalka inuu galo khaladka gaari wadista, qofka waa la xiri karaa sabab la xariirta DWI markuu leeyahay heerka khamriga oo hoosaysa oo ah 0.04.

Sharcigaan aya sidoo kale qabanaaya shaqada gaariyaasha dalxiiska ee ka baxsan waddada ama doomaha yaryar.

### **Sharciga Ogolaanshaha Hadalka ah/Damaanada**

#### **Baarista**

Haddii sarkaalka sharci fulintu uu hayo sabab macquul ah oo uu ku aamino in darawalku uu sirkhaansan yahay uuna wadayo ama gacan ku hayo gaari mator ku shaqeeya, Darawalka waxaa laga doonayaa inuu dhiibo si loo baaro dhiigiisa, neeftiisa, ama kaadidiisa. Waa danbi inaad diido inaad soo gudbisoo baaritaankaan. Inaad diido marista baaritaanka ayaa keenaysa hal sano ilaa lix sano in lagaala laabto shattiga darawalnimada, ayadoo ku xiran tirada danbiyada diiwaanka kuu galay.

Sharcigan waxa kale oo uu khuseeyaa wadista baabuurta madadaalada ee ka baxsan waddada dadwaynaha ama waddada ama doomaha yaryar.

Sarkaalka booliis ah ayaa kaa codsan kara inaad ku neefsato aalada baaritaanka ee geeska waddada. Baaritaankaan neefta ee kahor intaan lagu xirin ayaa ka caawinaaya sarkaalka inuu go'aansho cadadka khamriga ee ku jira jirkaaga. Qalabkaan ayaa keliya loo adeegsadaa inuu muujiyo heerka khamriga ku jira jirkaaga natiijooyinkuna Waxay noqon karaan cadaymo xadidan oo loo isticmaalo maxkamada. Haddii lagu xiray, waa inaad keentaa baaritaanka dhiiga, neefta, ama kaadida oo loo adeegsan karo cadayn ahaan. Sarkaal kasta oo booliis ah ayaa kaa codsan kara inaad samayso baaritaanka marka aad:

- U xiran tahay DWI awgiis.
- Aad diido inaad qaadato baaritaanka kahor intaan lagu xirin.
- Aad qaadato oo aad ku guuldareysato baaritaanka neefta ee kahor intaan lagu xirin.
- Haddii aad qayb ka ahayd shil gaari oo la xariira khamri kaas oo keenay dhaawac shaqsi ah, waxyeelo hantiyeed, ama dhimasho.

Baaritaanka neefta ee kahor intaan lagu xirin ayaa faa'iido u leh darawallada u muuqda kuwo cabsan, laakiin aan cabsanayn. Xaaladaha caafimaadka qaarkood ayaa leh astaamo lamid ah kuwa ku sirkhaansanaanta. Saraakiisha booliiska ayaa caawimaad caafimaad u qaadi doona darawallada jiran.

## **Ciqaabta**

Ganaaxyada la xariirta shatti kala laabashada la xariirta isticmaalka khamrada waxaa kamid ah qarashka soo celinta shattiga oo dhan \$680, codsiga shattiga darawalka waxaana sidoo kale lagaa dooni karaa inaad iska diiwaan geliso Barnaamijka Aalada Barashada Matoorka (Ignition Interlock). Danbi kasta wuxuu leeyahay ciqaabaha danbiga oo gaar ah oo dheeraad ku ah xanibaadaha maamulka, ayadoo ku xiran xaalada xarigga, jabinta hore ee sharciga darawalka, iyo diiwanaka danbiyada. Ganaaxyada ayaa ahaan doona kuwo daran haddi darawalku:

- Horay loogu xiray DWI darteed.
- Uu heerkiisa khamrigu gaaray 0.16 ama ka badan.
- Uu gaariga ku jiray ilmo ka yar 16 jir xiliga sarkaalku joojiyay.
- Uu ka yar yahay 21 sano jir.
- Uu diido baaritaanka kahor intaan la xirin.

Darawalka lagu helo inuu cabay khamri dhan 0.08 ama ka badan, ama diida inuu qaato baaritaanka si loo go'aansho heerka khamriga uu cabay, ayaa heli kara shattiga ku meelgaarka ah ee todobada maalmood ah. Marka mudada todobada maalmood ah dhamaato, shattiga darawalnimada ee danbiilaha ayaa lala laaban doonaa.

### **Danbiga Koobaad**

- Shatti kala laabashada ugu yar oo ah 90 maalmood (30 maalmood haddii qofku qirto danbiga uu ka galay ee DWI).
- Lama bixin doono ogolaanshaha shaqada ilaa ay 15 maalmood ee mudada kala laabashada shattigu dhammaato, iyo ilaa oo ay shuruudaha soo celinta shattiga la buuxiyo. Ogolaanshaha shaqadu maaha dookh ay heli karaan darawallada cabay khamriga dhan 0.16 ama wax ka badan.
- In laga diiwaan gasho Barnaamijka Aalada Kahortagta Gaari Wadista (Ignition Interlock) markaad khamro cabto ayaa ah dookh furan.
- 90 maalmood oo xabsi ah iyo/ama \$1,000 oo ganaax ah.

### **Danbiga Labaad**

- Ugu yaraan hal sano in lagala laabto shattiga haddii danbiga labaad dhacay 10 sano gudahood kadib danbigii koobaad.
- In laga diiwaan gasho Barnaamijka Aalada Kahortagta Gaari Wadista (Ignition Interlock) markaad khamro cabto ayaa qasab laga dhigi karaa.
- Hal sanno oo xabsi ah iyo/ama \$3,000 oo ganaax ah.
- Taargooyinka shattiga ayaa lala wareegayaa.

### **Danbiga Sadexaad**

- Waayitaanka shattiga ugu yaraan saddex sano, haddii dembiga saddexaad uu dhacay 10 sano gudahood ee labadii dembi ee hore.
- Shattigaaga ayaa la joojinayaa.
- Baaritaanka adeegsiga kiimikada ayaa qasab ah.

- In laga diiwaan gasho Barnaamijka Aalada Kahortagta Gaari Wadista (Ignition Interlock) markaad khamro cabto ayaa qasab ah.
- Hal sanno oo xabsi ah iyo/ama \$3,000 oo ganaax ah.
- Gaariga ayaa lala wareegayaa taarikooyinkana waa lala wareegayaa.
- Xabsi ama damaanada ugu adag iyo in lagugu xiro aalad elektaroonig ah oo lagugula socdo.

## (Ignition Interlock) Barnaamijka Kahortaga Gaari Wadista Markaad Khamro Cabto

Barnaamijka Kahortaga Gaari Wadista Markaad Khamro Cabto (Ignition Interlock) wuxuu kor u qaadaa badqabka dadwaynaha asagoo kormeeraya dadka khamriga cabay ayagoo gaari wada. Aalada kahortagta gaari wadista dadka khamriga caba ayaa lagu rakibaa laguna xiraa daaraha gaariga. Si aad u daarto gaariga, darawalku waa inuu ku neefsadaa aalada. Aalada ayaa ka difaacaysa gaariga inuu kaco haddii ay ogaato in heerka khamriga qofku cabay uu yahay ama ka badan yahay 0.02.

Dadka markoodii koobaad galay danbiga khamri cabid heerka khamrigu gaaro 0.16 ama ka badanyahay ayaa haysta fursad ay kusoo ceshanayaan shattigooda ayagoo ka qaybgalaya Barnaamijka Kahortaga Gaari Wadista Marka aad Khamro Cabto. Darawallada ruqsadahooda la kansalay iyo kuwa aqoonsigooda loo diiday "inay khatar ku yihiin badqabka bulshada" ayaa laga doonayaa inay iska diiwaan gashaan Barnaamijka Kahortaga Gaari Wadista Markaad Khamro Cabto muddo sadex ilaa lix bilood ah si ay usoo ceshtaan aqoonsigoda buuxa ee darawalnimada.

### Danbiga wayn ee DWI

Waxaa lagugu xukumi karaa danbi wayn oo DWI ah haddii lagugu soo xiro inaad: gashay danbigii afraad oo DWI ah muddo 10 sano ah gudaheed; horay laguugu xukumay danbi wayn oo DWI ah; lagugu xukumay inaad fal danbiyeed dil ah ku gashay gaariga adigoo cabsan khamri ama daroogo.

Danbiga afraad ayaa keeni kara inaad lumiso shattiga sanadka afraad iyo ilaa dhaqan celinta iyo shuruudaha kale ee soo celinta shattiga la buuxsho. Ciqabaadka danbiga ee DWI waxaa ku jiri kara in lagugu xukumo ilaa 7 sano oo xarig ah oo leh sii dayn shanta sano oo shuruud leh iyo \$14,000 oo ganaax ah.

## Khamri Cabida adoon Qaangaarin — Sharciga Mamnuucida

Da'da sharciga ah ee iibsashada iyo cabida khamriga gudaha Minnesota waa 21 sano jir. Waa sharci daro in qof ka yar 21 sano inuu wado gaari asagoo ay jirkiisa ku jirto cadad kasta oo khamri ah. Haddii lagugu xukumo danbigaan waxaa lagaa mamnuuci doonaa inaad gaari wado muddo 30 maalmood ah. Danbiga labaad ayaa keenaaya in gaari wadista lagaa mamnuuco muddo 180 maalmood. Aad ka tagtay meesha shilka gaariga aad waday ka qaybta ahaa ka dhacay.

## Shatiga Darawalnimada Ganacsiga iyo Khamrada iyo Maandooriyaasha

Waxaad waayi doontaa shatigaaga ganacsiga ugu yaraan hal sano dembiga koowaad haddii aad:

- Wado gaari ganacsi adiga oo heerka khamrada kugu jirtaa ay dhantahay 0.04 ama ka badantahay. Haddii heerka khamrigaagu ka yar yahay 0.04, laakiin baaritaanka lagu ogaado in ay kugu jiro, waxaa lagaa mamnuuci doonaa shaqada 24 saac.
- Haddii aad baabuur waddid marka heerka khamriga kugu jirtaa ay tahay .08 ama ka badantahay.
- Haddii aad diid baaritaanka dhiiga, neefta, ama kaadida marka aad waddid baabuur.
- Marka aad ku daroogaysantahay saamaynta maandooriye.
- Marka aad iska tagtay goob uu shil ka dhacay ku leg leh baabuur aad wadatay.
- Marka aad isticmaashay baabuur si aad dembi u gasho.

Haddii danbigu dhaco intaad wado gaari ganacsi oo ay saaran yihiin alaabo khatar ah, waxaad lumin doontaa shattiga darawalka ugu yaraan muddo sadex sano ah. Maandooriyaasha Saaran Gaariga Dembiga labaad ayaa waxa uu keenayaa in lagaa qaado shatiga darawalnimada ganacsigaaga. Isticmaalka gaari ganacsi si aad u samayso fal-dembiyeed ku lug leh walxaha la xakameeyey waxay kugu keeni doontaa waayida shatiga ganacsigaaga. Darawalada haysta shattiga ganacsiga ee loo xiro dadka wadista gaadhi rakaab ah iyaga oo sakhraasan/daroogsaysan ma awoodi doono in uu helo ogolaanshaha shaqada ee gaadiidka ganacsiga inta lagu jiro wakhtiga ka bixida sakhraansanaanta.

## **Sharciyada kale ee la xiriira Khamriga iyo Walxaha la Kontoroolo/Daroogada**

### **Xashiishada**

Waa sharci darro in baabuur la wadoo iyada oo lagu daroogaysanyahay shay xashiishad ah, hemp la cuni karo oo heer hooseeya, shay xashiishad macmiil ah oo hemp ka timid, xashiishad si macmal ah loo soo saaray, ama tetrahydrocannabinols.

### **Isticmaalka**

Waa sharci darro in qofku isticmaalo ubaxa xashiishadda, shay xashiishad ah, hemp la cuni karo oo heer hooseeya, shay macmiisha loogu talagalay oo ka samaysan hemp, shay ka samaysan xashiishad macmal ah, ama shay kasta oo kale oo ay ku jirto xashiishad si macmal ah loo soo saaray oo ku dhex jirta gaariga marka gaarigu ku jiro waddo ama waddo weyn.

### **Sharciga Haysashada iyo Baakada Furan**

Waa sharci darro in qofku marka uu ku jiro gaariga gaarka loo leeyahay ee uu ku jiro waddo ama waddo weyn oo uu haysto ubax xashiishad ah ama badeecad xashiishad ah, hemp awood hoose oo la cuni karo, shay macaamiisha loogu talagalay oo ka samaysan hemp, ama shay kasta oo kale oo ka kooban xashiishad si macmal ah oo laga soo saaray baakadda lagu soo gaday, baakadda la furay ama shaabadda ayaa laga jeexay, ama qayb ka mid ah waxa ku jira laga saaray baakadda. Waa la ogol yahay in baakadu ay ku jiro bootka dambe ee gaariga ama meel kale oo gaariga ka mid ah oo aanay si caadi ah u joogin darawalka iyo rakaabku haddii aanu gaarigu lahayn boot dambe. Ku haysashada baakad qaybta alaabta la gashado ee shirka hore ama qaybta jeebka ah ee shirka gaariga lama ogola.

Waxa kale oo sharci darro ah in mulkiilaha gaadhiga gaarka loo leeyahay, haddii mulkiiluhu uuna la joogin baabuurka, inuu hayo ama la ogolaado in lagu hayo gaariga marka uu gaarigu marayo waddada yar ama waddo weyn wixii ah ubaxa xashiishadda ama shay xashiishad ah, hemp awood hoose oo la cuni karo, shay macaamiisha loogu talagalay oo ka samaysan hemp, ama shay kasta oo kale oo ka kooban xashiishad si macmal ah oo laga soo saaray baakadda lagu soo gaday, baakadda la furay ama shaabadda ayaa laga jeexay, ama qayb ka mid ah waxa ku jira laga saaray baakadda.

### **Weel Khamro furan**

Waa sharci darro in lagu cabbo, ama lagu haysto weel khamro furan, oo cabitaan kasta oo khamri ah gudaha gaariga marka uu socdo waddo dadweyne ama waddo jidweyne ah. Sidoo kale waa sharci darro in rakaabka loo oggolaado inuu ku cabbo, ama uu ku haysto weel furan, cabitaan kasta oo khamri ah gudaha gaariga.



## **Walxaha la kontoroolaa in ay ku dhexjiraan baabuurta**

Waa sharci darro in baabuur lagu isticmaalo, lagu dhex haysto ama lagu iibiyo walxaha la kontaroolo.

*Cutubkani wuxuu kaa caawinayaa inaad hesho adeegyada iyo macluumaadka Minnesota ee la xiriira wadista baabuurta.*

## Adeegyada Webhaadka

Adeegyada iyo macluumaadka khadka interneedka ah ayaa laga heli karaa [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov). Waa tan muunad tusaale waxa aad samayn karto:

- Ballanso ama dib u dhigo ballanta imtixaanka waddada ama Imtixaanka qoran ee Class D ah.
- Hubi si aad u aragto in mudnaantaada wadista baabuurta ay ansax tahay.
- Inaad ka warbixiso iibka gaari.
- Inaad cusbooneysi diiwaangelinta gaarigaaga.
- Inaad hesho goobta xafiiska ee kuugu dhow.
- Inaad ka daabacato buuga shatiga darawalnimada.
- Soo dejiso foomamka iyo macluumaadka la xiriira shattiga darawalnimada iyo wadashada iyo lahaanshaha gaariga.
- Ka hel iskuullada waxbarashada darawalnimada ee la ansixiyey iyo xarumaha hagaajinta barista.

## Goobaha Xafiisyadu ku yaallaan

Adeegga Shattiga darawalnimada iyo gaadiidka ayaa laga heli karaa in ka badan 200 goobood oo gobolka oo dhan ah. Macluumaadka goobta xafiiska ayaa la heli karaa 24/7.

Booqo [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov) ama soo wac 651-297-2005.

## Xiriirada

Email: [dvs.driverslicense@state.mn.us](mailto:dvs.driverslicense@state.mn.us)

Ballanta Imtixaanka Waddada (Magaalada weyn iyo nawaxigeeda Keliya)....

..... 651-284-1234

Goobaha Xafiisyada .....651-297-2005

Macluumaadka Shatiga Darawalnimada..... 651-297 -3298

Macluumaadka CDL .....651-297-5029

Qiimaynta Darawalka..... 651-296-2025

Kahortaga Gaari Wadista Markaad Khamro Cabto ..... 651-296-2948

U Hogaansanka Caymiska Eed La'aanta ..... 651-296-2025

Taariqada la xiray..... 651-297-5034

Diiwaangelinta Baabuurta iyo Lahaanshaha..... 651-297 -2126

Taariqada Khaaska ah .....651-297-3166

Kaalmada Macmiilka ee Maqalka Naafada ka ah (TTY/TDD).... 651-282-6555

## **Adeegyada kale ee Gobolka**

Khadka Macluumaadka Ilaalada Waddada ee Gobolka..... 651-201-7100

MnDOT Xaaladaha Waddada..... 511 ama booqo [www.511mn.org](http://www.511mn.org)

Adeegyada Gaariyada ee MnDOT ..... 651-215-6330

## **Macluumaadka Macmiisha**

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee MN..... 651-296-3353

Khadka Bilaashka ah..... 800-657-3787

Minnesota Relay (ee loogu talagalay dadka maqalka naafada ka ah) ...

..... 800-627-3529

Websayd: <https://www.ag.state.mn.us/Office/ContactUs.asp>

## **Diiwaangelinta Cod Bixiyaha**

Halkii uu qofku "ka dooran lahaa" isu diiwaangelinta codaynta marka uu codsanayo ama cusboonaysiinayo shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga, xogta codsadhaha bixiya dukumeenti muwaadinimo (Baasaboorka Mareykanka, Shahaadada Dhalashada Mareykanka, Shahaadada Muwaadinimada, iwm.) si toos ah ayaa loo gudbin doonaa Xafiiska Xoghayaha Dawladda si uu u diiwaangeliyo shakhsiga si uu u codeeyo.

Haddii shakhsigu hore uga codsaday Minnesota aqoonsi, DVS waxa laga yaabaa in aysan haynin diiwaanka dukumentiyada ee uu shakhsigu isticmaalay si uu cadeeyo aqoonsiga. Qofka ayaa wuxuu bixin karaa dukumeenti muujinaya jinsiyadda si uu u bilaabo nidaamka diiwaangelinta

codbixiyayaasha ee nidaamka cusub. DVS uma diri doonto xogta Xafiiska Xoghayaha Dawladda haddii codsadu uu bixiyay dukumeentiyadan kahor Oktoobar 1, 2023.

Haddii shakhsigu uuna rabin in loo diiwaangaliyo si uu u codeeyo kadib marka uu siiyo DVS dukumentiyada muwaadinimada, waa in ay Xafiiska Xoghayaha Dawladda ogaysiiyaan is ayna doonaynin. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codaynta waxaa laga heli karaa: [www.sos.mn.gov/elections-voting/register-to-vote/](http://www.sos.mn.gov/elections-voting/register-to-vote/)

## **Ku deeqidda Xubnaha, Isha iyo Unugyada**

Ku deeqidu waa hadiyad qurux badan oo aan hagar la'aan ah. Hal qof ayaa go'aanka ku badbaadin kara oo bogsiiin kara ilaa 75 qof. Baahidu aad ayey u badantahay: kumaan kun oo qof ayaa sugaya isbeddel nafta badbaad kara ama kor u wanaajinta tayada nolosha.

Arjigaaga shattiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga Minnesota qaxaa ku jira qayb aad ku muujin karto rabitaankaaga inaad noqoto qof xubnaha ku deeqa geerida kadib. Tani waxay u adeegaysaa in ay tahay oggolaanshahaaga, laakiin sidoo kale waa muhiim inaad qoyskaaga la wadaagto go'aankaaga. Xataa darawalada da'doodu ka yar tahay 18 jir waxay

isu magacaabi karaan deeq-bixiye xubno iyagoo ogolaansho waalidka ka haysta.

Xubnaha lagu deeqi karo waxaa ka mid ah wadnaha, sambabada, beerka, kelyaha, xameetida iyo xiidmaha. Xubnaha waxaa loo qoondeeyaa qofka la siinayo iyadoo lagu salaynayo degdegga xaalada caafimaad, muddada sugitaanka, isbarbardhigga hidde-sidaha iyo deegaanka. Indhaha oo dhan ama qaybta dhexda ee indhaha ayaa lagu deeqi karaa si ay qof uga caawiyaan soo celinta aragga. Unugyada, lafaha iyo xiddidada wadnaha ayaa loo isticmaalaa qalliinnada dib u dhiska si loo hagaajiyo maqaarka dhaawacmay, cilladaha wadnaha iyo waxyaabo badan. Habka deeqdu kama hortagayso u adeegsiga naxashka furan ee maydka. Wax lacag ah lama siinayo qofka bixiyey deeqaha ama qoyskooda. Booqo [Donatelifemn.org](http://Donatelifemn.org) si aad u hesho manhajka buuxa ee agabka waxbarashada deeqaha. Wixii macluumaad dheeri ah ee ku saabsan ku deeqidda xubnaha ama unugyadd, la xiriir LifeSource kala xiriir 1-888-5-DONATE (1-888-536-6283) ama booqo [Life-Source.org](http://Life-Source.org).

Macluumaad ku saabsan ku deeqida indhaha oo dhan ama qaybaha dhexda ee indhaha, kala xiriir Lions Gift of Sight 1-866-88-SIGHT (1-866-887-4448) ama booqo [Lionsgiftofsight.umn.edu](http://Lionsgiftofsight.umn.edu).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ku deeqidda unugyada, la xiriir American Donor Services 1-877-365-DON8 (1-877-365-3668) ama booqo [Americandonorservices.org](http://Americandonorservices.org)

## **Index**

Gaari u wadidda si Xun .....	114
Buufinta amaanka .....	56
Khamriga iyo Gaari Wadista .....	129
Badqabka Xoolaha .....	56
Baaskiilada .....	73
Aaga Qarsoon .....	40
Gaariyaasha kaamka iyo Tareelayaasha .....	115
Kaarboon Monoxide .....	124
Darawalnimada Bilaa Taxadarka ah ee Dayaca Badan .....	66
Qaadista Alaab Gaariga Ka horaysa .....	114
Beddelashada Haadadka .....	39
Kursiga Badbaadada Carruurta .....	54
Gaariyaasha Ganacsiga .....	74
Shilalka .....	113
Khamro Cabista iyo Gaari Wadista .....	129
Shattiga darawalnimada	
Shaqada Socota ee Ciidanka .....	28
Codsashada .....	13
Keen Aqoonsiga .....	13
Burinta Shattiga Darawalnimada Ganacsiga .....	128
Shattiga Darawalnimada Ganacsiga .....	27
Daroogada iyo Gaari Wadista .....	129
Gaadiidka Gurmada .....	50
Ogolaanshaha Dheeraadka ah ee Shattiga .....	27
Khidmadaha .....	I
Qaadashada Shattigaaga Darawalnimada .....	11
Nidaamka Shattiga Darawalka Qalinjabiyay (GDL) .....	20
Ogolaanshaha barista waditaanka .....	20
Qaybaha/noocyada Shattiga .....	25
Caddaynta Isbadalka Magaca .....	15
Peace Corps iyo Shaqaalaha Adeega Arimaha Dibada ee Federaalka .....	29
Shattiga Ku meel Gaarka ah .....	21
Cusboonaysiinta iyo Beddelaada .....	28
Shatti Kala laabashada .....	133
Imtaxaanka Waddada .....	17
Shaqo ka hakin .....	125
Baaritaanka Aragga/Indhaha .....	16
Qofkee ayaan Heli Karin Shattiga darawalnimada .....	12
Qofkee ayaan u baahnayn Shattiga Minnesota .....	11
Imtaxaanka Qoran .....	16
Ka cararida Sarkaal Booliis ah .....	68
Gaari ku wadista Waddada Wayn .....	107

Aaga Shaqada ee Jidka Wayn.....	78
Kaararka aqoonsiga .....	30
Ignition Interlock.....	134
Darawalnimo kala dhiman.....	129
Leexashada J.....	46
Haadadka	
Beddelashada Haadadka.....	39
Calaamadaha Haadadka.....	101
Calaamadaha Adeegsiga Xakamaynta Laynka.....	80
Laymanka Waddada.....	39
Mootooyinka .....	73
Baaskiilada Matoorka ku shaqeeya .....	73
Baakinka.....	43
Dhaafitaanka gaariyada kale.....	48
Calaamadaha Laamiga .....	100
Dadka Lugeynaya.....	58
Isgoysyada Waddada Tareenka .....	76
Diiwaangelinta Gaarigaada.....	58
Xaqa waddada iyo boos Siinta .....	64
Meertada (Roundabouts) .....	44
Kursiga Badbaadada Carruurta.....	47
Basaska iskuulka .....	33
Ilaalada Badqabka Iskuulka.....	63
Suunka Badbaadada .....	54
Tilmaamidda/Fareejaynta .....	39
Calaamadaha .....	67
Xaddidaada Xawaaraha .....	33
Joogsiga.....	51
Shilka Gaadiidka .....	49
Sharciyada Gaadiidka.....	33
Calaamadaha Taraafikada.....	77
Leexashooyinka.....	41
Shuruudaha Gaariga .....	31
Waxa aad Samaynayso aadna Filan Karto marka Uu ku joojiyo Booliisku.....	66
Gaari Wadista Jiilaalka/Xilliga Barafka .....	94
Gelitaanka Haadka (Zipper Merge).....	79